GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

# MAXDARQORAALKA

## CUTUBKA 3AAD:
## DHULKA, HANTIDA IYO DEEGAANKA

KULAMADA 22AAD IYO 23AAD

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

MAARSO 2024

Tusmo


Gogoldhig ........ 3

CUTUBKA 3AAD: DHULKA, HANTIDA IYO DEEGAANKA ........ 4

Kulanka 22aad: ........ 4
Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf (Idow): ........ 4
Sen. Said Abdi Hussein: ........ 9
1) Sen. Zamzam Abdullah Ahmed: ........ 10
2) Xil. Ahmed Abdi Koshin: ........ 12
3) Xil. Mahdi Mohammed Gulaid: ........ 15
4) Xil. Mahad Abdalla Awad: ........ 18
5) Xil. Dahir Amin Jeesow: ........ 20
6) Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane: ........ 22
7) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan: ........ 24
8) Xil. Mohamed Adam Moalim Ali. ........ 26
9) Xil. Mohamed Muhumed Mohamed "MMM": ........ 27
10) Xil. Roda Arab Sharif Abdi: ........ 29
11) Xil. Mukhtaar Mohamed Guled: ........ 31
12) Xil. Mohamed Omar Aimoy: ........ 32
13) Xil. Mohamed Abdi Mohamed: ........ 34
14) Xil. Sahro Abdullahi Igal: ........ 36

Kulanka 23aad: ........ 38
1) Sen. Deqa Hassan Hussein: ........ 38
2) Xil. Shariif Mohamed Abdalla: ........ 40
3) Sen. Abdihakim Moallim Ahmed: ........ 42
4) Xil. Saredo Mohamed Abdalla: ........ 45
5) Xil. Abdi Ibrahim Warsame: ........ 46
6) Xil. Omar Hanshi Ibrahim: ........ 48
7) Sen. Mohamed Abdi Osman: ........ 49
8) Xil. Mohamed Muhumed Mohamed: ........ 51
9) Xil. Amina Hussein Ali: ........ 53
10) Sen. Abdirisak Mohamed Osman: ........ 54
11) Xil. Mohamud Abdulkadir Haaji Jeego: ........ 55
12) Xil. Abdulasis Mohamd Mohamud QAMBI: ........ 55
13) Sen. Saynab Ismail Mohamed: ........ 58
14) Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur: ........ 61
15) Xil. Mohamed Abukar Abdi. ........ 62

**Gogoldhig**

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) waxa uu diyaariyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dasuurka Federaalka Ku-meel-gaarka ah. Kaddibna waxaa ansixiyey Guddiga La-socodka iyo Hirgelinta Dasuurka ee BFS. GMDHD markii uu diyaarinayey soojeedinta wax-kabeddelka waxa uu latashiyo ballaaran la sameeyey qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin culummada, ururrada bulshada rayidka, dhallinyarada, haweenka iyo wakiillada dawlad goboleedyada. Waxa kale oo guddigu aruuriyey ra'yiga dadweyne farabadan oo ku kala sugan dalka gudihiisa iyo dibaddiisa iyada oo la isticmaalayo bogga guddigu ku leeyahay internetka. Guddigu waxa uu tixgeliyey fikradaha dhammaan dadkii ka qaybqaatay wadatashiyada. Wadatashiyadaas waxaa iska kaashaday hay'adaha u xilsaaran dastuurka sida GMDHD, Guddiga La-socodka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

Cutubka 3aad waa cutub xeerinaya arrimaha dhulka, hantida iyo deegaanka oo ka kooban sedddex qodob. Cutubkan waxa uu inta badan ku salaysan yahay heshiisyo siyaasadeed oo uu gaaray Golaha Wadatashiga Qaran.

Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya ayaa loo soo gudbiyey Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad iyo warbixin faahfaahsan oo la socotay soojeedinta. Golayaasha Baarlamaanka ayaa billaabay ka doodista soojeedinta wax ka-beddelka dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad ee Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah.

Maxdarqoraalka hortiinna yaalla waxaa laga diyaariyey doodaha xildhibaannada labada gole ay ka yeesheen Cutubka 3aad ee Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka. Xildhibaannadu laba kulan ayey ku soo jeediyeen fikirkooda oo ay ugu dul istaageen qodob qodob iyo faqrad faqrad iyaga oo sameeyey soojeedinno iskugu jira ku celin asalka dastuurka, siiqo toosin, soojeedin meehas ka saaris. Madxadqoraalka hoose waa hadalkii xildhibaannada oo sidoodii loo qoray iyada oo aan wax isbeddel ah lagu sameyn. Waxaa kale oo doodda xildhibaannada laga diyaariyey falanqeyn baaxad leh oo ku saabsan soojeedinnadoodii oo si gooni ah xubnaha labada gole loola wadaagayo. GMDHD waxa ay dib-u-eegis iyo isbeddel ku sameeyeen soojeedinta wax ka-beddelka qodobbada iyo faqrooyinka Cutubka 3aad iyaga oo tixgelin siiyey fikradihii xubnaha labada gole iyo latashiyadii qaybaha kala duwan ee bulshada.

Taariikh: Maarso 6, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 22aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeysa |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: 140 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: 30 Sanator |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:15 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:00 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Xil. Sacdiya Yaasiin Xaaji Samatar. |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Quraanka Kariimka ah.
(2) Ansaxinta Ajendaha.
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Sii wadidda ka doodista soojeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 3aad: Dulka, Hantida iyo Deegaanka (Qodobbad 42aad ilaa 47aad)

## CUTUBKA 3AAD: DHULKA, HANTIDA IYO DEEGAANKA

**Kulanka 22aad:**
Guddoomiye Sacdiya: Asalaamu Calaykum. Dhammaantiin waan idin salaamay ducadaas iyo Quraanka Allah ha inoo aqbalo. Maanta sidaan ognahayba cutubka 3aad ee ka hadlaya Dhulka, Hantida iyo Deegaanka ayaa la billaabayaa. Markaa kii labaad ee hore la soo xiray waxaan rabnaa, inaan ku wareejiyo guddiga inay ku soo dhawaadaan si ay uga warbixiyaan wixii horay xildhibaannadu ka doodayeen, iyo kan billaabmayana ay faahfaahintii inoo akhriyaan. Markaa guddigu inay soo dhowaadaan ayaan rabaa.

**Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf (Idow):**
Mudanayaasha sharafta leh, waxaan filaa Cutubkii 2aad ayaan soo idlaynay. Maanta waxaan galaynaaCcutubka 3aad. Laakiin waxaan rabaa inaan isla sagootinno Cutubkii 2aad, waxa uu ahaa cutub dheer. Dooddii mudanyaasha sharafta leh ay yeesheenna dood dheer ayey ahayd. Xoghaynta labada guddi u shaqeeyana qoraal labo boqol oo '*page*' ka badan bay ka sameeyeen oo xildhibaan kasta *database*-ka marka guddiga u tago ay awood u leeyihiin inuu hubiyo ama mustaqbalka dheer in '*record*' laga soo helo waxa xildhibaan kasta ku hadlay markuu qodob ama faqrad gaar ah ka hadlayey.

Afar maalin ee 24,26,28 bisha Febaraayo iyo 2 Maarso ,afartaas fadhi ayaa Cutubka Labaad dooddiisu socotay. Waxa aan rabaa inaan wax yar anoo aan wixii laga sheegay kama sheegi karo. Laakiin, waxaan rabaa meelaha ugu muhiimsan oo ay xildhibaannadu taabteen wixii laga yiri meel bay inoogu qoran yihiine waana la dhuuxi doonaaye, inaan waxyaalihii ugu muhiimsanaa aan isla eegno. Kaddibna Sen.Siciid Cowke ayaan u yeeri doonaa si uu Cutubka 3aad uu hordhiciisa inoogu sameeyo kaddibna aad dooddeena galno.

- **Qodobka 11aad:** Ee la xiriira sinnaanta oo xildhibaannadii labada gole oo halkan ka hadlay aad ayey uga hadleen.

- **Qodobka 11(1):** Oo u dhigan: "Muwaaddiniinta oo dhan, iyaga oo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho, isir, da' iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba way u siman yihiin xeerka hortiisa, si waafaqsan Shareecada Islaamka."
- Xildhibaanadii halkan ka hadlay aad bay arrintaas uga hadleen, waxaana la soo jeediyey ereyga muwaaddiniinta; maddaama, dalka dad badan oo aan muwaaddiniin ahayn ay ku hoos noolyihiin qaanuunkiisa iyo dastuurkiisa, in loo beddelo qofkasta.
- Ereyga diintana oo ku jirta meeshana aan cidna lagu takoorin oo adeegga iyo xuquuqda sharciga hortiisa iyo dastuurka dalka inaan cidina; laakiin, meesha muwaaddiniinta soo koobaysa in laga dhigo qofkasta inuu xeerka hortiisa la simanyahay qofka kale.

- **Qodobka 11(4)**: Oo u dhigan: "Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab faldembiyeedka uu galay." Faqraddaas waxaan u malaynayaa in xildhibaannadu ay aad u dul istaageen iyadoo aad looga hadlay waxaana loo arkay inay taabanayso xasaanadda xildhibaannada iyo masuuliyiinta kale ee xasaanadda leh. Markaa waxaa la soojeediyey in loo siiqeeyo, in meesha laga saaro ama loo siiqeeyo qaabse ayna taabanayn xasaanadda mudanayaasha iyo dadka kale ee masuuliyiinta ee xasaanadda leh uu dastuurku siinaayo ama meesha laga saaro, sidaas lagu soo dhammeeyey.

- **Qodobka 12aad:** Ee la xiriira dhaqangelinta xuquuqda asaasiga ah, kaas wax wayn lagama sheegin.

- **Qodobka 13aad: Xaqa Nolosha. Qodobka 13(1)**: Oo u dhigan: "Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nolol". Waxaa la soo jeediyey in faqraddaas la siiqeeyo oo la qurxiyo **lagana dhigo qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu noolaado.**

- **Qodobka 13(2):** Waxay qeexaysaa in qofna aan nafta looga qaadi karin sifo aan waafaqsanayn habka xeerku tilmaamayo, taas oo ku imaan karta oo kaliya go'aan maxkamadeed oo kama danbays ah.

- **Qodobka 13(3):** Oo la xiriirta soo rididda ilmaha,waxay u dhigantahay "Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii ayna keenin xaalad caafimaad, oo aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo uu sugay guddi dhaqaatiir ah oo lagu kalsoonyahay."

  Arrinkaas markaa waxaa aad xildhibaannadu u dul istaageen guddi dhaqaatiir '*emergency*' markay jirto, xaalad oo degdeg inaanu suurgal ahayn in guddi dhaqaatiir ah arrintaas '*emergerncy*' ah la tacaalaan. Markaa waxaa la soo jeediyey in loo dhigo faqraddaas **dhaqtar hufan oo awood u leh go'aan inuu gaaro ,sidaas in loo dhigo ayaa aad loo soo jeediyey.**

- **Qodobka 14aad:** Ee la xiriira xorriyadda iyo nabadgelinta qofnimada. **Faqradiisa 2aad** oo u dhigan: "Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa iyo hantidiisa; qofna looma geysan karo qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadannimada ka baxsan; waxaana reebban xarig aan sharciga waafaqsaneyn iyo wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka.

Qodobkaas in la balaariyo carruurtana lagu daro '*protection*' oo la yidhaahdo **kan lagula kaco carruurta iyo haweenka baa la soo jeediyey.**

- **Qodobka 14(4):** Oo la xiriira gudniinka oo u dhigan: "Gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha waa caado naxariisdarro ah iyo xaqiraad u dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay." Waxaa la soo jeediyey aragti. Waxaa jirtay oo dhowr mudane soo jeediyeen in faqraddaan xeerarka in loo qaado inta halkan lagu qori lahaa ay habboontahay. Waxaa kale la soojeediyey, gudniinka dhan la reebo oo aan gudniin asalkaba la ogalaan mid fircooni ah iyo mid yar toona. Doodda ayaa halkaas sidaas ayey u dhacaysay. In faqraddan sideeda loo daayo maddaama midkii dadka dhibaataynaayey oo fircooniga ahaa ay mamnuucayso in sideeda loo daayo. Midda kale oo sunnadu ogoshahay, la dhaafana doodda waa ku jirtay.

- **Qodobka 15aad:** Oo u dhigan: "Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro dad kale." Waxaa la soo jeediyey in luuqo ahaan la toosiyo oo laga dhigo **urur, koox ama xisbi** si luuqad la fahmi karto ay u noqoto.

- **Qodobka 17aad:** Oo la xiriira xorriyadda diinta iyo caqiidada oo asalkii dastuurka ku jiray; laakiin, halkan laga tiray waxaa la soojeediyey in la soo celiyo maddaama dalka ay ku noolyihiin boqolaal Soomaali ahayn oo u jooga sababo kala duwan, oo dad ganacsi u iman karaan, dhakhaatiir, macallimiin, xirfadlay badan, diblomaasiyiin ama shisheeye aan tiro lahayn oo danahooga dalka u jooga; isla markaana xaq u leh in ay diintooda haystaan.

- Markaas **qodobka 17(1)** Oo sidaas u dhignayd in la soo celiyo aad ayaa loo soo jeediyey, iyadoo lala akhrinaayo faqraddaas qodobka labaad ee dastuurka oo Cutubka 1aad ku jira oo u dhigan: "diin aan ahayn diinta islaamka laguma faafin karo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya."

- Markaa maddaama faafintu reebbantahay; laakiin, haysashada oo xoriyatul caqiida in qodobkaas dadka ajaanibta ah ee dalka ku nool, inay xaq u leeyihin inay caqiidadooda haystaan; laakiin, ay reebbantahay inay faafiyaan.

- **Qodobka 17aad:** Xurmada Hoyga, faqraddiisa 1aad oo u dhigan "Qofna hoygiisa ama meelaha kale iyo waxyaabaha u gaarka ah lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis" Waxaa la soo jeediyey in erey ku jiray asalka oo ah **lama geli karo** oo meesha laga saaray in la soo celiyo, sidoo kalena waxyaabaha lagu beddelo agabkiis." Waxyaabaha kale waxay noqon karaan agabkiisa macnaha technology-jiyada, asaga gaarka ah uu leeyahay lagu soo daro, sidoo kalena isla faqradda lagu soo daro nuxur dhahaya: "qofna lama dhegaysan karo ayadoo technology-jiyada casriga ah la adeegsanayo" oo faqradda la ballaariyo.

- **Qodobka 18aad:** Ee la xiriira Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi Wadareedka, **faqraddadiisa 1aad** oo u dhigan: "Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qayb galo kulammo ama bannaanbax, cabasho, taageero oo lagu muujinayo si xasillooni ah, iyadoo aan oggolaansho loo baahnayn, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxaa la soo jeediyey in meesha laga saaro in qofku oggolaasho bannaanbax loo baahanyahay sinnaba aan loogu baahnayn oggolaasho cidna oo laga dhigo xuquuq dastuuri ah.

- **Qodobka 20aad**: Xaqa Ka Qaybgalka Siyaasadda, **faqraddiisa 3aad** oo u dhigan: "Xuquuqda ku xusan Farqadaha (1) iyo (2) ee Qodobkan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan dastuurka iyo xeer uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya." Waxaa la soo jeediyey inaan meesha looga baahnayn; maddaama, in dastuurka lagu dhaqmo iyo xeerarka ay si macnawiya lagama maarmaan u tahay.

- **Qodobka 22aad:** Oo la xiriira Xuquuqda Shaqaalaha, **faqradiisa 1aad** oo u dhigan: **"**Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay, in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad." Waxaa la soo jeediyey fahandarro ayaa ku jirtay siiqo ahaan, inaan la fahmi karin luuqadda uu ku qoranyahay faqraddaas ayaa la soo jeediyey, isla markaana la toosiyo lagana dhigo: "Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo **fursad** shaqo oo ku dhisan caddaalad, meesha xiriir shaqo laga leeyahay si ay u sahlanaato in la fahmo.

- **Qodobka 22(3):** Oo u dhigan: "Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin, haddii aysan khatar ku ahayn nabadgelyada". Iyadana waxaa la soo jeediyey, in lagu qoro luuqad sahlan oo oo laga dhigo: "Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay **inuu tabashadiisa ku muujiyo shaqo joojin oo tabasho muujin iyo cabasho ay noqoto**.

- **Qodobka 22(5):** Oo u dhigan: "Qof kasa oo shaqaale ah, gaar ahaan haweenka, waxay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn". Waxaa la soojeediyey ereygaas **faraxumeyn,** in la ballaariyo oo laga dhigo **xadgudub** oo xadgudub oo dhan la reebo iyo cidkasa siiqaddana la ballaariyo.

- **Qodobka 22(6**): Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinnaan buuxda. Erayga dadka **naafada** ah waxaa la soo jeediyey in lagu beddelo dadka **baahiyaha gaarka qaba** in ay xuquuq la mid ah sida shaqaalaha kale iyo sinnaan inay ka helaan goobta shaqada.

- **Qodobka 23aad:** Deegaanka iyo Bii'ad Nadiif ah ciwaankiisu yahay, waxaa la soo jeediyey maddaama Bii'o iyo Deegaan ay isku mid yihiin in hal eray la isticmaalo oo laga dhigo **Deegaan Nadiif ah oo bii'ada meesha laga saaro, maddaama ay isla macno yihiin.**

- **Qodobka 24aad:** Hantida gaarka loo leeyahay**, faqraddiisa 2aad** oo u dhigan: "Dawladdu waxay si khasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud." Waxaa la soo jeediyey in meesha laga saaro ereyga loona dhigo "**Dawladdu waxay hanti gaar loo leeyahay la wareegi kartaa marka ay jirto dan guud". Waxa sidoo kale la xusay inay lagama maarmaan tahay, in qofka hantidiisa loo isticmaalayo danta guud uu xaq u leeyahay magdhow caddaalad ku dhisan lagana heshiiyey ama maxkamad go'aamisay.**

- **Qodobka 26aad:** Oo la xiriira Daryeelka Qoyska, **faqraddiisa 3aad** oo u dhigan "Daryeelka hooyada, dhallaanka iyo carruurta waa waajib qaran oo saaran dawladda." Waxaa la soo jeediyey in la ballaariyo dhallaanka iyo carruurta oo isku macno ah mid meesha laga saaro ama carruurta la isticmaalo; maddaama ay si iskugu soo noqnoqon.

- **Qodobka 27aad:** Ee Xuquuqda Carruurta la xiriira, **faqraddiisa 1aad** oo u dhigan: "Ubadku markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay, in loo bixiyo magac suubban iyo in si rasmi ah loo diiwaangeliyo." Asalka faqraddan waxaa ku jiray sidoo kale in la siiyo jinsiyadda. Markaa maddaama sharcigeenna ama xeerkeenna jinsiyadda uuna dhigayn in goob

dhalasho aan lagu helin jisiyadda meesha, waa laga saaray. Dad ajaanib ah ayaa waddanka ku dhalan kara, markaa qofkasta oo waddanka ku dhasha oo aan Soomaali ahayn, xuquuq ma yeelanayo jinsiyadda. Markaa waxaa lagu beddelay, "in la diiwaangaliyo magac suubban loo baxsho". Magacyada suubban waa iska *'relative'* oo qolo walba mid baa u suubban. Laakiin, magacyada Soomaalida intooda badan waxay salka ku hayaan dhaqan soo jireen ah iyo diinteenna suubban.

- **Qodobka 27(2):** Oo u dhigan: "da'da qaangaarnimada inay tahay 15 sano, halka da'da xilkasnimaduna inay tahay 18 sano. Aad ayaa looga dooday guud ahaan qodobkan gaar ahaan faqraddan. Mar sii horraysayna la tashigii culimada arrimihii saldhigga u ahaa ay ku jirtay da'du carruurta. Markaa waxaan soo jeedinlahaa, golaha baarlamaanka iyo Guddoonkaba, in la tashi gaar ah arrintaasi culimada lagala yeesho, oo baarlamaanku hal kulan inuu culimmadda fursad siiyo inay ku dhegaystaan. Maddaama la tashigii hore saldhigga u ahaayeen culimadu si la tashi kale baarlamaanku fursad u helo in culimmada laftigooda uu dhegaysto hal maalin oo golaha lagu casuumo.

- **Qodobka 28aad:** Oo la xiriira waxbarashada, **faqraddiisa 3aad** oo u dhigan: "Waxbarashada aasaasiga ah ee dugsiyada hoose-dhexe waa khasab." Waxaa la soo jeediyey in lagu daro, "Waxbarashada aasaasiga **barashada Qur'aanka kariima ah"**, iyadoo faqradda 7aad isla qodobkan ay ku sahabsantahay barashada diinta islaamka ee dugsiyada dowaladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

- **Qodobka 30aad:** Oo la xiriira Xaqa Helidda Xogta iyo **Qodobka 31aad** oo la xiriira Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga, waa labo qodob oo isku milan. Midka koowaad wuxuu ku sahabsanyahay xogta dawladdu hayso in shacabku heli karaan, iyadoo oo aan lagu xadgudbin xuquuq dadka kale iyo xogta taabanaysa amniga qaranka. Halka midka labaadna uu ilaalinayo xogta qofka gaarka leeyahay iyo sababaha loo isticmaali karo. Marka waxaa muhiim ah labada qodob 30aad iyo 31aad in la isla akhriyo. W**axaa la soo jeediyey, in qodobkaas la ballaadhiyo laguna soo daro ilaalinta hantida maskaxeed *'intellectual property'* in lagu soo daro iyada daryeelkeeda oo aan ku xusnayn faqraddan iyo qodobkan guud ahaanba.**

- **Qodobka 31(4):** Waxaa ku xusan, in xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya uruurinta, isticmaalka iyo gudbinta xogta shakhsiga ah. Waxaan filayaa xeerkaas Baarlamaanku inuu soo saaray sanadkii hore 2023.

- **Qodobka 34aad:** Xuquuqda Eedaysanaha, oo u dhigan: "Eedaysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado booqashada eheladiisa,dhakhaatiirtiisa iyo qareenkiisa. Faqradda waxaa la sooj eediyey, in la ballaariyo oo lagu daro dadka soo booqanayo oo dhakhtarkiisa iyo ehelkiisa, inay wakhti ku filan helaan.Madaama, marar qaarkood dadka la soo booqanayo dariishadda qofka laga tusiyaa,iyadoo waajibaadka la gudanyo. Markaa waxaa lagu soo daray faqradda, in la ballaariyo oo lagu xuso, in qofka maxbuuska ah ama eedaysanaha uu xaq u leeyahay, inuu wakhti ku filan helo qareenkiisa,dhakhtarkiisa iyo ehelkiisaba.
- **Qodobka 40aad:** Oo la xiriira Guddiga Xuquuqda Aadanaha, faqraddiisa 2aad oo u dhigan: "Guddigu wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood oo uu soo jeediyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, waxaa la soo jeediyey in dadka naafada ah matalaadda ka helaan oo lagu soo daro."

- **Qodobka 41aad:** Waajibaadka muwaaddinka, **faqraddiisa 2aad(c)** ee ka hadlay waajibaadka muwaadiinta, inuu dhiirrigaliyo qofka muwaadinka inuu dhiirrigaliyo adkaynta iyo midnimada qaranka. Waxaa la soo jeediyey, in dhiirrigalin meesha laga saaro oo laga dhigo: "waa inuu adkeeyo midnimadda qaranka."

  Waxaan rajaynayaa inaan dul marnay dooddii qaybo yaryar oo ka mid ah. Laakiin, nuxurkii inaan halkan maanta dib uga akhrin karin. Laakiin, waxay naga ahayd, inaan xildhibaannada iyo mudanyaasha labada gole, inay ogaadaan inaan *'at least'* qodobbadii ugu muuhimsanaa ee doodda saldhigga u ahaa.

  Mudane guddoomiye haddaad iga ogalaato, waxaan rabaa inaan u yeero Sen. Siciid Cowke, si uu cutubka 3aad bilowgiisa inoo dul maro. Waad mahadsantahay.

**Sen. Said Abdi Hussein:**
Mudane guddoomiye waad mahadsantahay. Mudanayaal Cutubka 3aad oo ay maanta u balansannahay Dhulka, Hantida iyo Degaanka oo ka kooban 5 qodob. Cutubkan waxa uu ku salaysanyahay, heshiiskii lahaansha maamulka iyo wadaagga dakhliga kheyraadka dabiiciga ah ee dalka. Shidaalka iyo macdanta oo kale ee Golaha Wadatashiga Qaran ku gaadhay magaalada Baydhabo bishii, Juun, 2018. Heshiiskan waxa uu samaynyey ama falanqaynayey isaga oo u qaybinayey labo qaybood. Qaybta lagu darayo dib-u-eegista dastuurka, gaar ahaan cutubkan nidaaminaya dhulka, hantida iyo degaanka iyo sidoo kale cutubka nidaaminaya Federaalaynta Maaliyadda.

Waxa kale loo qaybshay, qayb kale oo lagu soo saarayo xeerar dhowr ah oo u samaynayey Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, sida sharci '*number'* 19 ee baatroolka oo ka mid noqday xeerarka soo baxay 2020. Heshiiska Beydhabo ee Juun, 2018, wuxuu jidaynayey dhowr mabd'a oo wadaagga kheyraadka ku saabsan kana midyihiin, in tixgelin la siiyo baahiyaha kala duwan ee gobollada haysta kheyraadka dabiicaga ah iyo kuwaan haysan.

Tan laga fahmayo in dowlad goboleedyada soo saarayaan kheyraadka ay helayaan qoondo gaar ah dakhliga kheyraadka dabiiciga ah iyo in la xaqiijiyo, in adeegyada asaasiga ah loo bixiyo si caddaalad ah. Mabd'a ahaan waxaa laga fahmayaa, wallow tixgalin la siinayo baahiya kala duwan ee gobollada soo saara iyo gobollada aan soo saarin kheyraadka dabiiciga ah, haddana in la kala duwanaado.

Duwanaashaha guud ee dhaqaalaha dowlad goboleedyada u ahaado mid dhextaal u noqda wadaagga kheyraadka. In lagu baraarugsanaado in wadaagga kheyraadka dabiiciga ahi lagu saleeyo baahiya mustaqbalka ee dalka. Mabd'a waxaa asna laga fahmi doonaa, in la keydiyo qayb dakhliga ka mid ah oo la abuuro sanduuq maalgalin jiilasha mustaqabalka, sidaa daraadeed cutubkan isagoo ku salaysan heshiiskaas 2018, qayb ka mid ahna waxay aadaysaa wadaagga ama Federaalaynta Maaliyadda. Wuxuu ka koobanyahay 6qodob oo kala ah:

1. Dhulka.
2. Guddiga qaran ee madaxabannaan ee dhulka.
3. Xubnaha guddiga qaran ee madaxabannaan iyo qaabka ay ku imanayaan.
4. Shuruudaha xubinnimada laga rabo guddiga.
5. Kheyraadka Dabiiciga ah.
6. Degaanka.

Mudanayaal waxaan idinka dalbaynaa, waxa jirta *'challenge'* haysta *'secretary'* inoo qabta maxdarka ama *'minutes'* xildhibaan walba marka uu aragtidiisa dhiibanayo.Waxaan dalbanaynaa inuu is kor taago qodobka iyo faqradda markaa uu aragtidiisa ku darayo. Waxaa marwalba ku soo noqota xoghaymaha, inay fahmiwaayayaan meesha xildhibaanku aragtida ka dhiibanayo. Markaa waxaan si gaar ah idiinka dalbanaynaa, inaad qodobka aad is kortaagaysaan iyo faqradda aragtidiinna aad ka dhiibanysaan si muuqata aad isku kortaagtaan, si ayna xoghaynta ayna u dhaafin aragtidiinna la diiwaaangalin doono.
Waad mahadsantihiin.

1) **Sen. Zamzam Abdullah Ahmed:**
   Guddoonka labada aqal, Xildhibaannada labada Aqal, howlwadeennada, guddiga dhammaan waan idinsalaamayaa, salaan kadib waxaan rabaa inan u gudogalo cutubka 3aad ee kahadlaya dhulka hantida iyo deegaanka.

- **Qodobka 42(3**): Waxay sheegaysaa: dhulka waxaa lagu haysan karaa laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah ee Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya, waxaan rabaa in aan ogaado, majiraa xeer sheegaayo ka hadlaayo dhulka oo Dowladda Federaalka Soomaaliya u degsan? marka la gareebo kaliya waxaa jira xeer No. 10 la dhaho oo wax-kabdedel lagu sameeyay 1981dii, xeerkaasna wuxuu ka hadlayaa, kaliya kuna magacaaban yahay Gobalka Benaadir. Jamhuuriyadda oo dhan mid *'cammimay'* ma aha, marka xeerarkan marwalba ay Dastuurka ku soo darayaan oo ay leeyihiin xeerka federaalka waa in naloo *'cammimaa'* ama la sheegaa xeerkaas wuxuu yahay si aan tixraac uga yeelanno.

- **Qodobka 42(5)(a):** Waxay ku sameeyeen guddiga wax-kabeddel, waxaa ugu horraysa xarafka 'A' oo aan ku jirin markii hore oo lagu soo daray, kalmadda ugu horreysa oo horta dhawraarinta la dhaho anigu ma fahmin, waxa ay tahay dhowrjeer oo horena waa la soo sheegay dhowrid ama xifdin oo kale ayay u dhigantahay sida aan u fahmay marka aan akhriyay. Waxaa kale oo la soo raaciyay iyo ilaalinta, marka hadday ilaalin iyo dhawrid labo tahay waana isku macno in hal xaraf in la qaato, dhawraarintaan aan la fahmayinin meesha laga saaro ayaan aniga qabaa.

- Isla qodobkaas wuxuu u qoran yahay: dhowraarinta iyo ilaalinta deegaanka ee u nugul wax-yeellada saameeya isku dheellitirnaanta xiriirka deegaaneed iyo meelaha kale oo ay ka jirto dan guud. Haye waxbaa ka dhimman madhammaystirno qodobkaas. Qofka markuu akhriyo waxaa ka maqan *'khabarkii'* carabiga waxa lagu dhaho. Marka jumladda la soo sheego macnihii wixii samayn lahaa oo uu ku xirmi lahaa, way ka maqantahay. Jumladdan waa *'Naaqis'* waxay u baahantahay, in la dhammaystiro ama in meesha laga *'xadafo'* sideedii ay ahayd asalka dastuurka ahaa lagu soo celiyo.

- **Qodobka 42(5)(e):** Isla farqaddaas xarafka (e), in xal dagdag ah oo maangal ah laga gaaro, haddiiba khilaaf ku saabsan dhulka iyo milkiyadda. Haye maxaa kuxiga? Waa qabyo; waxbaa ka dhimman ma dhammaystirno. Marka anigu waxaan qabaa sideedii hore ay dastuurka ugu taallay in lagu celiyo. Faqraddaas oo markeedi hore ay ka saxsanayd oo si qaabaysan oo hagaagsanna ay u qornayd. Teeda kale, kalmadda *'haddii'* ee qaanuunka lagu soo daraayo ama qaanuunka lagu soo daraayo qaanuunka wax 'Haddii, haddii' la dhaho ma yaqaanno. Qaanuunka waa in uu wax xaddido oo *'muqayad'* kadhigo oo uu wax amro oo "saas, saas" hala sameeyo uu dhaho waaye. Laakiin, *'mudlaq'* ah *'open'* ah in laga dhigo iyadana maqabo.

- **Qodobka 42(5)(g):** Isla faqraddaas qeybteeda (g) number 6 *'no six'* ayaa loo baddalay waana la soo raray waxna waa laga beddelay. *'Kadaalik'* waxaa lagu soo celiyay dhulka iyo xeerka xukuumadda Federaalka Soomaaliya ,*'still'* wax xeer ah oo dagsan ma jiro. Faqraddaa aniga waxaan qabaa in sideedii hore ay tii ahayd in lagu celiyo.

- **Qodobka 42(8**) Waxaa kujirta kalmad '*caariya'* la dhaho. '*Caariya*' waa kalima carabiya, af soomaali sax ah in loo raadiyo, oo ama curraar ama amaah waxay doonto. Hase ahaatee, Af Soomaali in loo raadiyo.

- **Qodobka 42aad faqradda 5aad:** Oo qeybta dastuurka cusub laga tiray waxaan qabaa in la soo celiyo qodobkaas oo ahaa: "Dowladda Federaalku iyadoo latashanaysa dowladaha xubnaha ka ah federalka iyo ciddii kale oo ay khusayso, in ay dajinayaan siyaasadda dhulka iyo qaab lagu '*control'* lo, laguna isticmaalo dhulka. Marka kalmadda '*control'* ka ah; maaddaama, ay *'English'* tahay anigu waxaan ku beddeli lahaa lagu maamulo, kalmadaas ayaa Soomaali ahaan saxsan.

- **Qodobka 43aad:** Wuxuu ka hadlayaa magaacbis guddi, Guddiga Qaranka Madaxabanaan ee Dhulka. Ugu horreyn magaca guddiga waxbaa ka khaldan. Magaca '*mafhuum*' la fahmi karo ma aha. Marka labaad waxaa jiro guddi la dhihi jiray: guddigii xuduudaha waa la baabi'iyay waxaa lagu darayaa guddiga doorashooyinka. Guddigan muxuu kaga duwan yahay guddigii xuduudaha baa la baabi'iyay? Wax badan kagama duwana. Markaa soo fiiriyay guddiga shaqooyinkiisa iyo waajibaadkiisa iyo waxaan arkay '*only*' la taliyayaal in ay yihiin '*Advisers'*. Advisers-na guddi madaxbannaan laguma magacaabi karo. Cutubka 10aad guddiyada madaxabanaan Qodobkiisa 110 ayaa waxa uu qeexayaa shaqooyinka ay guddiyadu qabanayaan. Shaqadaan uu guddigaan qabanaayana wax ka mid ah shaqooyinkaas kuma jiraan. Xukuumadda uu wuxuu u yahay '*Advisers'*.

- Sida aan ku arkay, '*again'* waxaa soo noqotay qodobkaasayti, Qodobka 43aad faqraddiisa 2aad '*caariyadi'* way ku soo noqotay mar labaad iyadana in la Soomaaliyeeyo

- Markaan dul imaaddo Qodobka 45aad ee ka hadlaya shuruudaha xubinnimada guddiga. **Qodobka 45(1)(a)**: Waxay leedahay, in uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda Jamhuuriyadda da'diisuna ay ka yarayn 40 sano. Ma waxaa jira qof muwaaddin ah oo aan jinsiyad Soomaali haysanin? Meeshaas waxaan isleeyahay muwaaddin leh jinsiyadda in laga daayo. Muwaaddinka Soomaalinnimadiisa lagu daayo, qof Soomaali ah, in looga dhigo shardiga waa '*No one*',

- **Qodobka 45(1)(d)** Wuxuu leeyahay ugu yaraan 15 sano waaya-arag nimo ah. Shan iyo toban sano aad ayay u badantahay. Qofka markii *'experience'* lagu xiraayo 5, 3 sano waa ladhihi karaa. Laakiin 15 sano qofka markuu 40 sano jiro 15 marka laga gooyo (40-15) wuxuu noqonayaa *'25 years*. 25 *year*-ka hadda waddanka hadda jooga ee jaamacadaha ka baxay waddanka shaqo ka rabo intooda badan ma shaqeeyaan dadkeenna hadda jooga oo dhallinta maanta joogta mashaqeyso. Haddii marka furasadihii soo baxo aan ku xirno 15sano khibrad ah uu leeyahay macnaheed? Haddaan aniga horta la ishaqaaleysiin goorma ayaan khibradda helayaa? In la ishaqaalaysiiyaa ka horaysa.

- **Qodobka 45(1)(e):** iyadana waxay leedahay, in maxkamad si kamadanbeys ah ay ugu xukumin dembi ciqaabtiisu gaarayso 3sano. Saddex sano xuquuq laguma waayo ugu yaraan

5 sano ayaa lagu waayaa xuquuq.  Qofka in uu waayo muwaaddin Soomaali ah waa in, maxkmadda 5 sano ku xukuntaa. Saddex sano ma ha, halkaasna in laga beddelo ayaan qabaa.

- **Qodobka 46aad**: Waxaa kujira kalmad xamili karaan. Kheyraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran, waxaana looga faa'iidaysanayaa qaab waara oo badda iyo dhulka xamili karaan. Xaalufin aa la dhihi karaa haddii la rabo. Kalmad Soomaali ah in loo isticmaalo meeshan keliya,  badda lagu soo koobayana, anigu waxaa dhihi lahaa "biyaha" in la dhaho, *'li-anahu'* waxaa jira biyo dhulka hoostiisa ku jira, waxaa jira webiyaal intaas oo dhan in lagu wada daro.

- **Qodobka 47(4)(a):** Qaadaan taalaabooyin degdeg ah oo lagu nadiifinaayo wasakhda iyo haraaga suntan halista lagu shubo dhulka ama badda. Badda meesha la dhahaayo markeedi hore waxay ahayd biyaha; laakiin, in biyo la dhaho ayaan iyadana qabaa.

- Kalmad aan fahmi waayay ayaa waxa ay ku jirtaa Qodobka **47(3)(b):** ilaalinta ugaarta isirhayeenka. Isirhayeenkaas wuxuu yahay ma garanaaayo in la ii sharraxo ayaan jeclaan lahaa. Intaas kusoo koobayaa. Waad mahadsantihiin.

2) **Xil. Ahmed Abdi Koshin:**

Waxaan salaamayaa guddoonka labadiisa aqal. Waxaan salamaayaa xildhibaannada sharafta leh. Doodda kolay waa la inoo furay cutubka laga hadlayana waa cutub muhiim ah oo kulminaya 3 waxyaabood oo shaqsiga bini'aadamka ahi u noolyahay oo noloshiisa saamaynaya waa: dhulkii, kheyraadkii ku duugnaa iyo deegaankii. Haddaba inta aanan gudogelin qodobbada waxaan rabaa faallada laga soo qoray cutubkan oo ku qoran '*page*' ka 44aad iyo 50aad ee buugaagtii la inoo qeybiyay baan rabaa in aan is yar dul tago oo aan eego.

Waxay u qaybsanyihiin 3 qaybood, dhaqangelinta heshiisyadii siyaasadeed ee ay madashu gaadhay gaar ahaan kheyraadka, heshiiyadaas oo aan qaanuuni ahayn; lakiinse, ubaahan in xildhibaannadu wax-kabebdel, kaabis, qaadasho iyo diidmo intuba ku sameeyaan. Sidoo kale, guddigu wuxuu sameeyay daraasad la xiriirta lahaashiyaha dhulka horta yaa iska leh? Iyagoo eegay dastuurka Keenya, Uganda, Ethiopia iyo dastuurka KMG ah. Waxa kaloo guddigu, wuxuu faallo ka bixiyay qaabka maamul ee maaraynta dhulka, iyagoo soo qaatay Kenya iyo Uganda oo leh *'commission'* ama guddi maamula dhulka. Ugu horrayn markaan qiimeeyo waxaad mooddaa, in guddigu uu kuurgaleen waddamo shisheeye oo leh nidaam hufan tayo ahaan dhisan ayna illaaween duruufaha ku gadaaman dawlad dhiska Soomaaliya, nidaamka federalisim ka ah, hay'adaha sharciga hadda u haysta in ay bixiyaan dhulka.

Haddii aan eegno Soomaaliya sida hadda ay wax yihiin, waxaa dhulka bixiya labo hay'adood. Waa tan ugu horraysee '*Domeniale'* hadday tahay waa Wasaaradda Howlaha Guud. Waxaa kale oo iyana bixiya *'Minishiibiya'* Dawladda Hoose ayaa bixisa. Sharci No. 10 oo soo baxay 1980kii iyo sharci No. 61 oo soo baxay 1981, sharciga fulinta dhulka dhismaha dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, Wasaaradda Howlaha Guud, marka aad mareegteeda eegto waxaa ugu qoran waa hay'ad dhammaan. Laakiin aan xaddidnayn, kaabayaasha dhaqaalaha, dhismayaasha buundooyinka, waddooyinka waaweyn, dhulalka iyo kuwa bannaanba ee ay leeyihiin dawladda dhexe iyo dawlad

goboleedyada. Macno ahaan ah in Wasaaradda Hawlaha Guud iyada ka tahay gadhwadeen marka la eego dhulka danta guud ee Soomaaliyeed.

Isla faallada guddigu waxay xoogga saareen guddi qaran oo dhulalka ah iyagoo ku sababbabeeyay, in ay Kenya iyo Uganda leeyihiin. Laakiin, '*ignore*' gareeyay waaqica ka jira Soomaaliya iyo qaabka Soomaaliya u dajisan. Kudarso oo guddigu marna faallada kuma soo qaadin Wasaaradda Hawlaha Guud, mana caddayn sababta aasaasiga ee kaliftay guddiga qaran. Nooma sheegin in laga kaaftoomay wasaaradihii shaqada ku lahaa howshan. Nooma sheegin shaqaalihii rayid ka ahaa ee wasaaradda waxa ay qaban doonaan.Nooma sheegin cidda ay hay'adan lafteedu hoos imaanayso.

Xildhibaan xujooyinka isweydiinta mudan ee loo baahanyahay, in xildhibaanku isweydiiyo waa su'aalaha aan horay usoo sheegnay iyo kuwo kale oo badan oo ay ka mid yihiin: haddiiba guddiyada faraha badan la dhisayo maxay qabanayaan laamihii dawladda ee shaqadooda ahayd in ay gutaan wajibaadkooda dastuuriga ah? Shanta kun "5ta kun" ee shaqaalaha rayid ka ah haddii hay'ad iyo guddi laga garab dhiso, xaggeen geynaynaa? Tan kale ee muhiimka ah, maaddaama dhulku leeyahay shacabka Soomaaaliyeed, shacabkuna ay matalaan golayaasha shacabku aaway doorkoodii? Ma wuxuu kusoo koobmay xeer ay ansixiyaan? sida qodobbadan ku qoran ka muuqata idinka iyo xildhibaannada ayaan idiin daynayaa aragti ahaan; lakiin, waa '*point*-yo' u baahan in aad isdultaagtaan ama aad fiirisaan dooddiina ka doodaysaan.

- Aan kusoo durko, **Qodobka 42(1):** Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxaa wadajir u leh shacabka Jamhuuriyadda. Waxaan qabaa in lagu daro: "waxaana mas'uul uga ah Baarlamaanka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed", taas oo caddaynaysa doorka baarlamaanmku ku leeyahay isticmaalka dhulka iyo bixintiisa. Maaddaama dhibaatooyinka ugu waaweyn ee waddankan ka taagani yihiin arrimo dhuleed, waa in baarlamaanka Soomaaliyeed qaataa doorkiisa ah u ilaalinta bulshada nolosha aasaasiga ah, kuna korjoogteeyaa dawladda dhammaan arrimaha la xiriira dhulka gaar ahaan kuwa danta guud.

- **Qodobka 42(5):** Farqaddaa gebi ahaan sideedii hore haloo daayo**.** Waxaan la soo qoray ii lama eka siiqo dastuuri in ay leedahay, waxaa kaga habbooneyd kagana qurux badnayd Af-Soomaali ahaan iyo ujeeddo ahaanba farqraddii hore, farqadda 5aad intii laga beddelay.

- **Qodobka 42(8):** Waxaa ku xusan in Dowladda Federaalku ay fasixi karto keliya ay fasixi karto qof ama hay'ad heshiis kiro una ansixiyo baarlamaanka Jamhuuriyada Soomaaliyeed. Mudanayaal xaqiiqada haddii aan Soomaali la isu sheegin had iyo jeeraale jahawareer baynu kujiraynaa. Imisa yaan usoo joognay heshiis isticmaal dhuleed oo lagalay? Imisaa se la horkeenay baarlamaanka yaa se sheegi kara? Haddii aan lawajihin xaqiiqada waxaa laga dhaxlaa dhibaato soo noqnoqota. Waxaan qabaa in qodobkaan lagu beddelo "Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed oo kaliya oo ka kooban dhammaan bulshada ummadda Soomaaliyeed matalaysa matala danahooda, ayaa fasixi kara hay'ada shisheeyana u fasixikara dhul caariya ama kiro ah".

- **Qodobbada 43aad, 44aa iyo 45aad:** Ee dhisidda guddiga qaran ee madaxa banaan ee dhulka waajibaadkooda iyo xubinnimadooda anigoo tixraacaya arartaydii hore ma aaminsani guddigan dhuleed ina ay tahay marxaladda hadda lagu jiro mid loo bahanyahay.

Sababna waxaan uga dhigayaa dhowr arrimood oo is barkan, marka la eego waajibaadka guddiga khilaafaadka maamul ee iska hor imanaya.

- Qodobka 43aad farqadiisa G: waxaa lagu sheegay, in guddigu mas'uul ka noqdo korjoogtaynta dejinta isticmaalka dhulka Jamhuuriyada Federaalka oo idil, macnahedu ahaa: laamihii dawladda mas'uulka ka ahaa dhammaan shaqada waa laga wareejiyay. Dawladda hoose iyo maamul goboleedyada caqli saliim ah ma aha! Suuragal ma aha. Maamul kasta xeer gaar ah ayuu leeyahay waa khalkhalin nidaam nusqaan ku ah dowladnimada, in guddi yar oo la magacaabay awood aanay lahayn la korsaaro. Guddigu nooma caddayn baahida dhabta ah ee kalifta guddiga dhuleed marka laga reebo Kenya Uganda ayaa leh oo aanan isku *'mustawo'* ahayn, isku nidaam ahayn, isku diin ahayn, isku dhaqanna ahayn. Nooma qeexna wasaaraddii howsha qabanaysay ee lahayd waxa ay qabanayaan, miyaa la baabi'ibayaa? Nooma qeexna cidda guddigan hoos imanayso; gole wasiirro layiri way hoos imanayaan xitaa kuma dhisna nidaamka federalisimka ah ee awood qeybsiga. Waddankeennu waa *'Democracy'* waxaanu *'impract'* gareynay *'free market economy'* waxa layiraaahdo: 'IMF' iyo *'World Bank'* baan la *'deal'* garaynaa, ma joogno casrigii *'socialisim'*-ka ay wakaaladda iyo guddiyada awoodda sidoodaba lahaayeen.

  Midda kale, aan runta isu sheegnee ma waxaa Soomaaliya kajira ama maamul goboleed ha ahaato ama federaal ha ahaatee, ma waxaa jiro wax la yiraahdo guddi madaxbannaan? Maya, xaqiiqada dhabta ah haddii anan isu sheegayn guddiga marwalba la magacaabo, qofkii soo magacaabay ayaa iska leh waana caqabad hor leh. Intaas oo shey oo is barkan. Waxaanna aamminsanahay in guddigani ahayn mid Soomaali u baahantahay awoodahan dheeriga ah ee la siiyayna ee lagu baabi'inayo wasaaradaha in dib loo soo celiyo.

- **Qodobka 46(1):** Qaybsiga kheyraadka dabiiciga ah waxaan qabaa, in farqaddaa sideedii hore loo soo celiyo. Wada xaajoodka dowladda federaaliga iyo maamullada xubnaha ka ah marwalba waa lagamamaarmaan in sidoodii loo soo celiyo.

- **Qodobka 46(2):** Sida aan horay usoo sheegay qodobka 43aad, 44aaad iyo 45aad ma qabo hay'ad cusub in lasoo kordhiyo in ay dan u yihiin waddanka. Halkanna waxaa lagu sheegay saddex hay'adood oo cusub, Hay'addaha Macdanta, Biyaha iyo Batroolka, waa howlo loo igmaday wasaarado. Labo mid aan soo galno ,wasaaradaha aan baabi'inno ama aan ka dayno qasitaanka shaqadooda danaha gaarka ah, ha laga horraysiiyo kuwa qaranka. Arigtidayda sida aan horay u soo sheegay looma baahno saddexdan hay'adood ee '*budget*-ka' u baahan ee cusub in shaqooyinka shaqaalaha rayidka ay qaadanayaan.

- **Qodobka 46(3)**: Waxaa ku qoran guddiga uruurinta dakhliga. Guddiga xaggee buu nooga yimid? Xeerkeebaa xusaya? Yay hoos imanayaan? Mise hadda yaa la abuurayaa? Waa *'absolute joke'* . Awooddii Wasaradda Maaliyadda Federaalku mas'uulka ka ahayd aruurinta dakhliga hadda ayaaba la sheegayaa *'company'* ayaa loo xilsaaray, taas oo baalmarsan baarlamaan aan soo marin, wasaaradda maaliyadduna aanay nala waadagin. Farqaddan dib u habayn baahsan bay u baahntahay. Waa in lagu muujiyaa cidda dakhliga loo xilsaaray in ay uruuriso waa: Wasaaradda Maaliyadda, *'private company'* umaannaan dirsan.Sidaa darted, guddigaan meesha halaga saaro oo halagu soo celiyo Wasaaradda Maaliyadda.

- **Qodobka 47(3)**: Waa farqadda cusub Af- Soomaaligeeda waa innagu cusub yahay. Waddan dhirtu ku hagoogan tahay meel alaale meel ay Af-Soomaali ahaan si ay isu qabanayso dastuurka lagu soo qoro. Ujeeddadeedu waa sax waa waddan *'Green'* ah. Laakiin, Af-

Soomaaliga ku qorani waxaan umalaynayaa in uu yahay *'below standard'* Af-Soomaligeedu waa *'poor'* fadlan khuburo Af-Soomaali ah idinka caaawisa guddigu ha raadsadaan.

- **Qodobla 47(4)(a):** Sidoo kale, nadiifinta suntan lagu shubay, waxaad mooddaa farqaddan in sideedaba ay jihaynayso in suntan lagu shubo Soomaaliya dabadeedna hadhow la nadiifiyo. Waxay ahayd in la maamnuuco, in suntan lagu shubi karo Soomaaliya. laakiin, tan waxaad mooddaa in aynnu oggolnaahay oo marka lagu shubo deedna aynu nadiifinta raadinayno waa khalad.

  Ugu danbeyntii mudanayaasha ha u kuurgalaan waa ereyga ugu danbeeya doorka baarlamaanka sida dastuurka cusubi u daciifinayo uguna koobay xeer uu ansixiyo. Mudane awooddaadu ma ah ama gasho. Ku dadaal inaad aqalkaaga awooddiisa dhowrto markaad ka doodayso arrimaha masiiriga ah, weliba xoojiso awoodda baarlamaanku u leeyahay nidaamka federaaliga ah.

  Intaas ayaan kusoo gabaggabeynayaa raalina iga ahaada. Hal erey haddaan ku darsado oo ka baxsan mawduuca. Waxaan doonayaa in aad tahniyad iyo bogaadin u diro dhallinyaradii reer Burco, ee ku guulaysatay koobkii Gobollada Waqooyi; ayaan halkan tahniyad iyo salaan uga dirayaa idinkuna in aad igu taageertaan. Ninkii aannu saaxiibka ahayn ee Wasiir Fiqi baan raadiyay, waxaa la iisheegay in uu salaadiin sug sugayaay uu soogeliyo Boggiisa Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo kaga qeylisiiyo. Mudane waxaad wasiir u tahay dhammaan Soomaali oo dhan waa in aad…

3) **Xil. Mahdi Mohammed Gulaid:**
   Xildhibaannada labada aqal, ee Burca waxaa la oran jiray "Burco laga badinyoo, maanta hadday badisay waan u hambalyeynaynaa, intaas ayaan ku dari lahaa Kooshin". Xildhibaannada labada aqal iyo shir-guddoonka waan idin salaamay. Waxaan ku soo dhowaanayaa waqtiga oo kooban doodda een.

- **Qodobka 42aad:** Dhulku waa muhiim, waana run ahaantii ahmiyadda waxa ugu muhiimsan maanta dhulku, guud ahaanba oo aynu haysanno. Een waxaan filayey guddida shaqooyin badanna waa qabteen, latashiyada inay ku dari lahaayeen culimada, marka dhulka laga hadlayo "Inal Arda Lillaahi" "Dhulka Illaah baa iska leh". Hadduu Illaahay leeyahay na dee dawladda door wayn maamulkiisa iyo nidaamintiisuna ku yeelato ayaa muhiim ah.

- **Qodobka 42(1):** Oo dhigaya: "Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". Qodobkaasi doorkii dawladda meesha waa uu ka saarayaa. Waa in, anigu mabda'iyan waxaan qabaa dhulku waa dan guud, waxaana iska leh "Dawladda Federaalka Soomaaliya". laakiin, markaan isla akhriyey *'report'* ka iyo qodobkan sida aad u dhigteen, midaan ku dhexdhexaadinayo oo meel dhexe isugu keenayo, warbixintiinnuna raacsan, waxaan oran lahaa: "Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh dawladda iyo shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". Dawladdu waa in mar walba meesha ku jirtaa. Haddii dawladdu meesha laga saaro, dhulka Soomaalidu goofaf buu noqonayaa, maamul goboleeddo iyo reera kala sheegtaan.

  Maanta dhibaatada na heysata waad ogtihiin, caalamka waad tagtaan, wadammadan jaarka aynu nahay waad tagtaan, magaaladu iyo dhulka dadkuba waxay kala leeyihiin xadeyn, seerro, beerro, dhulkuna sidiisaba waa in uu dhowr inagu qaybsanaadaa. Dhulka dawladda

oo *'public'* ah, dhulka *private*-ka ah oo gaar loo leeyahay oo sharciyadi jihayso, dhulka community-ga ah ee la wadawadaago, markaa anigu waxaan isu keeni lahaa saddex, laba dastuur oo jaarkeenu soo qaadateen oo si fiican u qorayo, iyo qodobkan oo lagu daro dawladda.

Waa wadanka Uganda oo ka hadlaya dhulka danta guud, harooyinka dabiiciga ah, wabiyada, dhirta qoyan, kaydka keymaha, seeraha, ugaadha, seerayaasha qaranka iyo dhul kasta oo loo qondeeyey arrimo deegaanka iyo dalxiiska la xiriira, danta guud ee muwaaddiniinta oo dhan, iyo

Qodobka kale ee Dastuurka Ethiopia, dhulka magaalada, dhulka beeraleyda, dhulka xoola-dhaqatada iyo dhammaan dhulka kheyraadka dabiiciga ah. Markaa qodobku waa in aynu ballaarinaayoo dowrka ugu muhiimsan habaynta iyo nidaaminta aynu siinnaa dawladda. Haddaan dhulkeenna, dhulka reer-miyiga, xoola-dhaqatada la xudduudeyn, baaraleyda la xadayn, magaalada la habayn, waad ogtihiinoo magaalooyinkii baynu aad u nimi oo dhaqaalihii baa yaalla, magaalooyinka Soomaalidu si *'flat'* ah bay u fidayaan.

Magaalada si bilaa nidaam ah oo ballaaran ayay u fideysaa. Shirbaan kaga qaybgalay Dalka India, dabadeedna waxaa la faalleeyay caasimadaha sida ay u dhismayaan. Waxaa la yiri caasimadda Soomaaliya iyo Muqdisho iyo wadanka la yiraahdo Bangladesh ayaa *'heavily densily populated* oo way isku cufanyihiin. Fooq sagaal dabaq oo quruxda yaabto iyo buul yar baa isku dhinac yaalla, dhaqalihii baa saamaxay. Laakiin, waa la habeeyaa. Caasimad ma sii noqoneyso magaaladan Muqdisho haddaan la habaynin, haddaan dawladda awood loo siinin inay dhulka maamusho, haddii Rabbi Khalaq, dalaq noqono oo la inakala nidaamin. Soomaaliya dal ma noqon doonno, markaa anigu waxaan leeyahay awoodda dhulka labadaa dastuurka ee jaarka halaga soo qaato, sidaa haloo kala qaybiyo. Haddii kale, goofaf reero leeyihiin iyo maamul goboleedyo noqonayaan, dal nidaam lehna ma noqoneynno. Qodobkaasi waa mid.

- **Qodobka 42(3):** Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna lahaan karaa, sheegan karaa, halkaad tiraahdeen "sheegan lahaan karaa" baan ku soo beddeli lahaa, ee sheegan halkay ka tahay.

- **Qodobka 42(5)(a):** Dhawraarintii baa ee hadda soo celiseen, anigu waxaan oran lahaa erey ka fudud hala baaro.

- **Qodobka 42(5)(e):** Haddaad ka saartaan "haddiiba", waa la akhriyi karaa. Anigu mar kasta "column" ka dhexe si aad iila socotaan akhriyayaa. "Column" ka dhexe ee intaa ka beddesheen, taa asalka ee dastuurka ma ahan. Qodobka 42(5)(e) "In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro, khilaafaadka ku saabsan dhulka iyo milkiyadda", **haddiibada ka saara, markaa waa la akhriyi karaa, waa la fahmi karaa.**

- Waxaa kaloo soo kordhin lahaa guddida khilaafaadka ee dhulka, oo waa in ay jirtaa cid khilaafaadka iyo dhulka, maxkamadihii waxaa saaran culeys, goof la isku haysto, maahmaahaana ka baxayoo "ku qabso ku qadi meysidee" ayaa ka taalla.

- **Qodobka 42(7):** Anigu waxaaba oran lahaa Qodobka 4aad ayaa ka akhrin wanaagsan. Halka oo iminku leeyahay baaxadda dhulka iyo muddada isticmaalka, ka hore ee 4 ah ee

dhinaca bixidda ku qoran "Lama bixin karo ruqsad la xiriirta isticmaalka abadiga ah ee berriga" **kaa horoo meesha u deysaan ayaa la fahmayaa oo ka macno wanaagsan.**

- **Qodobka 42(8):** "Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaal caariya ku haysasho", anigu tabal-caariya ayaan maqli jiray dumarka ka hadla, markaa ereygaa, bal erey "toobal caara maa yaqrib bid-diin" sow maydan maqli jirin, raalli ahaada, markaa erey sharci, ma ogtahay waa saxoo qaamuuska haddaad eegteen; laakiin, sharcigu wuxuu leeyahay *'legal dictionary'*, **markaa bal erey bixin kaga habboon aynu eegno u bixiya, ayaana taa ku talin lahaa**.

- **Qodob 43aad:** Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka**,** waan soo dhoweynayaa, waana idinku taageyrsanahay. Laakiin guddidu ilko ma leh, sidii xildhibaankii senator kii iga horreeyey Samsam ay tiri, ee waa lataliye uun *'advisory committee'* latalin uun ma aragtay, waa inay cilmibaaraan, waa in ay lataliyaan, waa inay bixiyaan baad ka soo buuxiseen. Guddidu waa in ay ilko lahaataa awood la haata, halkana waxaad ku sheegteen maamul goboleedyadu xubno ka noqonayaan.

- Halka ah sii **Qodobka 43(2)(c)** "In uu cilmibaaris ku sameeyo arrimaha ku saabsan dhulka iyo isticmaalkiisa, kana soo saaro talooyin una jeediyo hadba hay'daha xil ahaan ugu abbaaran" "awoodda u leh baan oran lahaa" xil ahaan awoodda u leh, ayaan halkan ku soo kordhin lahaa.

- **Qodobka 44(c)** "Shan xubnood oo ka imaanaya Dawladda Federaalka" oo ayna soo xusho wasaaradda awoodda u leh, Golaha Wasiirraduna sidaa ku soo mariyo,

- **Qodobka 45aad:** Oo waa sax waan ku raacsanahay leh jinsiyadda inaad tiraahdaan uun, inuu yahay muwaaddin da'diisuna, da'daa haddaad afartan wax ka dhimaysaan waa fiican tahay, ilaa 30 laga dhigo, in kastoo malaha 40 qof masuul ah; waayo, dhulku waa xaasaasi ay tahay.

- **Qodobka 46aad:** Khayraadka Dabiiciga, ah baan oran lahaa xagga cinwaanka, faqradda 1aad Khayraadka Dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda.

- **Qodobka 46(2):** Waxaan ku soo kordhin lahaa hay'adahan, Hay'adda Macdanta, Hay'adda Biyaha iyo Hay'adda Batrooka, waxaan ku soo kordhin lahaa Ugaadha iyo Doorjoogta, Hay'adda Ugaadha iyo Doorjoogta, in iyadana aynu; waayo, dee dalkeenu ugaadha lahaan jiray iminkana si habaqla ah bay dalka u soo gashaa, ee in la nidaamiyo oo hay'adaasi jirtaa muhiim bay tahoo wasaaradda khuseysa aynu u sii qaabilsanaato.

- **Qodobka 47(3):** Ilaaliyaan nidaamka, waxaa weeyaan waa in ay ilaaliyaan nidaamka ka faa'ideysiga, waa inay ilaalinayaan halka ay tahay waa in ay ilaaliyaan, dawladda Federaalka iyo dawlad goboleedyadu waa inay: ilaaliyaa, ilaalinayaa baa idinku qoran, markaa ilaaliyaan baa macno ahaan uga sii habboon.

- **Qodobka 47(4)(a):** "Qaadaan tallaabooyin degdeg ah oo lagu dhaqangalinaayo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta", markaa miyeynu u fasaxnay in suntii mar kasta lagu daadiyo, **waa in un marka hore aynu mamnuucnaa oo xakameynaa inaan sunta lagu daadin,**

**ganaax iyo ciqaabi ka dhalataa.** Marka dambe ayay iminaysaa nadiifintooda iyo haggaajintooda. Taana intaas ayaan ku dari lahaa.

Waxaan u imanayaa dhow erey bixinood, oo aad wax-kabeddelka dastuurka ku soo kordhiseen **cunfi, caarre, isir-hayayn iyo dhawraarin, afartaa afar kaloo la fahmi karo haddaad ku beddeli kartaan wey fiicnaan lahayd**, ama qolyaha suugaanyahanka ah aydu la tashataan, maxaa kaga habboon oo luuqad sharci ah tahay, ileen innagu waan isa soo xukumi jirnay, ee loo qaadan karaa.

- Deegaanka halka ugu dambeysa, waxaan ku soo kordhin lahaa **"in la mamnuuco xaalufinta dhirta iyo ka ganacsiga dhuxusha"**, haddan dastuurka xakameyn dhirtan la xaalufinayo iyo dhuxusha laga ganacsanayo dalkeenu wuu nabaadguurayaa, toddobaad, ciqaab, ganaax iyo magdhawna inay ku jirto, oo mardhow shuruucda deegaanka iyo isbeddelka cimilada lagu sii faahfaahiyo, intaas ayaan ku soo koobi lahaa. Waad mahadsantihiin.

4) **Xil. Mahad Abdalla Awad:**

Mahadsanid guddoomiye. Een Waxaan uga mahadcelinayaa guddoonka iyo xubnaha labada aqal sida wanaagsan ee ay u socoto doodda dib-u-eegista afartan cutub ee ugu horreeya, een .

Cutubkan Dhulka, Hantida iyo Deegaanka, waxaan soo jeedinayaa qodobbo aan isleeyahay waxbaa soojeedinta guddiga lagu kordhinayaa, waxna waa laga dhimayaa, waxna waa la toosinayaa, saddexdaas ayey u qaybsantahay. Een waxaan qabaa kow, in qodob cusub lagu soo daro oo ah: Illaalinta Goobaha Taariikhiga ah '*Historical Sites*' in lagu soo daro oo ka hadlaya faqrad ka hadlaysa:

- Masuuliyadda dawladda ee ilaalinta goobaha taariikhiga ah;
- Aqoonsiga goobaha taariikhiga ah; iyo
- Mamnuucidda waxyeelada goobaha taariikhiga ah.

Yacnii dalkani waxa weeye, wuxuu leeyahay goobo qaali ah, oo taariikhi ah oo kumannaan sanno soo jiray, een qaar magaalooyiinka ku yaalla, een Masaajid Qiblateen ah oo Islaamka muhiim ku ah, oo ku yaala Gobolka Awdal, een magaaladan caasimadda ah, ee goobaha taariikhiga ah ku yaal waad taqaanaan, een sharci ilaalinaya iyo qodob oo hadda ku jira cutubkanna ilaalinaya ma jirto. Sidaas awgeed, een in qodob gaar ah oo ka hadlaya ilaalinta goobaha taariikhiga ah, in la soo kordhiyo waan jeclaan lahaa.

Een waxaan ayadana soo jeedinayaa sida xildhibaannadii iga horeeyey ay sheegeen, een in noocyada dhulka uu dastuurku qeexayo, yacni dhul inuu ka koobanyahay dhul '*public*' ah oo yacni hanti guud ah, een dhull *private* loo leeyahay, qofka muwaaddinka ah dhulka uu leeyahay inuu dastuurku xaqiijiyo ayaa loo baahanyahay. Een Dastuurkeenna marka la eego inuu dastuurkani dastuurkii Soomaaliya yahay, horta maxaa lagu garanayaa? Haddaan gabigiisaba ka soo '*copy*' yaareeno dasaatiir islaameed, een haddaanan dhul daaqsineed qabaa-ilku leeyahay inuu jiro een maxaa la isaga indha tirayaa?

Ma dawladaa iska leh baadiyaha Xeraale? Iskama lehee, qabiil baa iska leh, waxaa weeye goofaf baa jira, een waxa weeye dhul beeluhu leeyihiin baa jira, deeqsimo miyi ah baa jira, dhul beereedyo ayaa jira oo wakhtiyo ku meel gaar ah la isticmaalo, kuwo rasmi loo leeyahay baa jira, waxa weeye in dastuurkeenu qeexayo ayaa la doonayaa oo arrimahaas khilaafkooda kala

saaraa la doonayaa. Laakiinse haddaan iska inkirno aan ka soo qaadno inaan nahay dalal kale, waxaa weeye wax macquul ah ma ahan. Saas awgeed, dhulku inuu dhul '*public*' yahay qaar, qaarna ay '*private'* yihiinoo oo gaar loo leeyahay, qaarna uu yahay '*community land*' dhul bulshadu ay leedahay oo daaqsimo iyo beero iyo ay dadku yacnii leeyihiinoo loo aqoonsanyahay inuu jiro waayeen. Een haddaan intaas ka soo tago, een waxaan.

- **Qodobka 43aad** :Ee ka hadlaya guddiga, walaalayaalow, een '*smart lazyness'* baa jirta wax la yiraahdo, yacnii waxa weeye yacnii marka wax la iska fududeysanayo guddi haloo saaraa la yiraah. Guddi '*commission'* ahoo madaxbannaan meeshan ma soo galo, shaqo guddi loo xilsaaro oo bil walba boqol kun iyo laba boqol kunoo doolar ku baxdo, oo la talin ah na ma jirto, waxa weeye wasaarad baa iska leh wixii dhul ahoo. Yacnii waxa weeye heer federaal ah, wixii *'local'* ahna dawladda hoose ayaa iska leh. Dastuurkeennu wuxuu abuuray saddex laamood oo dawladood buu abuuray, dawlad federaal buu abuuray, dawlad goboleed buu abuuray, '*municipality*' minishiibiyo ayuu abuuray, saddexdaba waajib bay leeyihiin oo kala duwan ma garatay? Markaa guddigan haddaad rabtaan inaad dhistaan isbaara kale, isbaara kaloo qolo tiraahda intey meel fadhiisato wax la sameynayo ma jirto, haddaan wax xoogaa lacaga naloo keenin, haddad abuureysaan waa arrin kale. Laakiinse, wax guddi oo meeshaan soo gali kara ma jirto, qodobkaas faqradda 43aad walaalayaalow, meesha ka saara, xildhibaannada hala dhegeysto horey intii hadda soo hadashay waa idin sheegtay, aniguna waan ku daray, '*commission'* oo meeshaas soo galaya ma jirto.

- **Qodobka 42(8):** Isticmaal caariya, waa laga hadlay hadda intii hadashayba waa ka hadashay "**caariya**" wax la garanaya halagu soo beddelo walaalayaalow, haddaad garanweydeenna dadka luuqadaha yaqaano hala soo weydiiyo, isticmaal caariya ma naqaanee, waxaan garanayno hala soo galiyo.

- **Qodobka 42(7):** Waxaa ku qoran lama bixin karo dhul abid ah. Ma dhulka dadku leeyihiinoo shakhsigu leeyahoo "damanyaalaha' ah ayaanan abid ahayn, dadbaa iska lahoo kala dhaxlayee, dhul abid ah waa jiraa dhulalkeyagu weeye anagaa iska leh, waxaa weeye waan iibsanay, waan gadannay, dawladdaa na siisay, dhul abid ah dadku waa leeyihiin dalka gudihiisa ah, markaa dhul abid ah lama bixin karo halkaasi ayaduna meesha ma soo gali karto, dhulalka gaar loo leeyahay abid baa loo leeyahay.

  Een waxaa kaloo in meesha lasoo galiyo ay tahay, een in ciddii dhul laga qaado, qaranku dhul waa u baahan karayaa, danguud waa lagu baahan karayaa, jidad baa mari karaya, in magdhow maangal ah la siiyo ayaduna grantee-geeda waa in uu dastuurku ku qoranyahay, malo waa inaysan noqonin. Waxa weeye gurigu hadduu deegaanku '*municipality'* yahay iyo haddii "damanyaalo" yahay waa loo baahan karaa; laakiinse, magdhaw maangal ah waa in lagu beddelaa ayaduna dastuurka halagu qoro.

  Een waxaan ayaduna sheegayaa, waxa weeye, Heshiiskii Golaha Wadatashigu een dib haloo eego, dawladda federaalka ahi waxay leedahay *'coordination*' guud iyo inay '*standard*' yeesho ee dhulka guud ahaan. Laakiinse, dhulka maamulkiisa waxaa iska leh dawlad goboleedkaa iska leh, ruqsad bixintiisa iyo ka qaadistiisa, kala wareejintiisana waxaa '*municipality*' ayaa iska leh, yeynan dusha iska saarin, dalkan dal federaal ah weeyeen anaagaa sameynay, haddusan na anfacayn aynu ka deyno federaalkoo aynu '*system'* kale qaadano; laakiinse, wasaarad heer federaal ma garatay? Ama hay'ad heer federaal ah, inay minishiibiyo ku qabsato een degmo heblaayo waxaa weeye wax macquul ah ma ahan noqoneyso *system*-keenu saas uma sameysna. Waxa weeye: '*level'* kala duwanoo waxaan

leenahay shaqo, markaa dastuurkeenu ha noqodo mid *'reflect'* gareenaya dhaqankeeda iyo *system* ka cusub een qaadanay. Wasalaamu Callaykum Wa Raxmatullahi Wa Barakaatuh.

5) **Xil. Dahir Amin Jeesow:**
Bismillaahi wasalaatu wasalaamu calaa rasuulillaah, mahadsanid guddomiye.

- **Qodobka 42 (1):** Waxaan qabaa in lagusoo kordhiyo waxaana u ilaalinaaya dawladda, sidan uu u qoranyahay hadda waa faqro cusub oo dastuurkii hore aan ku jirin, dhammaan Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa si wadajir ah u leh shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana u ilaalinaaya Dawladooda in lagusoo qoro, ayaan rajaynayaa si loo ogaado dalka inay masuul ka yihiin dawlad, dawlad markii la leeyahay baarlamaankana waa ku jiraa, qodobkaaas horena waxaan filaayaa inuu usoo jeediyay Xil. Mahdi Guuleed.

- **Qodobka 42 (7):** Waxaan qabaa sidii hore inay sax tahay.Waayo waxaa ku qoran halkaan baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixin karo fasaxa isticmaalka dhulka waxaa lagusoo saarayaa xeer. Haseyeeshee ayaa lagu booday, Xeerka ciddii soo saaraysay lama sheegin, ma digreetaa oo xukuumaday kasoo baxaysaa?Xeer ayaa lagusoo saarayaa bas ayaa ku qoran. Xeerka baarlamaanka waa in lagu daraa. Waxaa lagusoo saarayaa xeer baarlamaanku ansixiyay. Hase yeeshee ma jiri karto qayb kamid ah dhulka, badda ama hawada Dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo loo bixin karo fasax isticmaal oo joogto ah. Kii horaa ka qurxan, kii hore bal fiiriya, lama bixin karo ruqsad la xariirta isticmaalka abadiga ah ee berriga, badda iyo hawada sare Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya, sharci baarlamaanka Federaalku uusoo saaro ayaa lagu xadidayaa baaxadda, muddada, iyo shuruudaha ruqsada isticmaalkooda. Marka waxaad mooddaa kii hore inuu aad u qurxanyahy. Marka kii hore kusoo celiya; haddii aydaan siiqada si kale oo ka quruxsan aad noogu dhigi karin. Waayo, kan kale xoogaa waxaad mooddaa hadallo badanoo xaddhaaf ah inay ku jiraan.

- **Qodobka 43:** Mudaneyaal qodobkan Guddiga Madaxbannaan ee Dhulka, anigu in loo baahanyahay ma qabo. Waayo, dhulka Wasaaradda Hawlaha Guud ayaa dawladda wakiil uga ah, shaqada guddigan wuxuu aad iyo aad ugu talax tagayaa, wasaaradda shaqadeeda. Waxaan qabaa haddiiba aan laga maarmaynin in laysku daro, Guddiga Xaduudaha iyo Guddiga Dhulka hal guddi in laga dhigo. Guddiga xaduudaha, wada hadalkii hadda qolyaha dawlad goboleedyada iyo madaxwaynaha kasoo baxay waxay ku dareen Guddiga Doorashooyinka, Guddiga Doorashooyinka oo sagaal (9) ahaa ayaa lagu daray 15 ayaa laga dhigayaana waa la iri. Waa hagaage guddi doorasho oo 15 ah horta aad ayay u tiro badantahay, si guddigaasna u yaraado Guddiga Xaduudahana loo helo, Guddiga Dhulka in lagu daro**,** ayaan soo jeedinayaa anigu.

- Faqrad kale ayaa jirta oo tilmaamaysay waajibaadka guddiga, guddigaan mar haddii la yiri: "Baarlamaanka Federaalka ayaa soo saaraya qaabka uu ku imaanaayo iyo sharcigiisa" ma aha in si *'deep'* ah gudaha usii gashiin; waayo, Q**odobka 43 (2)** markaad fiirisid waxa weeye xarafka (a), (b), (c) ilaa (h), wixii uu baarlamaankan soo saari lahaa ayaad ku qorteen.

- **Qodobka 43 (3) :** Waxay u qorantahay sidii baaq oo kale, dhammaan hay'adaha dawlada ee heer federaal ee xukuumada, waxa waajib ku ah in ay guddiga madaxbanaan ay gacan ku siiyaan, bal eeg gacan ku siintooda xeer baarlamaanka uu soo saarayaa baa lagu amrayaaba oo lagu qurxinayaa oo lagu sharraxaayaa. Baarlamaankaan wax ka beddalaayo,

idinka wax idiin khuseeya ma aha. Marka si dastuurkeenna, dastuur *'professional'* ah oo wanaagsan oo ereyadiisa la fahmi karo ay u noqdaan, waaba sheegteen guddigaas qaabka uu u imaanaayo iyo wixiisa oo dhan iyo waajibkiisa, waxa soo saaraaya baarlamaanka federaalka, marka haku talaxtegina u daaya. Kaliya waxa ku filan qodobkaan kore oo ah waxaa jiraaya Guddiga Qaranka Madaxbanaan ee Dhulka oo heer Qaran ah, taasoo uu xeer kasoo saari doono baarlamaanka. Intaasaa ku filan, inta kale baarlamaankaa soo saaraya idinka shaqo kuma lihidin.

- **Qodobka 44aad:** Qaabka uu ku imaanaayo iyo tiradiisa, waxaad tiraahdeen Guddiga Qaran ee Madaxbanaan ee Dhulka wuxuu ka koobanyahay ayaad tiraahdeen, maydaan sheegin intuu ka koobanyahay. Dawlad goboleedyada ayay ka imaanayaan ayaad tiraahdeen, meeqo dawlad goboleed ayaa dalkeena ka jirto? Ma iska furnaanaa, mid furan muu noqonaa? Meeqaase dawlad goboleed oo dalka ka jirto? Yaa sheegi karo, idiinka manoo sheegi kartiin? Wax imaan doono manoo sheegi kartiin? Guddiyada Qaranka waxay ku koobanyihiin qodob ka mid ah Cutubka 10aad inuu yahaan rajaynayaa, qaabka ay u qoranyihiin ayaa sax ah.

- Guddiga waa inuu ahaada sagaal (9), oo uusan ka badnaan (9) oo weliba la ogyahay awood qaybsiga soo jireenka ah in loo qaybsado. Laakiin haddaad tiraahdid min hal xubin waxay ka imaanayaan Dawlad Goboleedyada, dadka Soomaaliyeed awood qaybsi ayay ku wada jiraan, qaar waxay noqonayaan afar (4), qaar waxay noqonayaan shan (5), qaarna hal (1), qaarna maba helayaan waxba Laakiin, sagaal (9) markay yihiin siday ku kala qaadan jireen waa la yaqaan, marka waxaan rajaynaa Guddiga *'please'* inaad sagaal (9) xubnood ka dhigtiin, iskana dhaaftaan waxan kale oo faraha badanle. Waayo, inta kale baarlamaanka ayaa soo saaraayo, haddii aad ku koobtiin sagaal (9). Guddiga wuxuu ka koobanyahay waaba tiraahdeene sagaal (9) xubnood, khalaas aad halkaas ku joojisiin waxaa waaye.

- Waxaa muuqanayso guddi baarlamaanka ruuxiisu sharciga uu soo saarayo mid loo xilsaaraayo dhulka inuu yahay. Guddiga haddii la yidhaahdo dawlad goboleedyada ayuu ka imaanayaa, waa sax. Dawlad goboleedyadu dhul badan ayay haayaan, horta marka uugu horayso, dawlad goboleedyadu waa yeelanayaan guddi dhul iyagana oo guddigaan la shaqeeya. Laakiin guddigaan maa Soomaaliland intuu tago dhulka ay haysato wax miyuu kasoo qaban karaa? Maya, kan Puntland sidoo kale, kan Hirshabeele oo aan ani kasoo jeedo oo layga soo doortay intuu u baxo, keen warshaddii Balcad iyo warshaddii hebla iyo dhulka keen miyuu dhihi karaa? Maya, Dawlad goboleedyo ayaa la noqday. Federaal ayaa la noqday. Annaga guddigaan samaynayno, waa guddi heer qaran oo federaal ah, waxayna la shaqayn doonaan guddiyada imaanaaya ee ay yeelan doonaan dawlad goboleedyada. Marka annaga yaanaan kusii talax tegin. Guddigaasna sagaal (9) xubnood halaga dhigo, hana loo bixiyo Guddiga Dhulka iyo Xaduudaha, wayna is qaadan karaan, doorashooyinkana halaga soo reebo, oo Guddiga Doorashooyinka sagaalkiisa (9) ha ahaado. Guddi Doorasho oo 15 ah goormay isku imaanayaan? Goormay doorasho qabanayaan? Aad ayay u tiro badantahay.

Xildhibaanno, guddiga sharafta leh inta hadda aad soo saarteen, 3da cutub oon hadda akhrinay waxa ku jira 9 qaraar ama 9 xeer oo baarlamaan uusoo saarayo, haddii 15 cutub ha laga hadlo la idhaahdo, meeqo xeer oo baarlamaankan ku dhinaan doona oo lasoo saarayaa? Goormayse hawshaas dhamaanaysaa?

Dalka markasta labo culaysba kan fudud ayaa mar kasta la qaataa, xeerarkaan faraha badan leh oo aad baarlamaankan kusoo xiraysaan waxaan jeclaan lahaa waxyaabo go'aan laga gaari karo inaad qortaan oo aad meeshii idiinku adkaataba aydaan na dhihin xeer baarlamaanka soo saarayo ayaa lagu qeexayaa; waayo, meeqaa xeer aan horay u samaynay?

Meeqo xeer ayaana dhiman? Hada 3 cutub ayaa waxa ku jira 9 xeer, dib u akhriya, fiiriya inta xeer baarlamaanku soo saarayo ee ku qoran, waa sagaal (9), marka waxaan qabaa dastuurkeena inuu noqdo, dastuur ay awlaadda iyo faraca dambe ee Soomaaliya ay naga dhaxlaan. Dabcan waxbay ka beddeli doonaan, laakiin, mid '*professional*' ah oo nalaga dhaxlo inuu ahaadaan aad u jeclahay. Inaan iska boobsiino kaliya wax ma tarayso. Marka waad mahadsantihiin sellaamu calaykum waraxmatullahi wabarakaatu.

6) **Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane:**
Bismillahi Raxmaani Raxiim. Mahadsanid Guddoomiye,

- **Qodobka ugu horeeyo ee 42(1):** Wuxuu leeyahay oo uu ka hadlayaa dhammaan Dhulka Jamhuuriyadda FS, waxaana wadajir u leh Shacbiga JFS, halkaas annigu waxaan qabaa "shacbiga ah" in "shacabka" laga dhigo, faqradana waa faqrad cusub. Faalladana waxa aad ku sheegteen shacabka, qodob ahaan waxaan qabaa in lagu qoro shacabka oo la dhammaystiro faqradduna sidan ayna u furnaanin. Waxaana mas'uul ka ah dowladda in la yiraahdo xeerarkeeda kala duwan iyada oo lagu sheegayo ama si gooni ah loo sheegayo baarlamaanka. Qodobka hore sida aan ugu soo sheegnay, laakiin waa in la dhammaystiraa oo la caddeeyaa cidda shacabka mas'uulka uga ah in ay tahay dowladda.

- **Qodobka 42(5):** Isla qodobkan faqradda 5aad, marka aad tirinayseen xukuumadda FS iyada oo la tashanayso dawlad goboleedyada iyo ciddii kale ee ay quseyso, waxay dajinaysaa siyaasadda dhulka ee qaran lagu hormarinayo maamulka dhulka si joogta ah dib-u-eegis loogu samaynayo, si loo xaqiijiyo, marka aad tiriseen inkasta oo aydaan qoraynin Afka Soomaaliga oo "A,B,C" aad qoraysaan, fiicnaan lahayd in aad qortaan (B,T,J), dhowr jeerna ay sheegeen Xildhibaanada,

- **Qodobka 42(5) (a):** Xarafka (A) waxaad dhahdeen: xal degdeg ah oo maangal ah in laga gaaro, haddiiba khilaafaadka ku saabsan dhulka ama milkiyadda ma dhammaystirno qodobkan, sida xildhibaanada qaar ay sheegeen "haddii" haddii aad ka saartaan, waa la fahmi karaa in aad dhammaystirtaan. Haddii uu yimaaddo khilaaf oo aad ku kabtaan oo aad dhammaystirtaan aad iyo aad ay muhiim u tahay.

- **Qodobka 42(5) (f):** Xarafka (f) oo ka dambaysa qodobkaas, faqrad aad u muhiim ah weeye, in aad soo kordhiseenna waan bogaadinayaa, waa faqradda leh "in la xadido inta uu la ekaan karo dhulka qof ama shirkad ay milkiyad ahaan u yeelan karaan'. Dhulalkii aad iyo aad ayaa loo ootay, oo maanta magaalo walba haddii aad tagtid 10km oo ayna cid dagnayn oo qofna aaddan ku arkaynin baa waxaa loo diiday daaqsinkii, xoolihi iyo dadkii danlayda ahaa, nin walba wuxuu leeyahay: annagaa iska leh waxba lagama samayn karo, xoolihii baa laga cayrinayaa dadkii in ay ku intifaacaan baa loo diidayaa, marka inay caddahay inta uu qof yeelan karo ama shirkad ama hay'ad in ay caddahay waa arrin aad iyo aad u muhim ah.

- **Qodobka 43(7):** Baaxadda dhulka iyo muddada isticmaalka marka aad ka hadlayseen, waxaad sheegteen oo kaliya dhulka, badda ama hawada, halkaas waxaa wanaagsan in lagu

daro "webiyada, jasiiradadaha iyo kaymaha" meelaha noocaas oo kale in lagu daro waa meelaha aadka u muuqanayo ee waddanka, dadka la leeyahy lagama kiraynkaro. Waa meelaha si buuxda ay isha uga hayaan inta badan oo dalxiiska iyo waxyaabaha noocaas oo kale ah meelaha laga samayn karo weeyaan.

- **Qodobka 43aad:** Guddiga Qaranka, anigu waxaa igu qoran in ay is khilaafsanyihiin. Laakiin halkan waxaa ku qoran "Guddiga Qaranka ee Madaxabanaan ee Dhulka, Guddiga Qaranka ee Madaxabanaan". Marka aad saas tiraahdaan waxaad mooddaa, dhadhanka Af-Soomaaliga in uu aad iyo aad u dhadhamaynin, cinwaankaas annigu in la baddalo ayaan qabaa oo lahagaajiyo "Guddiga Qaran ee Madaxabanaan ee Dhulka" in la dhoho waa wax la gartay, "Guddiga Madaxabaan ee Dhulka Qaranka" in la dhahana waa wax la gartay. Laakiin Guddiga Qaranka ee Madaxabannaan ma fahmayo aniga qaab ahaantiisa, marka cinwaankaas in lagu laabto ayay aad iyo aad u fiicantahay.

- **Qodobka 43aad Farqadda 2aad** :Ee xilalka Guddiga marka aad ka hadlaysaan waxa aad mooddaa sida xildhibaanadii hore ay sheegeen *'Advisors'* in ay guddiyo iska yihiin, guddi talo bixin iyo ilaalin waxay talo soojeedin siinayaan dad noocaas oo kale in ay yihiin, guddigan kama hadlayo hantida iyo dhulka ay dowladdu leedahay, maanta caalamku waynu ognahay guddiyada noocaan oo kale ah haddii ay samaysanyihiin, waxa 1aad ay ka hadlaan waa hantida ay dowladdu leedahay. Maantana waxaa dayacan hantidii iyo dantii guud ee dhulka ayaa dayacan, gobol waba iyo meel walba waxa ay dadku dageen markii uu burburku dhacay, hantidii iyo dhulkii guud ayaa lagu habsaday, meelaha qaar degmooyinkii khidmadii ay qaban jireen maba qaban karaan maanta, suuq ayay noqdeen oo waa ay is beddeleen, meelaha qaar xirooyinka ciidanka waxa ay isku beddeleen xaafado sida loola tacaamulayo, xitaa haddii ay dawladdu garato wixii ay qaban jireen, in ayna qaban karin in ay ku wareejiso ama ay dawladdu xaraashto guddi sameen karaa arrimaahaas qaabka ay u dhacayaan in uu ku caddaado ayaa aad iyo aad u wanaagsanayd. Awooddaa ayada ahna haba yaraatee meesha kuma caddo.

- **Qodobka 44aad:** Guddiga Qaranka ayaa ayadana halkan 10 jeer ku soo laabatay, faqradda 5aad ee (c) marka aad xubnaha qaybiseen, dowlad goboleedyada iyo dowlad goboleed waa la gartay cidda magacaabaysa DF waxaad siiseen 5 xubnood, 5 xubin sida ay u imanayaan oo xildhibaanka hadda iga horeeyay hadda sheegayay; *'Blance'* iyo sida wax loo qaybsanayay in ay dhuminayso ayaad mooddaa, cidda magacaabaysa naftirkeeda ma cadda.

- **Qodobka 45(1)(a):** Waxaad dhahdeen: "waa in uu yahay muwaadin leh jinsiyada jamhuriyada da'diisuna ayna ka yarayn 40sano" muwaaddin haddii aad dhahdeen, jinsiyada leh maxaa qasbaya in aad so qortaan? Waa in lagu daaya in uu yahay muwaaddin Soomaaliyed, shurudaha la qorana inta badan qof ama guddi ka mid noqonaya ama shaqo loo dhiibayo, kuli sida ku qoran waxay tahay: inu yahay muwaaddin Soomaliyeed, ee inu yahay muwaadin leh jinsiyad ma qorna. Jinsiyadda meesha in laga bixiyo ayaan qabaa. 40sano da'da aad bay u balaarantahay meesha anagu madaxwayne ma dooranayno, xubin guddi baa la magacaabaayaa, madaxwayne iyo guddoomiye baarlaman lama dooranayo oo gudomiyaha baarlamanka ayaa dhalinyaradii laga xayiray oo la yiri 40 sano wax ka yar uma tartami karaan, sidoo kalena Madaxwaynayaashi ayaa meel walba 40sano lagu qoray, 40ka sano guddiga in aan laga dhigin baan qabaa 30sano hadiiba da` la qorayo 30sano in ay ok tahay ayaan u arkaa.

- **Qodobka 45(1)(d):** Isla faqraddan xarafka (d) in uu leeyahay 15sano oo Khibrad ah, 15sano khibrad ah waa kabad badis iyaduna, halkaas haddii la badiyo 10sano in la dhaho ayaan qabaa.

- **Qodobka 45(1)(e):** In maxkamad si Kama dambeys ugu xukumin dambi ciqaabtisu gaarsisantahay 3sano, sharciyada aan soo saarnay oo dhan ee baarlamankan maray, qofka marka xuquuqdisa la hakinayo waxaa ku qoran 5sano in maxkamad dambi ay ciqaabtisu tahay ayna ku xukumin iyaga oo kuwaas la raacayo, ayaan waxaan qabaa in aan 3sano laga dhigin fursadda in mar walbo la yareynayo ayaad guddiga mooddaa, 5sano in laga dhigo ciqaabta qofkaas inaysan ku xukumin ayaan qabaa.

- **Qodobka 46(3):** Waxaad sheegteren, guddiga u xilsaaran qoondeeynta iyo dardargalinta ururinta dakhliga ayaad halkan ku sheegteen, mana faahfahsano xubnihiisa, wuxuu qabanayo, faahfahin badan malahan guddigaan aniga waxaan qabaa in uusan ahayn guddi jiro oo aan loo baahnayn baahina aan loo qabin, xitaa haddii baahi loo qabo halkan in lagu xuso ma ahayn iyo cutubka 9aad ee khayraadka iyo qaabka loo qaybsanayo inad kuso dartaan. Guddigan in halkan laga saaro ayaan anigu qabaa oo uusan guddi meesha ku jiro ahayn, haddii baahi loo qabana iyada oo cad oo ay sidan ka balbalarantahay waa in lagu xuso cutubka 9aad ee kheyraadka iyo qaabka loo qaybsanayo ka hadlayo.

- **Qodobka 47(3)(d):** Markaad ka hadlayseen dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, waa in ay ilaaliyaan nidaamka ka faa`iidaysiga dhulka iyo waxaad tiraahdeen: ilaalinta ugaarta iyo isirhaynka, halkaas ilaalinta ugaarta in ayna u baahnayn ayaan u malaynayaa, maanta ugaar aan ilashanaba maba hayno, sida ay wadanka dadka uga qexeen ayay ugaartiina uga qaxday oo xabad iyo dil ayay ka qaxdey, halkaas aniga waxaan qabaa ilaalinta ama qodob in lagu soo daro oo ah "in ay reebantahay ugaarsiga sharci darada ah, ka ganacsiga iyo xaalufinta dhirta" qodob sidaas isku wada raacsan in lagu soo daro ayaan qabaa. Waa mahadsantihiin.

7) **Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan:**
Bismillahi Raxmaani raxiim, alxamdulillhi wasalaatu wasalaamu…, Mudane guddoomiye, guddonka labada aqal ee Golaha shacabka iyo Aqalka sare, waxaan idinku salaamaya Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu**.**

Salaan kaddib, waxa aan rabaa in aan ka bilaabo Bogga 44aad cutubka Dhulka Hantida iyo Deegaanka, marka aad fiirisid lambar 5 wuxuu u qoran yahay: "Mas'uuliyadaha Dowladaha Heer federaal" ereyga Dawladaha annagu waxa aan ognahay in aynu hal Dawlad qabno, Dowlad federaal iyo maamul Gobleedyo, macnaha ma garan karo macnaha iyo '*Type Error-ka'* meesha ku jiro waxaan codsanayaa in la saxo hadalka aha "masuuliyadaha Dowladaha heer federal" oo laga dhigo " Dowladda Federaalka iyo maamul goboleedyada u xilsaaran" waxaan rajayn doonaa in '*type error-kaas'* la sixi doono. Teeda kale xubnaha labada aqal waxaa loo keenay in ay wax saxaan, inta badan waxaan dhaliilnaa labada guddi aniga waxaan arkaa in ayna dhaliil lahayn; waayo, waxa ay wax u keeneen waxa ay tahay in baarlamaanka labadisa aqal ay saxaan, siiqa toosin ku sameeyaan oo ay hagaajiyaan oo wixii khalad ku jira ay saxaan; laakiin, waa in aan la dhihin A,B,C maxaad u soo qorteen oo B,T,J maxaad u qori wayseen, kan ugu dambeeya ayaan rajaynayaa fikradihiina in lagu soo dari doono.

- Waxan kale oo aan rabaa in aan ka hadlo **Qodobka 42(3)** waxa ay uqorantahay "Dhulka waxaa lagu haysan karaa laguna sheegan karaa si waafaqsan" ayaa ku qoran, anigu waxaan dhihi laha "Dhulka waxaa lagu haysan karaa laguna sheegan karaa lahaansho sharci ama sifo sharci ah" dhulka lahaanshihiisa waa in la muujiyaa, dhulka waxaa lagu heesan karaa ama lagu sheegan karaa sifo sharci ah oo waafaqsan xeerka dhaqangalka ah ee Jamhuuriyadda.

- **Qodobka 42(5):** Isla qodobkan farqaddiisa 5aad waxaa qoran, xukuumadda Federaalka iyada oo la tashanaysa dowlad goboleedyada iyo ciddii kale, marka cidda kale hafdii dowlad goboleedyada la sheegay Dastuurka in aan laga dhigin baal '*majhuul'* ah oo aan la fahmaynin ama in uu caddaado oo wax sharci ah uu soo saaro marka cidda kale yay yihiin oo lala tashanayo? Annigu ma fahmin marka waa in farqaddaas la fiiriyo.

- **Qodobka 42(5)(e)** :Tan kale oo laga hadlay ee xarafka (E) ee dhahaya "in xal dagdag ah oo maangal ah laga gaaro" haddiiba marka in shaki la galiyo maba aha sida dad badan ay sheegeen oo laga dhawaajiyay dad badan, waa sharci, marka sharci la qorayana waxaa fiican, in uu wax kala gooyo wax sax ahna uu qoro.

- **Qodobka 42(8):** Marka aad fiirisid isla farqadda 8aad, waxay u qoran tahay "Dowladda federaalka kaliya ayaa u fasixi karta ama hay'ad shisheeye isticmaalka Caariya" ereygan "Caariya" aad ayaa loogu soo celceliyay, runtii waa kalmad carabi ah fasiraadeeduna annigu ma karo in aan meeshan ka sheego; laakiin, waxa aan jeclaan lahaa, in la ogaado, ereyga Caariya Bil carabi muxuu yahay? Dad badan oo aqoonyahano ah oo af Carabi yaqaanna ayaa meeshan fadhiya waan is waydiiyay, kalmada Caariya waa kalmad carabi ah oo macno kale leh, marka waxa aan rabnaa sida laga dhawaajiyay caariyadan in meesha laga bixiyo, heysasho **ku-meel-gaar ah** ama waxaa jira af Soomaali kale oo ka fiican, marka kalimadaas aad ayay meeshan ugu liidataa kuma habboon, '*totally*' waxaan rabaa in laga saaro.

- **Qodobka 43(3):** Waxa uu u qoronyahay "Dhammaan Hay'adaha" waxaad u malaysaa dhammaan Hay'adaha waa amar oo uu soo saarayo qof mas'uul ah, marka haddii aad ula jeeddaan dastuurka isagaaba mas'uul ah amarna wuu soo saarayaa waa wax la gartay; laakiin, farqada 3aad waxay u qorantahy xoogaa wareeg ayay u qorantahay, marka dhammaan hay'adaha dowladaha heer kasta oo xukuumadeed waxaa wajib ku ah, marka waxaad u malaysaa in ay u qorantahy si wareeg ah.

- **Qodobka 44aad:** Runtii waa laga dhawaajiyay xubnaha guddiga qaran ee madaxbanaan ee dhulka, runtii guddigaan sidiisaba guddiyo badan ayaa dhisay, dalkan wuxuu kusoo caano maalay ama nabad ku soo ahaa barnaamij la dhihi jiray 4.5 oo runtii aynu nabad ku qabno haddii wax la samaynayo, waxaa aad iyo aad u fiican in nidaamkaas la waafajiyo oo qof kasta si uu u helo xaqii uu ku lahaa guddigaas, laakiin haddii la yiraahdo maamul goboleed walba hal ayaa laga keenayaa , dowladda federaalkana 5 ayay keenaysaa gobolka Banaadir-na hal, qof kasta oo caaqil ah wuu fahmi karaa in ay dhici karto sadbuursi, si marka dood iyo khilaaf badan ayna u dhicin guddigan haddii aan laga maarmaymin oo ha shaqeeyo la yiraahdo, waa in sidii guddiyadii hore loo dhisi jiray oo kale nidaamkii aan ku soo qaybsan jirnay ee nabadda ahaa in nidaamkaas aad loo waafajiyo, marka insha Allaah waa in qodobkaas sidaas loo qaato.

- **Qodobka 46(3)**: Ee Bogga 51aad marka aad fiirisid guddiga u xilsaaran qoondaynta, taas hadda ayaa laga hadlayay, marka qoondayn iyo dhaqaale waxaa u xilsaaran wasaaradda maaliyadda, marka waxa aan rabaa, haddii ayba qoondayn tahay in loo daayo wasaaradda maaliyadda, haddiiba mar uu dakhli imanaayo. Kan kale marka aan ku noqdo ee 44 waxaa laga dhawaajiyay waa sax, waaaaradda Hawlaha Guud waxa ay leedahay arrimaha dhulka in loo daayo wasaaradda Hawlaha Guud, si ay dhulka u maarayso, waxaa kaloo jira dowladaha hoose ee ka shaqeeya dhulka, marka insha Allaah waxaan rajaynayaa, in la qaadi doono hadaljeedintayda. Waxaan ku soo gabaggabaynayaa oo aan leeyahy " **اللهم احعل هذا الدستور لصالح بلدنا وشعبنا يا رب اللعالمين ءامين**

8) **Xil. Mohamed Adam Moalim Ali.**
Bismillaahi raxmaani raxiim, waad mahadsantahay guddoomiye. Waan salaamayaa dhammaan Xildhibaanada iyo dadka kaleba, waxaan rabaa toos inaan u galo arar ma galaayo. Cutubkaan waa cutub muhiim ah waana cutubka dhulka, hantida iyo deegaanka, inta aan isku haysano. Soomaalidu waxay isku haysatana cutubkanaa ugu muhiimsan, markaa si gaar ah inaan u fiirinno waaye waxaan isku haysano waa dhul.

- **Qodobka 42 (3):** Oo u qoran dhulka waxa lagu haysan karaa laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan qabaa meesha xeerarka ah wax badan ayuu soo noqnoqday marka xeerarkaas in laga baddalo ee xeerka la dhaho, xeerka dhaqangalka Dhulka ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, xeerarkaas in laga baddalaan qabaa oo xeer la dhaho, haddii kale wax badan ayaa iska imaan karo.

  Waxa kaloo aragti ahaan, dastuurka inta xeer ee ka farcami doonta in gadaal aan uuga dhajino oo laga dhigo '*appendix'* oo la ogyahay inta xeer oo aan soo saari karno oo aan intaas wax aan ahayn ay soo bixi karin, iyadana in aad qaadataan '*Note*' ahaan.

- **Qodobka 42(5):** Xukuumada Federaalka iyadoo la tashanaysa, meesha dawlad goboleedyada horaan u sheegnay, maamul goboleedyada iyo ciddii kale, cidaas kale marka cid aan naqaano maahane waxaan qabaa in sideedaba laga tiro, mar haddii dawladii federaalka iyo maamul goboleedyadii talada la galiyay.

- **Qodobka 42(5) (a):** Sidoo kale waxaan qabaa faqradaha oo la soo kordhiyay oo "A" ay ugu horayso, Dhawraarinta, waxaan qabaa in kuwii hore sidoodii loosoo celiyo maaddaama, kuwan cusub kuwii hore ay ka dabacsanyihiin aragti ahaan, oo kaliya intaan kaliya ay kusoo kororto, Xukuumada Federaalka iyadoo la tashanaysa maamul goboleedyada. meelaha dawlad goboleedkana sida caadiga ah, waataan kuwii horena sheegnay dawlad tan federaalka uun waaye, maamul goboleed in la dhaho, xeerka dhulkana la dhaho.

- **Qodobka 42(8):** Waxaa ku qoran muddo aan ka badnayn "muddada xeer ku cayiman" ayaa qoran meeshaas waxay u baahantahay, in la saxo af Soomaliga, cayiman maahine muddo aan ka badnayn, mudada xeerku cayimaayo in laga dhigo oo '*error'* waayi midaasi.

- **Qodobka 44aad**: Qaabdhismeedka Guddiga: Xubnaha Guddiga Qaran ee Madaxbanaan ee Dhulka, waxaan qabaa, qaab dhismeedka uu hadda u dhisanyahay sida la sheegay, in laga baddalo oo qaabka sidan loo qoro siiqo ahaan. **Guddiga Qaran Madaxbanaan ee Dhulka waxa uu ka koobanyahay:**

- Sagaal (9) xubnood oo ku imaanaayo hanaanka awood qaybsiga ee dalka.
- Min hal (1) xubin oo farsamo oo ka imaanaayo maamul goboleedyada iyo gobolka Banaadir, In sidaas la dhaho oo sidii aan naqaanay een wax u qaybin jirnay ee barakaysnayd inaan u qaybsano, middaan kale aad ayaa loogu wareeraa, (5 xubnood oo dawlada Federaalka, min xubin), waxaan qabaa aniga 9kaas xubnood oo aan ku kabno xubno oo farsamo oo ka imaanaayo maamul goboleedyada.

- **Qodobka 45(1) (a):** Da'da waxa qoran 40 sanno waxaan ayidayaa meeshaas in la yareeyo oo laga dhigo, fursadda la abuuro meesha ay 40ka tahay in laga dhigo 30, sidoo kale waaya-aragnimadana meesha 15ka ah laga yareeyo oo laga dhigo 7 sanno, 50%.

- **Qodobka 46 (3) :**Waa dawlad Goboleedyadii ayaa ku qorane; laakiin, maamul goboleedyada inaan dhahno.

- **Qodobka 47 (3) :**Sidoo kale weli meesha waxaa meesha ku qoran dhawraariyaantii ayaa qoran, Dhawrista in laga dhigo, ayadana midaas waan qabaa oo aan fududayno. Waad mahadsantihiin. Salaamu caleykum.

9) **Xil. Mohamed Muhumed Mohamed "MMM":**
Bismillaahi raxmaani raxiim, alxamdellahi Rabil caalamiin wabihi nastaciinu calaa umuuri dunyaa wa diin. Guddoonku waa salaamanyahay iyo xildhibaanada sharafta leh.

Cutubkaan 3aad een ka hadlayno maanta wuxuu ka hadlayaa Dhulka, Hantida iyo Deegaanka, Dastuurka markii la qorayo waxaan horey usoo sheegnay inuu ahaa wax '*social contract*' ah oo bulshadu ku heshiisay, waxaan rabnaa marka maanta in aynu saxno qoraalkii ahaa sidaan ugu heshiin lahayn Dhulka kadibna Hantida iyo Kheyraadka Dhulkaa ku dhex jira sidii aan si caddaalad ah ugu qaybsan lahayn waxyeeladana uuga ilaashan lahayn waa saddexdaas qodob weeyaan.

- **Qodobka 42 (1) (2) (3) ilaa (5)(g):** Wuxuu ka hadlayaa dhulka sidii lagu lahaan lahaa, ciddii mas'uul ka ahaan lahayd, qofku intuu lahaan karaa, haddii dad '*investors*' ah oo bannaanada ka imid oo raba inay dalkan maalgashadaan xaquuqda Shatiga ee la siinayo yaa iska leh inay bixiyaan? muddo intee leeg ayay joogi karaan? horta inta aan dhulka uga hadlayno waa intaas, haddaan marka u galo.

- **Qodobka 42 (1):** Waxay u qorantahay dhammaan Dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

- Qodobka 7aad ee dastuurkii kumeel-gaarka ahaa 2012 wuxuu leeyahay waxa mas'uuliyadaas iska leh Dawlada Federaalka; laakiin, hadda waa laga saaray, buugga kale markaad fiirisaan, dad khubaro ah ayaa loo saaray inay arrintan kasoo talo bixiyaan dhowr waddan Uganda, Kenya iyo Ethiopia lahaanshaha Dhulka marka la eegayo, waxa laga baqay marka haddii la idhaahdo waxa mas'uul ka ah dawlada federaalka haddii la idhaahdo, oo sida Kenya oo kale ah, dadka dhulka la siinayo ee loo cabbirayo booska loo cabirayo, muddo waxa lagu siin karaa 100 sanno bas ah, 100kaas sanno wixii ka dambeeya dawladu way kaala laaban kartaa, waa kirro weeyi mulkiyad ma aha, marka war wixii haddii aan dawladii hoos gayno mulkiyadii amay meesha ka baxdaa? ayaad mooddaa meesha in looga saaray, oo hadhaw la yidhaahdaa 50kii sannaba dhulkaad dagantahay dawladu hadhaw

siday doontay ka yeelaysaa, qof kale ayay siin kartaa haday doonto marka; laakiin, anuu waxaan isleeyahay cabsidaasi wax meesha ku jira ma aha shuruucda meelaha kaleetana nama khusaynayaan, Dastuurkaan shacabka Soomaaliyeed baa iska leh, waxaana wakiil uuga ah dawlada marka '*at least*' in loo qoro "dhammaan Dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxa wadajir uleh shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, waxaana mas'uul uuga ah ilaalintiisa dawlada federaalka". Markaa qodobkaa intaas ayaan faqradaas kusoo siyaadiyay.

- **Qodobka 42 (5)(a):** Kaliya waxaan raaci lahaa xildhibaanadii iga horeeyay oo ah erey sixidda, dhawraarin waa erey macno ahaan wax ilaalinaya oo labo shay oo isku dhici lahaa dhexdooda wixii lagu ilaalin lahaa weeyaan, erey horumarsan ma aha, haddii meeshiisa loo daayo oon dee sidiisa ku baranana meesha waxtar buu uleeyahay, ereyada hadda aan naqaanno erey halagu baddalo haddii, la idhaahdo oo macno wayn oo isla macnaha laga fahmayana waan soo dhowaynayaa.

- **Qodobka 42(5)(e):** Xarafka (e) hadaad fiiriso, in xal dagdag ah oo maangal ah laga gaaro haddiiba khilaafaad ku saabsan dhulka iyo milkiyadu ay timaaddo, arrintaas waxaan isleeyahay, sixitaan bay u baahantahay, qodobkaan meesha in laga saaro. Dastuurkan waxa loo qorayo ereyadii booliiska, maxkamada iyo xabsiyada la gayn lahaa ma aha ujeedku, khilaaf hadduu imaado, in xal loo helo booliiskii iyo maxkamadihii ayaa u jooga, dastuurka markaa waxaas laguma qoro, marka ereyada, in laga saaro qodobkaan meesha, macno ahaan sax buu u yahay; laakiin, meeshii lagu qori lahaa meeshan ma aha. Dastuur waxaan laguma qoro markaa in meesha laga saaro xarafka (e)**,** ayaan soojeedin lahaa oo meelaha uu ku habboonyahay la geeyo, oo waxyaabahan '*land dispute-ka'* wuxuu leeyahay xeerar kaleeto oo hay'adaha dawladu fulinteeda ay leeyihiin.

- **Qodobka 42(5)(Xarafka G:** Waxa ku qoran in la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka ganacsiga dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda mulkiilayaasha dhulka yar, mulkiilayaasha dhulka yar leh, macnahaas waxaan isleeyahay qofku wuxuu wax ku lahaan karaa dawladdu, markay dhulka mas'uulka ka ahayd dadkuna dhulka wada lahaayeen, dee qof walba waxbaa loo xadidoo waxaa laguu xadidayaa meesha guriga deegaankaaga ah, waxa kaloo laguu xadidayaa ganacsigaaga meesha ganacsigaaga aad ku yeelanayso, waxa kaloo laguu xadidayaa meesha beerta ah, ganacsigu ama warshado ha noqdo ama wax kaloo bulshada waxtar u ah ha noqdo; laakiin, dhulku sidiisaba ganacsi ma galo, oo intaad dhul dhan iska oodato inaad ganacsi la sugto oo xoolihii iyo daaqsinkii iyo bulshadu meeshii ay joogtay aad caqabad ku noqoto sax ma aha. Dawladdu waxay ilaalinaysaa taas weeyi, marka qof raba dhul inuu iska ooto oo ganacsi u ooto, qodobkaan marka hala waxeeyo.

- Labadaan kale ayaan marka isku darayaa, labada waxaan isku darayaa guddi, oo Guddiga Dhulka iyo Guddiga Kheyraadka, waxaan isleeyahay Golaha Wadatashiga Qaranku waagii dhowayd, heshiis maysan gaarin marka la eego qaabka kheyraadka loo qaybsaday, waxaan isleeyahay marka '*outsourcing*' yaan lagu samayn Dhulka iyoKheyraadka. Waxaa jira Wasaaradda Hawlaha Guud, Wasaaradda Qorshaynta iyo Wasaaradda Maaliyada.

- Labada guddiba shaqooyinkooda Wasaaradahaas ayaa iska leh, Wasaaradaha hala xoojiyo, hay'adaha waddankan '*socialist*' ma aha waa waddan '*democratic'* ah, Wasaaradaha shaqooyinkooda haloo daayo guddiyadana meesha halaga saaro. Waad mahadsantihiin.

10) **Xil. Roda Arab Sharif Abdi:**

Salaamu calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatu, guddoonka, xildhibaanada sharafta leh, inta soo hartay duhurka markii la soo qadeeyey kaddib waad salaaman tihiin. Waxaan rabaa inaan iraahdo intiinan, lama huro nin hawl kara, sida geed hadhwayn baa lagu soo hirtaaye, xil huwaday had iyo jeer, horusocod u baahane, heestan halkaa kawada hurdadaan idinkaga kicinaayey yaah. Waxaan rabaa inaan doodda dhexgalo Nuux marabo inuu iga gooyo, dastuurka ani waan ka maqanaa intaad qodobadii hore ka shaqaynayseen, waxoogaa cabsiyaa igu jirtoo markaan arkay in lagu dhiiraday baa ana iri kolay dhinacaaga wixii fikradaada ah ka dhiibo cutubaka 3aad rabaa inaan kahadlo.

- **Qodobkiisa 42(1)**: Ugu horrayan dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxaan ku dari lahaa halkaa talo bixin ah, dhammaan dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, waxaa mas'uulka ah dawladda, waxayna mas'uul uga tahay shacbiga Soomaaliyeed, oo siiqada sidaa loo toosiyaan jeclaan lahaa.

- **Qodobka 43(2)(b):** Kuma sii dheeraanaayo ereyga caariya isgana xildhibaanadii horaan xoojinayaa wax karoon halagu baddalo.

- **Qodobk 45(1)(a):** Ereyga kalee dhawraaris, laftarkiisa waxaan jeclaan lahaa talo bixin in wax kale lagu baddalo ama xifdin laga dhigo.

- **Qodobka 43aad:** Haddaan u dhaadhaco, guddiga madaxabanaan ee dhulka, guddiga madaxabaannaan, guddiga qaranaka waxaa ku qoran guddiga madaxabanaan ee dhulka, magaca guddiga wuxuu u badan yahay la talin waxaan jeclaan lahaa, haddiiba guddigan laga maarmayn, in laga dhigo guddiga talo bixinta; maxaayeelay, ma aha guddi isagu awood u leh in uu wax qabto, waxaa ku qoran meel walba talo bixin, talo bixin, haddii marba uu yahay talobixin oo awood u lahayn isagu, guddigan magaciisa ha laga dhigo guddiga talo bixinta taasaan ku talinayaa iyadana, waxaan rabaa dhawraarin waan ka hadlay waxan rabaa

- **Qodobka 46 (2)** :Waxaa xeer lagu dhisayaa hay'ado u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in khayraadka dabiiciga ah looga faa'iideysto si aan badda iyo berriga dhulka, badda,biyaha iyo dhulka in halkaas laga dhigo wax u dhimayn oo waxyeellana ka ilaalinaysa hantida dabiiciga ah, hay'adahaas siday u qoran tahay koley siiqada ma fahmin; laakiin, hay'adahaas meesha lagu qoray mulkiyad ma bixin karaan waxaa xeer lagu dhisayaa hay'addo u xilsaaran maaraynta mulkiyadas, hay'addaaha la soo magacaa bay ee hadda in kastoo kuwo kale dhiman yihiin, waxaa ka mid aha: Hay'adda Macdanta, Hay'adda Biyaha iyo Hay'adda Betroolka; oo waaba kuwii iyaga laga ilaalinayee kuwa macdanta la baxaya iyo kuwa biyaha laga ilaalinaayey badda iyo berigaba iyo kuwa beteroolka haya'dani ma iyagaa laga ilaalinayaa mise iyadaa loo dhisayaa oo muxuu ahaa ilaalinaysa? Mar haddaan laga maarmaynin hay'adan, in la dhiso ciidan ilaaliya deegaanka, dalalka dariska nahay waxay lee yihiin, in ay ciidamo deegaanku u ilaaliyaan, inaga waabad aragteen ugaadheena waaba ta laga hadlaayo *'genetic'* kada isirraaca ugaadha inuu dhammaado maaha, ugaadheenii aan gaarka u lahayn waxba kama joogaan, markaa ciidanka deegaanka ilaalinaaya ee xayawaanaadkana ilaalinaya in lagu daro oo ciidan ladhiso ilaaliya deegaankaan ku talin lahaa, hay'adahan laftarkooda ka ilaaliya.

- **Qodobka 45(2):** Xubnaha Guddiga Qaranka  Madaxabannaan ee Dhulka waxaa soojeedinaya, Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, waxan halkaa ka dhigi lahaa, waxaa soo magacaabaya xukuumadda iyadana qodobkaas.

- **Qodobka 45(1) (a):** Xubnaha gudiga, Shuruudaha Xubinnimada guddiga, waxaa ku qaran, In uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda  Jamhuuriyadda ; da'diisuna ka yar tahay  40; halkaas waan odhan lahaa inuu yahay muwaadin Soomaaliya; maxaa yeelay, sharciga jinsiyadaha qodobka 8 aad fadradiisa 2aad ee dastuurka laba jeerba way ku qoran tahay sharciga  jinsiyadaha waa weli waxaana meel marindoona baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya kaa soo caddaynaaya jinsiyadda qofka Soomaaliga ah iyo sida lagu qaadanaayo, markaa waxaan oran lahaa, meeshan ay ku qorantahay inuu yahay muwaadin leh jinsiyada Jamhuuriyadda, jinsiyadda waxaa qaadan kara ama dhalashada qaadan kara ama deganaanshaha qaadan kara qofkasta oo wadankan ku nool 5 sanno oo canshuur bixiyo ah oo xaq u yeesha, koley sharciga jinsiyaduhu inama soo gaadhin waxaan oran lahaa halkaa laga dhigo inuu yahay muwaadin Soomaali ah inuu yahay muslim sunni ahna halagu daro Soomaalinimada,

- waxaa kaloo oran laahaa in lagu daro qodob cusub oo ah inuu dhimirkiisu fayaw yahay oo uu caafimaad qabo macnaha hubin inuu caafimaad qabo oo dhimirkiisa iyo miyirkiisa uu qabo, taasaan odhan lahaa, waxaan rabaa inaan isla

- **Qodobka 47aad:** Ee ka hadlaaya Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ee waxyeellada Deegaanku ay saameeyeen waa in ay, qaadaan tallaabooyin degdeg ah oo lagu dhaqangelinaayo waxaan oran lahaa waxyeeladaasi lagu daro qodob ah farqad cusub si aynaan wasakhyantaasi noo soo gaadhin in lagu daro qodob diidaaya inaan baddeena inaan wax lagu shubi Karin iyo berrigeena toona, taasna waan soo jeedin lahaa. Waxaan rabaa maadaama aan qodobadii ka hadlaayey intaasaan ku soo koobay.

  Waxaan rabaa maaddaama ay maalintii iigu horeysay oon dastuurka ka hadlo ay tahay inaan labo kalmo ku sii darsado, waxaan ku bilaabayaa marka hore codsi guddiga dastuurka labadiisa guddi ee dastuurka aan u soojeedinayaa guddiga dastuurka Soomaaliyeed waxaa idiin sheegayaa gacantiinuu ku jiraa dastuurku mana jiro anagu waxaan ku leenahay '*comment*' iyo waxaa nala qumman inaan talo bixin halkan ka sheegno, laakiin cidda kasoo shaqaynaysa ee gacanta ku haysa ee la rabo inay eegto waxa diinta iyo dalka ummadda danta Soomaaliyeed dastuurku waa heshiis bulsho.

- Waxa ummadda Soomaaliyeed ku heshiin karto ayna markale iskaga hor imaanaynin, waxa diinta islaamku qabto idinkaa mas'uulka ah, lama noolaanaayo qabribaa qof walaba ka horeeya cid qabriga inila galaysa maleh, guddoonkaa idinla galayn, madaxweynaa inila galayn, xildhibaanaan idinla galayn, waxaan idiinka baahanahay inaad ilaahay ka cabsataan aad eegtaan '*comment*'-tiga waxyaabaha laga hadlaayo sidii ayna nagu soo celinin habraacii oo kale oo aad hadhow waxay noqonaysaa gacantaag iyo codayn idinkoo kasoo shaqeeyey codsigayaga "comment" gayaga eegtaan inaad arrintaa dib-u-eegtaan baan idinka codsanaynaa ood Alleh ka baqdaan. Waxaan rabaa inaan iraahdo ugu danbayntii dastuurku waa shaqadeen haddii aynu mustaqbalka dawladda soo socota uga shaqaynayno waxaan leehay, "wadadii cadday cagta saartayee, caynaanka hay hay", haddiise, inagu samaysanay oon inagu isku cabirayno oon muddo xilleedkeena aan ku shaqaynayno 4 qodob waa khiyaano qaran, maca salaama.

11) **Xil. Mukhtaar Mohamed Guled:**

Bismilaahi raxmaani raxiin, guddoonka iyo xildhibaannada labada aqal, asalaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barkaatu, bacda salaam; maadaama, wakhtiguna uu xilli danbe iska yahay waxaan toos u baarayaa comment-gayga qodob qaar aan ka qabo.

- **Qodobka 42(7):** Oo u qoranyd sidatan: "Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer, haseyeeshe, ma jiri karto qayb ka mid ah dhulka, badda ama hawada dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo loo bixin karo fasax istacmaal joogto ah". Markaa qodobkii ama faraqaddii noocaas u qornayd waxaan soojeedinayaa, in loo qoro "Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxaa xeer gaara kusoo saaraya baarlmaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" in lagu soo qoro meeshaas oo lagu soo daro, baarlamaanku wuu ka maqanyahay. Sidaa darteed waxaan soojeedinayaa in lagu daro, waxaa xeer ku soo saaraya ama xeer gaar ha ku soo saaraya Baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, iyadoo soojeedintuna ay ka imaanayso Golaha wasiirrada, kaddibna faafinta rasmiga uu ku soo saarayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobka 43(1):** Isagana u qornayd: Waxaa jiraya Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo heer Qaran ah, kaasoo uu xeer ku soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, meeshay ku qornayd iyadan waxaan soojeedinayaa in loo qoro, waxaa jiraya Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo heer qaran ah kaasi oo ay soojeedinayaan golaha wasiirrada xukuumadda federaalka oo la tashaday hay'adaha ay khusayso ee heer federaal iyo heer dawlad goboleedba, waxaana ansixinaya Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka iyadoo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku uu ku meelmarinayo xeer madaxweyne, qodobkaas isagana waxaan soojeedinayaa intaas in lagu daro oo guddiga aan u malaynaayo inay soo illaabeen; balse, qalad ayna ka hayn.

- **Qodobka 44aad:** Oo u qoran Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulku wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda, oo meesha aad qorteen oo dawlad goboleedyada min hal xubnood iyo gobolka banaadir iyo dawlada federaalka, sidoo kale iyadana waxaan qabaa xildhibaankii iga horeeyey siduu u jeedinaan la qabaa xildhibaan Maxamed Soomaali**,** guddoomiyaha iyo xoghayaha waxaan ka codsanyaa inay waxooga dhegaha nasiiyaan, qodobka 44aad waxaa qabaa iyadana in loo qoro sidii hore oo guddiyadii kale ay u qornaayeen oo ahayd guddiga madaxabaannaan inay ka kooban yihiin 9 xubnood , 9 ka xubnoodna lagu soo xulo sida awood qaybsiga beelaha Soomaaliyeed ama nidaamka loo yaqaano 5 ta beelood ama 4.5, hadba taad rabtaan u isticmaala; laakiin, waxaan qabaa guddiyada kan hadda aad soo qorteen iyo kuwa ka danbeeya dhammaantood waxaan qabaa in lagu soo xulo iyadana iyadoo loo fiirinaayo nidaamka awood qaybsiga ee beelaha Soomaaliyeed laakiin, nidaam federaali ah waxba kuma qaybsana, marka laga reebo lacagaha wasaaradda maaliyaddu bixiso, laakiin, guddiyada iyo arrimaha kaloo siyaasadda ah dalkani waxaa lagu qabsani karaa kaliya nidaamka awood qaybsiga ee beelaha ee 5 ta beelood.

- **Qodobka 45(2):** Oo u qornad isagana Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka waxaa soojeedinaya golaha wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo la soo tashaday hay'adaha ay khuseyso ee heer federaal iyo heer dawlad goboleedba, baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu uu ku

meelmariyo  Xeer Madaxweyne, anuu waxaan qabaa faqradaasi inaan loo bahnaynaan qaba oo la tiro sideedaba faqradda 2 aad ee qodobka 45, maaddaama faqradaasi uga soo hadalnay mid u dhiganta qodobka 43 faqradiisa 1 aad ay isku mid yihiin ama isku dhowyihiin, waxaan qabaa inyadana in la saaro oo la tiro.

- **Qodobka 46 (1):** Oo nu qornayd Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran waxaana looga faa'iideysanayaa qaab waara, oo badda iyo dhulkuba xammili karaan, oo  aan wax u dhimayn shacabkana waxtar u leh, oo u qornayd, iyadana waxaa qabaa in loo qoro sida soo socota: Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran, waxaana looga faa'iideysanayaa qaab waara, oo badda iyo dhulkuba xammili karaan, oo  aan wax u dhimayn shacabkana waxtar u leh iyadoo had iyo jeer waxaan qabaa in lagudaro intaas,  iyadoo had iyo jeer la tashi gaara lala yeelanayo dawlad goboleedka iyo dadka  deegaanka ee khayraadkaas dabiiciga laga helay, iyadana intaasaan qabaa in lagu daro.

- **Qodobka 46 (2):** Oo u qornayd in la dhisi doono ama haydaha ka kooban, Hay'adda Macdanta iyo Hay'adda Biyaha iyo sidoo kale Hay'adda Betroolka; iyadana waxaan qabaa hay'addahaas tirada badan ee shaqadii wasaaradaha la wareegay kuwii hore udhisnaa ayaan soo jeedinayaa iyo dhammaantood in la baabiiyo inta aan laga maarmikarin ee kaliya lagu reebo dastuurka laakiin, hay'addaha kale ee la dhisaayo ee cusub in la joojaan qaabaa oon la dhisin ayan soo jeedinayaa iyadana.

- **Qodobka 46(3) :**Oo u qornayd Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga waa in uu sugaa in dakhliga ka yimaadda hantida dabiiciga ay si caddaalad ah u wadaagaan dawladda Federaalka, dawlad goboleedyada iyo dawladaha hoose ee Jamhuuriyadda, hal su'aal guddiga waxaan u qabaa dawladaha hoose ee gaarka ah ee jamhuuriyada hoos taga waan ka rabanaa guddigu inay noo sheegaan. Waxaan ognahay, in dawlad goboleedyada dhammaantood ay degmooyinkoodu lee yihiin dawladaha hoose ayna hoos tagaan dawlad goboleedyada, markaa waxaan idinka rabnaa dawladaha hoose ee jamhuuriyada aad ka hadlaysaan meesha ay ku yaalaan idinkaan idinka rabnaa inaad noo sheegtaan iyadana,  sidoo kale lacagahaas iyo dakhligaas la ururinaayo waxaa noo qaabilsan hay'add ama wasaarad, wasaaradda maaliyadda ah, markaa in guddi iyo niman kaloo hadda loo xilsaaray inay dakhli soo ururiyaan iyadana waxaan qabaa inaan loo baahnayn, oo wasaaradda maaliyadda loo daayo wixii dakhli ururin ah.

- **Qodobka 42(1):** Oo aan ka tagay hadii aan dib ugu soo laabto oo u qornayd**:** Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan qabaa iyadana,  in lagu kordhiyo waxaana masuulka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya guud ahaan dhulka Soomaaliyeed waxaa masuul ka ah dawladda federaalka Soomaaliyeed; laakiin, shacbigu si wada jiray wax u leeyihiin; laakiin, masuuliyad gaara inay ka saarnato inaad ku dartaan ayaan soo jeedinayaa sidii xidhibaanadii hore saaxiibaday u soo jeediyeen. Waad mahadsan tihiin, intaasaan ku soo koobayaa.

12) **Xil. Mohamed Omar Aimoy:**

**بسم الله الرحمن الرحيم:** Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamanka, Xildhibanada Sharafta leh Labada Aqal ee Baarlamanka Soomaaliya, Saxafadda ka soo qeyb galayasha waxan idinku salaamay Salanta Islaamka Salama Caleykum. Waxan rabaa maadaama laga hadlaayo

maanta Cutubka 3aad khaasatan Dhulka, Hantida iyo Deeganka inaa ku bilaabo hadduu Alleha awooda leh ogalaado.

- **Qodobka 42aad:** Ee ka hadlaayo Dhulka, Hantida iyo Deeganka. **Qodobkaasi 42 (1)** Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, in halkaas lagu daro ee si la yiraahdo si wadajir ah waxa leh in la yiraahdo shacabka iyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobkas 42(3):** Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ka ah, sidiisaba dhul marka la yiraahdo waxa lagu sheegan kara ama lagu lafaan kara dhul horta dhulka Alle ayaa iska leh, haddana waa dhul Soomaali ah saa u yahayna, dhulka waa kala asteesan yahay maxa jira dhulkaan qola waliba meel ayee ka dagan tahay, een marka laga reebo oo la yiraahdo midda danta guud ee dowladda iyo shacabka, haddana wuu sii kala baxbaxa.

- Dhul markii la yiraahdo waxa lagu lahaan kara ama lagu sheegan karaa marka la leeyahay, wuxu noqana in lagu lahaado ama lagu sheegto dhul dhaxal ama ganacsi ee aan aheyn kan dowladda, maxa jira maadaama la leeyahay waxa lagu lahaan kara see ku la haane dhul? Dhul waxa ku lahaan kartaa, in adigu meeshaada aad joogto aad dagantahay dhaxal aad ku leedahay oo ab ka ab dhulkaasi ama ganacsi aad gadatay, laakin haddii la yiraahdo sidii beri simaadkii waagi dowladdii dhaxe ee awoodda laheed dhulka lama kala laha ee waxii yaalay ee dadkii lahaa ee halkaas ku noola oo tacbadaha ahaa, beeraleeda ahaa, in dhulkoodi la siiyay dad bank lacag laga siiyay ee la tageen katarabeel iyo cagaf ee weliba ka dhisteen guryo dhagax ah la lee yahay waa hanti guud ama waa dhul qaran meeshas waxa ka imaaneysa, tii hore looga caraare oo kale waxa la dhaho dhul boob wax la qaadan karana ma ahan arintaas.

- **Qodobka 42(8):** Ee marar badan lagu soo celceliyay ee uu ka hadlay Ra'iisal wasaare ku xigeenkeni hore ereyga (Caariyo) iyo Xildhibanki kale ee ka hadlay ereygaas hadduu kugu cusub yahay waa la yaqaana waana muctaraf.

- waxa la yiraahda ereygaas caaryada doonfuul tabal caaro ma ahan doonfuul ayaa la yiraahdaa, maxa jira dhulka markaan tusaale ku siiyo dhulaa leedahay adiga shaqsiyan, milkiyad leh aad awood u heynin tacbashadeeda ee kaa banaan waxa ku imaanayo ruux awoodi kara wuu kula soo xariira; hasa yeeshe, waxa leedahy dhulkan adiga milkiyadeeda ma lahid iska tacmo xilliga meesha ay wax ka soo baxan oo kale doonfur ayaa laga qaada oo xilli waliba oo wax ka dhiibaayo, marka doonfuul aya la yiraahda haddii ereyga caaryo uu fahmi waaye Ra'iisal wasaare ku xigeenkeni hore ee Soomaaliya Mahdi Guuled taas ku sharxaa.

- **Qodobka 42(6):** Dawlad Goboleedyada waxay diyaarinaayan siyaasad dhuleed waa sax, laakin waxa xooga diiddanahay in la yiraahdo, heerkooda in meesha laga bixiyo ayaan rabaa waxay diyaarinaayan siyaasad dhuleed ee ka horimaaneynin in la yiraahdo. Macnaha heerkooda ayaan raba in laga bixiyo meesha, macnaha heerka hoos ayuu noqonaa; laakiin, ayaga iney diyaariyan barkee dhulka intiisa badan waxa gacanta ku haayo ee ku yaalan waa dowlad gobaleedyada ee ma ahan dowladda dhaxe ee Federaalka ah, saas darted heerkooda in la yiraahdo oo hoos loo dhigo ayaan diidanahay; oo waxan rabaa in la yiraahdo waa inee siyaasadda dhulka diyaariyan haddii uusan ka hor imaaneynin xeerka qaranka ee Dowladda.

- **Qodobka 43(1):** Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka Waxaa jiraya Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo heer Qaran, in lagu daro asigana heer dowlad gobaleed aan lakala reebin, kaasoo uu xeer ku soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobka 43(2)**: Xilalka iyo waajibaadka guddiga A iyo C: ka talo bixinta nidaamka diwaangelinta warqadaha milkiyadaha dhulka laga diiwaangelinayo, markuu leeyahay qodobkaasina waa sax wa in asigana la helaa dad arintaasi sharciyeenteeda iyo diiwangalinteeda iyo u xilsaarideeda si caadil ah u maamulaayo una diiwan galinaayo oo caddaalo daro halkaasi ka imaaneynin.

- **Qodobka 44aad :**Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka. Farqadiisa A: Min hal xubin oo matalaya Dawlad Goboleed walba C: Shan. xubnood oo ka imaanaya Dawladda Federaalka. Meeshas waxa ku jira in xaquuq lagu luminaayo, waxa jiro waan dareensanahay haddii maanta la yiraahdo min hal xubin halaga keeno Dawlad Goboleed cidda ka imeeneyso: oo laka keenayo 5 xubnood oo halkaan ka imaaneyso waa la garanaaya. Waxaa meesha ka baxaayo oo aan lagu soo dareynin sida beesha shanaad oo kale qaasatan waliba jareer weyne waxaa saas u leeyahay qodobka 72aad ee Dastuurka Federaalka ee ku meel gaarka ah xarafkiisa C, waxuu dhigayaa in xubnaha Aqalka Sare laga soo dooranaayo shanta beeleed ee beesha shanaad ee ka imaadan. Shan xubnood lagama haayo Aqalka sare waxaa laga haaya hal xubin inee beesha shanaad kaga jirto caddaalad ma ahan waana ku maasanyahay taas waliba waxay ka timid dowlad gobaladka Hirshabeele Cali Guudlaawe qeer Alle ha siiyo laakin ilaa hada ma heyno dowlad goboleedka oo ku soo daray marka waxan lee yahay meeshas waa in dib loogu noqdaa.

- **Qodobka 47aad: Deegaanka Farqadiisa 3aad**: Dawladda Federaalka iyo Dawlad goboleedyadu waa in ay Ilaalinayaan nidaamka ka faa'ideysiga dhulku waa run labada Dowlada dhexe iyo Dawlad goboleedyadu waxaa loogu baahan yahay in ay Ilaalinayaan dhowraana Dhulka iyo Deeganka. meesha la leeyahay isla farqadan ee dhaheysa in laga ilaaliyo wasaqda iyo sunta waxa dhihi laha waxaa ka fiican in la yiraahdo awalba marka hore inaa lagu shubi Karin halkaas haddii la yiraahdo waa laga ilaalinaya wasaqda iyo suntan waxee noqoneeysa in marka hore la ogalaanayo oo mubaax tahay sidaa darteed ereygaas waxa ku baddalilaha in la yiraahdo: "Marka hore yaan lagu shubin wax dhibaaten kara oo wasaq keeni kara oo sun keeni kara waxa la yiraahdo deeganka."

13) **Xil. Mohamed Abdi Mohamed:**

Bismillaah. Guddoomiye aad ayaad u mahadsantahay xildhibaanada sharafta leh dhammaantiin waxaaan idinku salaamayaa salaanta islaamka salaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakatuhu. Salaan kaddib markaan doodda gudaha u galo. Cutubka 3aad oo waxaa laga hadlayaa, dhulka, hantida iyo deegaanka.

- **Qodobka 42(1)**, Waxey dhaheysaa, dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa wada jir u leh, shacabka jamhuuriyadda fadaraalka Soomaaliya. In qodobkaas lagu daro oo laguna xoojiyo, maadaama, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, asaga uu yahay, hay'adii sharci dajinta dalka, marka qodobkaas waxaan rabaa in lagu daro, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ayaa masuul uga ah.

- **Qodobka 42 (5):** Isla qodobkaas farqaddiisa (5) ayadana waxey dhaheysaa, dastuurka hadda naloo keenay, waxaa ku qoran, xukuumadda federaalka ayagoo la tashaneyso dowlad gobleedyadda iyo ciddii kale ay qoseeso, magaran karo cidda kale ay quseyso oo inta ayaga kusoo dareen, waxaan ugu baahannahay iney faahfaahin nooga bixiyaan, qodobkaasi sidiisa micnaha waxaan soojeedin lahaa in lagu soo kordhiyo, waxaa qoran siyaasadda dhulka qaran, oo laga hormairyo maamulka dhulka, taasi, si joogta ah dib-ugeegis loogu sameynaayo, si loo xaqiijiyo, oo siyaasadda qaranka oo dhulka markii la dhisaayo. Waxaan rabaa iney qodobkaasi ay ayaga kusoo daraan, in markii ay soodiyaariyaan, barlaamaanka Jamhuuriyada Fdaraalka Soomaaliya la horkeenayo, asaga uu ansixiyo, maadaama baarlamaanka yahay, hey'ada ugu sarreeyo dalka sharci dajintoodana ay tahay.

- **Qodobka 42 (8):** Isla qodobkaas farqaddiisa(8) waxaa ku qoran , in maxaa la dhahaayay dowladda fadaraalka kaligeed ay fasixi karto dhulka, marka kaasina asaga waxaan soojeedinayaa, in lagu baddalo oo lagu kordhiyo, barlaamka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliyed ayaa fasixi karo, markaasina dowladda, ileen haddaba waad arakteen, inta badan, sida hadda la sheegaayay, oo badda Soomaaliyeed leysku heysto, shaqsiyaad qaar ah ayaa bixiyeen, marka maadaama ummadda Soomaaliyeed ayada masuul ka tahay baarlamaanka soomaaliyeed, waxaan soojeedin lahaa in farqadaasi lagu daro barlaamka jamhuuriyada fadaraalka Soomaaliyeed ayaa fasixikaro, oo meesha dowladda ku qoran tahay laga baddalo, oo lagu baddalo barlaamka jamhuuriyadda fadaraalka Soomaaliyed.

- **Qodobka 43aad:** Guddiga qaran oo madax banaan, '*totally'* aniga waxaan qabaa, guddi qaran oo madax banaan ayaa horta jira maba aaminsani, aniga waxaan soojeedinayaa, maadaama dowladihii hoose iyo maxaa la dhahaayay, wasaaraddii Howlaha Guud shaqooyinkoodii ayaaba waxaan arkaayaa in gacanta laga bixinaayo, maadaama wasaaradda intaas oo dhowr boqol ay joogaan, dowladdii hoose sidaas oo kale shaqaale ay joogaan, haddana la dhiso guddi qaran oo madax banaan, aniga waxaanba u arkaa iney '*totally'* qalad tahay.

- **Qodobka 44aad:** Waxaa ku qoran, xubnaha guddiga qaran badaxa banaan dhulka, waxaan sheegaya, guddiga qaran, min hal xubin waxey ka imaanayaan maamul gobleedyada, hal xubin waxey ka imaaneysaa gobolka Banaadir, shan xubinna waxey ka imaaneysaa dowladda federaalka, haddii la dhaho ilaaba wa ilaa malaga maarmo, in guddi qoran la dhiso, waxaan soojeedin lahaa nimaadkii Soomaalida wiligeed wax ku qeyb saneysay, oo ahaay, 4.5, sida hadda xildhibaan inta iiga horreeyay asaga ka sheegaayay, in beelaha qaar xataa aan kasoo ka dhaxmuuqan karin, maadaama haddii la dhaho maamul gobleed, marka sidaa daraadeed waxaan soojeedin lahaa, nidaamkii Soomaalida wax ku wada qeyb sanaysay oo ahaay 4.5 in lagu qeybiyo, taas ayaa maxaa la dhahaayay noobannaan.

- **Qodobka 45(2)** :Xubnaha guddiga qaran oo madax banaan ee dhulka waxaa soojeedinaya golaha, ee '*totally'* waxaan qabaa ayadana, in laga saaro, maadaama oo looga soo hadlay qodobka 43aad farqadda ay ayada mataleyso.

- **Qodobka 46aad :**Kheyraadka dabiiciga ah, jamhuuriyada federaalka waa hanti qaran, oo waxaa looga faa'iideysan karaa, si waraa oo. '*totally'* kanna waxaan qabaa, in sidii sii loo dhaafo, waxey meesha kasaareysaa, maadaama maamul gobleedyada iyo dowladda federaalka wada xaajood ayay ka galayaan, wada xaajoogkii ayay meesha ka saareysaa, saa

daraadeed waxaan soojeedin lahaa sidii sii hore in loo dhaafo. Aad ayaad u mahadsan tihiin asalaamu caleykum.

14) **Xil. Sahro Abdullahi Igal:**

Salama Caleykum. Guddomiyaha iyo xildhibaanada sharafta leh waa salaamantahin. Marka hore waxan raba inaa u mahad celiyo, guddiga Labada aqal iyo guddiga madaxabannaan ee runtii waqti badan galiyay, inay ka soo shaqeeyan dastuurka sida ay usoo shaqeeyen oo waqti badan u galiyeen waa ku mahadsan yahiin. Waxaan ka rabnaa haddana erey bixinta iyo toosintii, waxii lagu daray inay sida ay shaqada usoo galiyeen haddana xildhibaannada u tixgaliyan oo ay uga soo tiran waxii laga tiray iyo wixii la toosiyayna la toosiyo.

- **Qodobka 44aad:** Guddiga Qaranka Madaxa bannaan ee dhulku wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda: a) Min hal xubin oo matalaya dawlad Goboleed walba: Hal xubin oo matalaya gobolka Banaadir; iyo Shan xubnood oo ka imaanaya Dawladda Federaalka oo ayada soo magacaabeyso.

  Waxan halkan ka ansaxinnay habraac, habraacasna wuxuu qaatay waqti badan in la is qanciyo dadka Soomaaliyed ee deggan dhulka Soomaaliya, in loo caddaalad falo ayan in muddo ka soo shaqeyneynay. Waxaan umaleeynaya habraaci waxaan heysanay, shan bilaad ka badan intaas waxa loo heystay in la is qanciyo qofkasto oo Soomaali ah iyo qofkasto oo matalaad ku leh Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya inuu ka helo caddaalad, halkan waxa arkayaa habraaci waxaa ku qornaa maamulka SCC Khaatumo waa la isku soo raacay labada aqal ee barlamaanka ayaa gacanta u taagay, inee yahiin maamul ku meel gaar ah, waxa cajiib ah la ga soo reebay markii la keenay dastuurki! Sababta ay ku dhacday waxan weydiinaya labada guddi oo ka soo shaqeysay.

  Waxaan ergo uga ahay barlamaanka Soomaaliya u hor fadhiyo aysan caddaalad aheen maamul la ogayahay, inu ku meel gaar yahay oo dowalada iyadu ogalaatay, oo ku casuuntahay Soomaaliya caasimadiisa magaalada Muqdisho la qaabilay, lagu daray habraaci in dastuurki laga soo reebay. Maarkaas ummadda Soomaaliyeed ma wada lahan weeye haddii gobaladii qaar laga soo tagay, waxaan si xushmad leh ugu codsaneynaa guddiga, in ay ku soo daraan maamulka SCC Khaatumo xubnahan ka maqan.

- **Qodobka 45aad**: Xildhibaanno dhowr ah ayaa ka hadlay in ay aad u adagtahay xubnaha la magacaabaayo, in 40 sano Madaxweyne iyo Ra'isal wasaare la gaarsiyo sidaa ognahay, xubnaha labada aqal daddooda waa 25sano marka caddaalad ma ahan guddi la magacabayo, in la yiraahdo waa 40 jir anagoo og in dhallinyarada Soomaaliyeed la yiraahdo 70% dalka ka yihiin, shaqo ma heystan, meelkasto ay ku dhibaateysan yahiin, in haddana loo diido shaqada ay xaqa u la haayeen oo ka shaqeyn lahaayeen suura gal ma ahan in 40 sano xubinta la gaarsiiyo.

- In uu haysto shahaado jaamacadeed dhiba ma leh dhallinyarada inta badan wey heystan shahaado jaamacadeed. Dhibba ma leh dhalinyaradu inta badan way haystaan, laakiin xarafka "d" ayaa haddana wuxuu sii leeyahay,

- in uu leeyahay ugu yaraan 15 sano waaya-aragnimo sax ma ahan 25sano jirka Soomaaliyeed aan ognahay, in dalka Soomaaliya jooga wax bartay aan shaqada heysan ey maskaxdiisa

buuxdo oo careysan, oo hadhooti la leeyahay markuu galo ururradda argagaxisada maxaa ugasahay? Maxaa ka doontay? Ey maalin walbo dhibaato geysanaayan, markee wax soo barteen oo bananka soo istaagen, waalidka uu galiyay qarash in la yiraahdo sano waaya-aragnimo aan u baahannahay! Walaalay, waalidka Soomaaliyeed lacag kama bixinno dowaladda Soomaaliyeed ka bixiso. Labada aqal ee Fedearlka ka bixiyan, caafimad ma siiyan shacabka Soomaaliyeed waxba kama bixinno, xitaa amnigooda ma sugno anagoo sidaas ah, ardayga Soomaaliyeed soo saaren oo 20sano waxbarasho ka soo bixinaayen, in markuu soo qalan jibiyo oo bananka soo istaago la dhaho xaq uma lahid inaa qabato shaqooyinka qaar oo 40sano la gaarsiiyo dadka wax qaribo waa 40sano iyo waxii ka weyn, guddiga waxaan ka codsnaya in arikaas indha fiican ku eego, labada aqal xildhibaanno badan aya ka hadlay 15sano oo qibrada ah iyo 40 da'da ah waxaan jeclaanlahaa in laga soo tiro. Waa masantahiin.

**Taariikh:** Maarso 9, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 23aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeysa |
| Guntanka: | Dhammeystirka Ajendaha Kulanka 22aad. |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:30 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 12:39 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe" |

**Ajendaha:**
(4) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(5) Ansaxinta Ajendaha.
(6) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soojeedimaha Wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 3aad. Dulka, Hantida iyo Deegaanka (Qodobka 42aad Ilaa 47aad)

**Kulanka 23aad:**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka** Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe"**:** Bismillah Al-raxmani Al-raxim, xildhibaannada iyo senatarada aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin. Ajendaheenu waa kii hore u ansaxsanaa, markaa doodda hala bilaabo, Xoghayaha iyo habdhawrayaashu ha u yeereen, qoraalku meesha uu inoo joogay ha la sii wado.

1) **Sen. Deqa Hassan Hussein:**
Bismillah Al-raxmani Al-raxim, Guddoonka, senatarada, xildhibaannada, meediyaha iyo hawlwadeennada dhammaantiin Assalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu.

- **Qodobka 42(1):** Waxay leedahay sidan: **"**Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya", maaddaama faqradaasi ay ka hadlayso dhulkii, waxaan aniga soojeedin lahaa, in lagu daro faqrad kale oo dhulka dawladda ama danta guud iyo dhulka shacabka Soomaaliyeed ay leeyihiin, dhulkii macnaha la kala saaro "classification" loo baxsho.

- **Qodobka 42(3): "**Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya", waxaan iyadana soojeedinayaa, in faqradda 3aad ama 2aad laga dhigo, siiqad ahaan waxaan u qoray sidan: "Dhulka waa mid shibil ah iyo mid dan guud", in sidaas loo siiqaynayo in guddigu iyagu ka baaraandagaan.

- **Qodobka 42(5):** Xukuumadda Federaalku, iyadoo la tashaneysa dawalad goboleedyada iyo ciddii kale oo ay khuseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka qaran oo lagu hormarinayo; maamulka dhulka si joogto ahna dib-u-eegis loogu sameeyo, si loo xaqiijiyo: "Dhawrista iyo ilaalinta deegaanka ee u nugul waxyeellada saameeya isudheellitirnaanta xiriirka deegaanka iyo meelaha kale ay ku jirto danta guud; aniga

waxaan dhawritaanka macnihii dhowridda, in laga dhigo siiqadaa intaas in laga saxo qoraal ahaan. Dhawrista iyo ilaalinta deegaanka in laga dhigo.

- Waxaan ku soo kordhiyey faqradda (g) ah oo ah "ilaalinta dhulka danta guud" iyo faqrada (h) ah oo "ilaalinta dhulalka taariikhiga ah".

- **Qodobka 42(7): "**Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer", waxaan soojeedin lahaa guddiga sharafta leh, senatarada iyo xildhibaannada aan la wadaagayaa, in la kala jaro faqradda 7aad. "Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer" inay halkaas ku eegaato faqradaasi.

- **Faqrada 8aad :**Waayo, waa muhiim faqro 8aad laga dhigo: "ma jiri karo qayb ka mid ah dhulka, badda ama hawada dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo loo bixin karo fasax isticmaal joogta ah", in iyadana faqrad gaar ah laga dhigo oo faqro 8aad laga dhigo ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 42(8)** Oo sagaal ii noqonaysa "dawladda federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaal caariya ku haysasho ama heshiis kiro ah", horta caariya iyada laftigeeda in laga dhigo ku meelgaadh ayaan soojeedinayaa faqradaas, waxaan u qoray sidan: "Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaal caariya ku haysasho ama heshiis kiro ah, muddo aan ka badnayn midda xeerku cayimay". Xeerkana in la caddeeyo oo la yiraahdo ***xeerarka dhulka u dagsan ama xeerar dhulka Jamhuuriyada Federaalka***.

- **Qodobka 43aad:** Mudanayaasha sharafta leh, aniga waxay ila tahay, in meesha laga saaro **Guddiga Qaran ee Madaxbannaan ee Dhulka,** maaddaama ay jirtay hay'adda dhulbixinta qaranka ay jirtay in hay'addii lagu sameeyo "reform" loona qaabeeyo si federaal ah. Hay'addaas loo daayo hay'addii dhulbixinta ee jiri jirtay in iyadana loo daayo oo qodobkaas dhan meesha laga saaro.

- **Qodobka 46(2):** "Waxaa xeer lagu dhisayaa hay'ado u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in kheyraadka dabiiciga ah looga faa'iideysto si aan badda iyo berriga dhulka wax u dhimayn oo waxyeellana ka ilaalinaysa hantida dabiiciga ah", hay'adahaas waa la sheegay; laakiin, aniga waxaan soojeedinayaa maaddaama hay'adahaas u tilmaamayo dastuurku uu yahay hay'adaha cusub ee la samayn doono Hay'adda Macdanta; Hay'adda Biyaha; iyo Hay'adda Betroolka, intaba waxaa jira wasaarado ku shaqo leh si ayna "overlap" u dhicin anigu waxaan soojeedinlahaa, in loo daayo wasaaradihii xaq u lahaa inay ka shaqeeyaan arrimahaas.

- **Qodobka 47(3):** "Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadu waa in ay: "Ilaalinayaan nidaamka ka faa'iideysiga dhulka", waxaan soojeedinayaa in siiqada intan laga saaro. In ay Ilaalinayaan nidaamka ka faa'iideysiga dhulka waxa u dhimayn, isticmaalka, meeshaas intaas in laga saaro oo laga dhigo "Ilaalinayaan nidaamka ka faa'iideysiga dhulka, maaraynta, dhawrista deegaanka iyo hantida kheyraadka dabiiciga ah". In intaas laga saaro waxa u dhimayn, isticmaalka in intaas laga saaro faqradan ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 47(3) (d):** "Ilaaliyaan ugaarta, isirhayeenka iyo nafleyda kala nooca duwan", qaabka ay qorantahay aniga waa siiqayn ayey u baahantahay. Waxaan ka dhigay, "inay ilaaliyaan ugaarta noocyada nafleyda ee kala duwan", in laga dhigo oo siiqada la saxo iyo kuwa sii dabar go'aaya, isirhaynta meesheeda ah iyo kuwa sii dabar go'aaya in laga dhigo.

- **Qodobka 47(3) (g):** "Inay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dib-unoolaynta, dib-udhiraynta, kor-uqaadidda, ilaalinta degaanka, ka hortagga wixii waxyeellayn kara kheyraadka dabiiciga", maaddaama qodobkan aan ka hadlayno uu ahaa deegaanka, kheyraadka dabiiciga ah in laga saaro oo lagu daayo in ay qaadaan tallaabooyin lagama maarmaanka u ah dib-unoolaynta, dib-udhiraynta, kor-uqaadidda, ilaalinta degaanka, ka hortagga wixii waxyeellayn kara deegaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya in laga dhigo intaa.

- **Qodobka 47(4):** Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedka hadba ay saameeynta waxyeelada deegaanku gaartey waa in ay:
    - Qaadaan tallaabooyin degdeg ah oo lagu dhaqangalinayo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah, kaas kaliya waxaan ka saxay u saa'id ah ayaan ka saaray.
    - Waa inay soojeediyaan xeer oo ay xeeriyaan tallaabooyin degdeg ah oo lagama maarmaanka u ah ka hortagga wasakh ku daadinta iyo ku xabaalidda dalka, taasoo ah xeer jebin xeerka dalka iyo ku xadgudub, meeshaas waxaad u malaysaa inuu qoraalku khaldanyahay, xeerka dalka iyo ku xadgudubka gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Markaa waxaan anigu soojeedinayaa mudanayaal, in siiqadaa wax laga beddelo oo ah soojeedinta xeer oo ay xeeriyaan tallaabooyin degdeg ah oo lagama maarmaanka u ah ka hortagga wasakh ku daadinta iyo ku xabaalidda dalka, taasoo ah xeer jebin iyo ku xadgudub kaliya in laga dhigo, oo laga tiro inta gudaha ku jirta xeerka dalka.

Aad ayaad u mahadsantihiin Salaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu.

**2) Xil. Shariif Mohamed Abdalla:**

Mahadsanid Guddoomiye, Guddoonka iyo Golaha iyo inta joogta oo dhan Salaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu.

Cutubka inkastoo oo uu gaabanyahay, haddana waxaa uu leeyahay ahmiyad wayn markaan ka hadlayno dhulka, waxaa lagu tacriifiyaa mararka qaar **الارض الله** waxa kaleeto oo la yidhaahdaa **احياها من من الأول** waxa kale oo aan dhahnaa dhulka dawladda leh, ciddii siisa ayaa leh, markaa faqrada 1aad oo lagu soo kordhiyey oo u dhigan:

- **Qodobka 42 (1):** "Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya", waxaan u dhigi lahaa wadajirka ayaan ka dhaafi lahaa, "waxaa leh shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana u maamulaysa dawladda", qodobkaas intaas ayaan ku dari lahaa.

- **Qodobka 42(4):** Ayadana waxyaabaha la soo kordhiyey ka mid ah isla qodobkan qoraalkeeda ayaan wax ka toosinayaa, haddiiba ay ii suurtogasho, waxay hadda u qorantahay: "Dhulka waxaa lagu haysan karaa, loo adeegsanayaa, loona maamulayaa si

caddaalad ah oo u agaasiman wax soo saarid uu dhulku xammili karo", waxaan dhihi lahaa meeshaa wax soo saarid eray ayaan ku kordhin lahaa "iyo manaafacaadsi ku faa'iideysi", baan dhihi lahaa "uu" da ayaan tiri lahaa dhulkuna uu xammili karo.

- **Qodobka 42(5):** Dastuurkii horena ka ahayd 3aad, toosin baan ku samayn lahaa, hadda waxay u qorantahay: "Xukuumadda Federaalku, iyadoo la tashaneysa dawalad goboleedyada iyo ciddii kale oo ay khuseyso", waxaan dhihi lahaa ciddii kale ee ay khuseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka ee qaran, waxaan dhihi lahaa siyaasadda qaran ee lagu horumarinayo maamulka dhulka, waxaan tiri lahaa qaranka iyo dhulka ayaan soo kala hormarin lahaa markaa taasna sidaas baan dhihi lahaa, si joogto ahna ma dhihi lahayn, waxaan dhihi lahaa si markasta loo baahdo dib-u-eegis loogu sameeyo.

- Si joogta ah waxa weeyaan ma "yearly" baa ma shan sannaa, markaa waxa weeyi markii loo baahdo si markii loo baahdo dib-u-eegis loogu sameeyo, faqradda 5aad dhamaadkeeda. "dhawraarinta" waan iska qaatay maaddaama Dr. Mahdi inoo fasiray.

- **Qodobka 42(5) (e):** In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro, haddiiba khilaafaadka ku saabsan dhulka iyo milkiyadda, markaas "haddiibadaas" waa saa'id oo meesha kuma jirto.

- **Qodobka 42 (5) (f):** Waxba kama qabo, dhulka horta waa inoo qaybsanyahayoo. dhul deegaan, dhul warshadeed, dhul mashaariic, dhul daaqsin, dhul beereed waxyaalahaas oo kale ayuu u qaybsanyahay, markaa in la xadido in inta uu la ekaan karo dhulka qof ama shirkad ay milkiyad ahaan u yeelan karto, markaa wax weeyi mashaariicdii way kala duwanyihiin, warshadaha way kala baaxad waynyihiin, wax weeyi markaa daraasada ay la yimaadaan qoladaas shirkadahaas ayaa la xadidi karaa oo guud ahaan haddii la ogolyahay warshadii in dhul loo bixiyo, markaa waxay u baahantahay markaasaa la samayn karaa, xadidaad oo dastuuri ah in loo sameeyo ma qabo.

- **Qodobka 42 (5) (g):** Marka la joogo waxay u qorantahay "in la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka ganacsiga ee dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda milkiilayaasha dhulka yar" baa la yiri, markaa waxaan dhihi lahaa meeshaas in xeer lagu soo saaro nidaaminta dhaqdhaqaaqa ka ganacsiga dhulka, in xeer lagu soo saaro nidaaminta dhaqdhaqaaqa suuqa ka ganacsiga dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda milkiilayaasha dhulalka waa in la yidhaahdo dhulalka yar yar, dhulka yar kaliya ma aha, dhulalka yar yar weeya, sidaas filayaa inay ku haboontahay.

- **Qodobka 45(6):** "Dawlad Goboleedyada waxay dejinayaan siyaasad dhuleed oo heerkooda ah", waxay dejin karaan in la yidhaahdo, dajinayaanta oo hadaynan u baahan inaan lagu qasbin.

- **Qodobka 45(7**): "Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer", horta waxaa weeyaana dhulka midna waxa uu noqonayaa milkiyadda daa'im buu noqonayaa ama deegaan ha ahaado ama shirkad ha ahaato, wuxuu noqonayaa mid daa'im ah. Safaaradaha iyo shirkadaha macdanta qoda waxyaalo la mid ah ayaa muddada loo xadidi karaa.

- **Qodobka 45(8):** Waxaa ku qoran "isticmaal caariya ah", caariyada sida loo sheegay "doonfuur" baa loo isticmaali karaa. Caariya wax qaadmikara ayaa la yidhaahdaa, la caaryayn karaa, dalkeena wax weeyaan dadka beerlayda ah oo dhulka tacbada way yaqaanaa, laakiin qofkii raali ha iga ahaado Abdixakiin oo kale oo geela raaci jiray ma garan karo caariyada, markaa "doonfuur" eray bixinta meesha ugu dhow baa laga qaadanayaa, taasna sidaas baan nidhi lahaa. Waxa weeyaan meel ay ku qorantahay cayiman, "heerka ku cayiman" waxaan dhihi lahaa "ku cayimay", midda heerka cayiman ayaa ku qoran ku cayimay in la yidhaahdo.

- **Qodobka 43aad:** Anigu guud ahaan waxaan u arkayaa in sideedaba la iska dhaafo. Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka in la yidhaahdo "Guddiga Qaran Madaxbannaan ee Dhulka" la yidhaahdo oo **ka-da** laga dhaafo ay mudantahay, hadda waa isdaba marsanyahay, laakiin aniga guud ahaan waxaan qabaa qodobkaas in dalkii oo dhan aan laga dhigin guddiyo madaxbannaan la iska dhaafo ayaan qabaa. Waad mahadsantahay.

3) **Sen. Abdihakim Moallim Ahmed:**

Mudane Guddoomiye xildhibaannada sharafta leh dhammaantiin waan idin salaamayaa Salaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu.

- **Qodobka 42(3): W**axaa loo dhigay: "Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah ee Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya", aniga waxaan rabay hal "mulaaxad" oo guud in aan ka sheego oo aan isleeyahay guud ahaan dastuurka oo dhan ayay sameen ku leedahay, waa laga yaabaa in ay khaldan tahay; laakiin, aragtidayda weeyaan.

  Dastuurka wax xeer ah ama sharci ah oo ka sarreeya oo uu marjic ka dhiganaayo, majiro marka laga reebbo shareecada islaamka oo uu dastuurka ku xiranyahay oo marjic u ah, Xeerarka kale oo dhan dastuurka ayay ku xiranyahiin iyaga dastuurka ayaa xiganaya; laakiin, dastuurka shuruuc farac ah oo hoos laga sameeyay ma xigto meel walabana waxaa lagu qoray dastuurka ayaa waxaa lagu xirayaa shuruuc farci ah oo dalka loo sameyn doono ama la sameeyay.

  Marka aniga waxaan qabaa horta, in aan dastuurku cidda kaliya oo uu xigan karo oo marjica u ah waa shareecada, haddii ay jirto meel u baahan in shareecada lagu xiro haa, laakiin, shuruuc kale oo la sameyn kara dastuurka marjic uma noqon karaan, marka halaga dhaafo ayaan dhihi lahaa, meelaha ay arrintaasi kusoo aroorta oo dhan oo ay kamid tahay faqradan aan ka hadlayo oo aan dul taaganahay.

- **Qodobka 42(4):** Xoogaa hadal ahaan uma dhaliilsani ama jumlo ahaan; laakiin, "tacbiirka" kalimaadka qaar oo lagu qoray ayaan waxyar, "mathalan" waxaa layiri oo uu dhulku xamili karo, aniga xamilaadda asal keeda wa "taxamul" waa kalimo carabiya macneheeda marka lafiiriyana waa sabir iyo dulqaad marka dhulka dulqaad lagama rabo, kalimaadka aan ku qorayno sharciga dhexdiisa waxaa fiican in ay noqdaan kalimaad macnohooda si fudud loo fahmi karo, haddii marka laga wado xamilaadaas aniga waxaan ku beddeli lahaa saan u fahmay hadday tahay la yiraahdo oo kale "uu dhuku qaadi karo, xambaari karo" kalimaad soomaali ah oo macno ahaan uga dhaw xamili karoda uga dhow, xamili karo xoogaa waxay ila tahay adeygtahay.

- **Qodobka 42(5) (A):** Kalimaaddaas waxaan u malaynayaa wa un soomaaliga sixiddiisa waxaa layiri dhawraarinta iyo ilaalinta aya layiri, marka dhawrarinta dhawrista in looga jeedo ayaan is dhahay ama kalmad lamid ah marka in ilaalinta loo dhaafo ama "dhawraarinta" "dhowris" lagu bedelo kalimo ahaan iyo luuqad ahaan loo saxo ayaan codsanayaa, waxaa kaloo halkan xildhibaanno badan na sheegeen ana aan codkeyga ku darayaa faqrada 5aad waxaa hoos imaanaya xarafka (a,b,c,d,e iyo f), marka in loo beddelo afka soomaaliga oo laga dhigo (B,T) laga dhigo wax "maanica" ah ma jiraan oo noo diidaya in aan af keenna ku istcmaalno, marka in halkaana laga dhigi afka Soomaaliga ayaan codsanayaa.

- Waxaa kale oo jira isla Qodobka **42(5)(a):** ayaan rabaa in aan akhriyo sida uu u qoran yahay, "dhawrnaanta iyo ilaalinta deegaaneed ee dhulka u nugul waxyeelada saameeya isu dheelli tirnaanta xirrirka deegaanka iyo meelaha kale ee ay kujirto danta guud", anigu 10 jeer ayaan ku celshoo waan fahmi waayay macnaha loola jeedo; way igu adkaatay malaha dad badan oo kalena way ku adkaan doontaa, waxaa isleeyahay soomaali ahaan waxay u baahantahay "tanqiiq" iyo in si fiican loo qeexo ayay u baahantahay macnaha lagala jeedo, xitaa haddii, aan u sixi lahaa ama aan faqro la mid ah qori lahaa iyada macnaheedaan fahmi waayay, marka inaad qoraalkeeda dib ugu laabataan oo la saxo danta laga leeyahayna la caddeeyo ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 42(8):** Waxaa la yiri Dawlada Federaalka oo kaliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaal caariya ku ah, aniga kalmada "caariya" sida uu horta sheegayay hadda Shariifka siduu sheegayey xildhibaanka runtii dee waligay ma maqlin kalimada uu sheegay, malaha waxaa laga yabaa beeraleynimada in ay asal katahay waligay maanta iigu horaysa iyo shalay inta ay xildhibaannadu ka hadlayeen, tan meesha ku qoran waxbaa lakala caariyaystaa baan maqli jirnay, qofkani in uu qof wax ka qaato isla wixii usoocelinaayo caariyaa la yiraahdaa, tabalcaaro oo kale ayaan maqli jirnay marka taa in laga wado ayay ila tahay, marka kalimadii lagu qoroba waa munaasib, waxaan uga jeedaa aniga muddo aan kabadnayn midda xeerku cayimay waana haddii, heshiiskaas dan guud ku jirto, muddo aan kabadnayn midda xeerka ku cayiman ayaaa layiri yaawaaye, xeerkee waaye xeerka halka la leeyahay muddo aan kabadnayn buu xeerku cayimay xeerkee laga hadlayaa?

  Waxaa isleeyahay meeshaa jumaladaa halaga saaro ma cadda xeerkaas, lama sheegin waana tii aan hadda ka hadlaynay xeerar la daliishanayoo oo dastuurkii ka sarreeyo ma jiraan. Taasna intaas ka dhihi rabay. Saacadayda waan hayaa oo waan la socdaa, akhiyaarta idinkoo mahadsan aad buu wakhtiga ii racdaynayaa.

- **Qodobka 43aad:** Waxaa jira guddi qaran madaxbanaan, guddiga qaran ee madaxabanaan oo laga hadlayo dhulka, anigu waxaan dhihi lahaa magaciisa in la yiraahdo "Guddiga Madaxabanaan ee Dhulka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya" sida uu hadda uu u qoran yahay in laga beddelo.

- Isla **faqradda 1aad:** Waxaa la yiri, waxaa jira guddiga qaranka madaxabanaan ee dhulka heer qaran ah isaga oo uu xeer ku soo saarayo Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, xogaa sheeko sheeko ayuu u egyahay markuu meesha ku qoran yahay, markaa aniga waxaan u beddelay oo aan dhihi lahaa halaga dhigo "Sharci uu xeeriyo Baarlamaanka Federaalka Jamuuriyadda Soomaaliya labdiisa aqal, ayaa lagu dhisayaa guddiga

madaxabanaan ee dhulka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya". Sidaa in laga dhigo sida uu kuqoranyahay laga beddelo, numbarada meesha ku qoran ee (A,B,C) da ah ayadana in la saxo.

Waxaan rabaa guddiga laftiisa in aan kalimaad ka iraahdo, horta anigu marka sixitaanka laga soo tago, waxaan qabaa sida uu yahay in wax macfaco ah ku leyhayn sababtu waa maxay? guddigaan shaqadiisa oo dhan waa "istishaari" waa guddi latalineed ee guddi fulineed ma aha, marka haddii shaqada uu qabanaayaba latalin ay tahay, latalin hay'adaha dawladda oo dhan baa sameysan kara qof baa la samaysankaraa "group" baa la sameysan karaa, shaqo latalineed in guddi madaxbannaan laga dhigo shaqadiisa iyo "wadiifada" uu gudanaayo oo dhan ay tahay latalin, waxaad mooddaa in aysan munaasab ahayn, marka waxaan rabaa guddiga shaqadiisa labo mid in laga dhigo; in meesha dhan laga saaro iyo in laga dhigo gugddi shaqadiisu shaqo fulineed ay tahay oo waajib uu filinaayo sida inay noqoto waa dariiqo in hay'adihii dawladda oo kalena loo dhaafo waa shaqo.

Wakhtigaa aad inoo guraya waxaan ku soo aruurinayaa, runtii wixi oo dhan waan ka tagaybaa sida muuqata.

- **Qodobka 44aad:** Haddii dawlad goboleed kasta soo dirsanayo xubin halkan waxaa la qoran; Guddiga Qaran Madaxabanaan ee Dhulka, wuxuu ka koobanyahay xubnahan soosocda: marka waxaa layiri dawlad goboleed walba hal xubin ayuu la imaanayaa haddana isla sharcigaan waxaa lagu dhex sheegan in dawlad goboleedkuna yeelan doono guddi, marka haddii uu dawlad goboleedku guddi yeelanayo, maxaa guddiga heer federaalna xubihiisu u noqonayaan "share" oo loo wada "share" gareynayaa?

  Guddiga heer Federaalna gaarkiisa haloo dhiso dawlad goboleedyadana dowlada, goboleed walba guddigiisa ha dhiso "then" ha kuxirnaadeen "Board" kaas guddigaas wada shaqeyn tooda ha ahaato sidaas ayaan soojeedin lahaa.

- Shuruudaha xubin nimada gudigaan mesha 40sano waxaan dhihi lahaa 30sano halaga dhigo.

- Hal meel ayaan kusoo gabaggabeynayaa, haddii uu wakhtigu dhammaaday waan ogolahay, guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga, aniga halkan qodobka faqradda cusub ee lagu soo daray oo la yiri heshiiska Baydhabo ayay ku jirtaa sida ay u qorantahay, waxay ka hor imanaysaa sharci kaleeto oo dalka ah waxay ka hor imaanaysaa "public finance management" ama "PFM" sharciga la yiraahdo waxay ka hor imanaysaa, Wasaaradda Maaliyadda iyo qaabka dakhliga loo aruuriyo oo dalku wuxuu leeyahay "single treachery account" hal khasnad ayaan leenahay khasnadda midaysan ayaan leenahay, marka khasnadii midaysnayd oo uu dalku lahaa ayay ka hor imaanaysaa cidkale oo dakhli aruurin mas'uuliyad ka saarantahay iyo "tawsiicinteeda" majirto.

  Marka guddigaan sida uu uqoranyahay waxaan codsanayaa in wax laga beddelo. Waan ka xumahay waxbadan baa ii qoran, halkaas ayaan ku soo koobayaa. Adigoo raali ah, guddiga waxaan ka codsanlahaa qoraalka marka la sameynayo meelaha qaar macnihi baa dhumaya marka "coma (,)" da iyo iyo "full stop(.)" idinkoo aad ugu mahadsan sida aad u soodiyaariseen, yaan laga tagin calaamadaha hadlka kala xadaynaya, oo mararka

qaar naga khaldaya macnihii. Runtii waxbadan baa ii sii dhinaa, laakiin, wakhtigu nooma saamixin, aad ayaad u mahadsantihiin.

4) **Xil. Saredo Mohamed Abdalla:**
Guddoonka waan salaamayaa, wax ma reebin sentorka; laakiin, waxyar ayaan ku darayaa dhulka ayaan ka hadlayaa, sentorka ayaa asiibay arrimaha dhulka, dhulka hantida iyo deegaanka.

- **Qodobka 42aad:** Dhulka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhulka waa kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka.

  Seddex dhulka waxaa lagu heysan karaa laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah, xeerarka dhaqangalka ah waa kuwee intay ku qoran yihiin? Dhulka sax waaye shacabka waa wada leeyahay; lakiin, ninba meel ayuu awowgiis markii hore dajiyay; kow shacabkana waxaa ka dhexeeya kheyraadka dalka; laakiin, dad aad u yar oo dhul aad u weyn haysta oo dhul lee ku mashquula ayaa nahay, waxaan hadda lagu soo daray, waxaa qabaa in laga joojiyo sentorka ayaa ba sheegay. Dhulna Allah wa nasiiyay dhul leen ku waalanay xeerarkaas ma qeexna dastuurka sida uu qoraayayna ma fiirinin aniga; laakiin, waxyaabo badan oo khalad ah ayaa ku jira.

  Guddiga 9 qof ayaa lagu soo koobay. Guddiga in uu 10 ahaado waaye, soojeedintayada aniga "because", maalin Alle keenay anaga yaan dhegaha iska gumaysanine aan 10 ka dhigno. Teeda 2aad dhulka shacabka waa wada leeyahay waa isla dagi karaa; laakiin, ninba meel buu ka dagay, markii hore dad ayaaba dawladda kale ku darsaday waddamada G8 ka ayaan haddaan rabno ku darsanaynaa dhulkaan waaba nalagu dhibay.

  Waxaan u faahfaahinaayo waxaa waaye dhulka intuu noo taaganyahay "fed up" aan ka taaganahay maaha; laakiin, anagoo intan oo dhul ah qabno "MCH" yada in aan guryaha ka dhigno, shalay waxaan u jeeday "MCH" xildhibaanno ka hadlayaan xeryihii dawladda, meelkasta oo dawladda lahayd, meel kasta oo lagu ganacsanaayay, dhulkaan "fed up" ayaan ka taaganahay wax saan looga hadlaayo ma ahee guddi baarlamaani ah oo wadajir ah inta loo saaro dhulka dawladda.

  Aaway guddigii dhulka noo qaabilsanaa? Guddi ma qabno miyaa Baarlamaanka, waxaan wiilkaan soo qorqoraayo inta la iska daayo mar hore ayaan idin sheegee dastuurka qoraayo wexey leyihiin iyo siiqooyinkoodee, aaway guddi baarlamaani ah oo isku dhaf ah culimo iyo "lawyer-ro" iyo xeel dheereyaal intaan isku darno waxaan meel aan dhignee walaalayaaalow, dhulki caasimadda eber waaye, shalay waxaan ujeeday xildhibaanno baarlamaanka kamid ah oo "MCH" dadka lagu daweynaayo dhagax lagu dagsaday ka hadlaayo.

  Wallaahi oo Bilaahi oo Talaahi, madax-xanuunki aan ka qaaday xalay waan seexan waayay "MCH" yada, iskuullada iyo xeryaha dawladda waxa loo sameeyay in dan guud lagu fuliyo waaye, guri lama waynin qofkii guri rabo duurku ka dhisan karaa, aniga haddii aan guri rabo banaanka daafeed ayaan ka dhisan karaa ma aha in aan "MCH" guri ka dhigto! Walaalayaalow, haddii aan rabo in aan dawlad noqono oo aan rabno maalin walba anagoo 63 sano xor ah aan isku qabqabsano dhul ceeb waaye.

Dawladda dhulka xeerarkiisa waa la dhisayaa, dawladda hoosa dhul goysa dadka dhulka ka ganacsanaayo waa in ay joojiyaan ka ganacsiga dhulka ganacsiga xorta ah ee dhulka waa in la joojiyaa. Dawladda dhulka waa in ay xakamaysaa minishiibiyaa dhulka cabiri jirtee xeerkeedii hore lagu celiyaa, dhulkaan qof walbaba ku dhaganyahay ha la iska sii daayo. Allah halaga cabsado qofwalba 2mitir ayuu dhulka ku leeyehee beer aa lagalaa, xeraa lagalaa, iskuul lagalaa! Waxaan iskadaaya Allah ka cabsada, haddii la hadlana waxaa la leeyahay ree hebelow ayaa loo jeeday war reer hebelow ma ahee waligeen waan soo noolaan jirnee sidii loo noolaan jiray aan u noolaano.

War Gaalkacayo banaankeeda guri ka dhiso haddaad guri rabto; lakiin, "MCH" ka ha cabiranin iyo naagaha umulaha ah, cunug ayaa saan loo haayay naagna xaamilo ayay ahayd sariiraha korkooda ayaa dhagaxa lagu soodjiyay, nin ganacsada aha ma dhul ayuu waayay, war niyoow hadaad ganacsade tahay waxaad guri ka dhisataa Garoowe banankeed meel wayn waaye dhiso ee dalxiis ku tag markasta intaad diyaarad u qaadato, dhulkaan wax laga hadli kara ma aha.
Guddoomiye, dhulka waa in guddi isku dhaf ah gudiga dhulka lagu kabaa, dhulalka dalwada la soo "list" gareeyaa "MCH" yada meelihii nolosha dadweynaha, waxaas waye waxa loojeedo anigii 30sano aan beereheeni arkinin dib loo cabirto mana yeelayno mana yeeli doono, guddina loo mabaxin karo gudgigana waa 10 beel nus ah ma jirto, beel walba 10 ayaa ka imaanayso dawlad goboleedyadana waa in ay dhulka xakameeyaan waana kabaxay.

5) **Xil. Abdi Ibrahim Warsame:**
Bismillahi Raxmaan Raxiim, Mahadsanid Guddoomiye iyo xubnaha sharafta leh, waxaan rajaynaynaa haddii uu Alle idmo maalinta isniinta ah in aynu gudagali doono bishii barakaysneed ee Ramadaan, ilaahay cibaadaatka ha inoo aqbalo dambigeenana Alle haku dhaafo. Cutubka 3aad wuxuu ka koobanyahy dhulka, hantida iyo deegaanka.

- **Qodobka 42aad** :Waxaan la qabaa xildhibaannadii iga horreeyay faqradiisa 1aad, waxaa la sheegay in uu shacabku leeyahy, laakiin waa in la caddeeya cidda wakiilka uga ah, shacab baa iska yeelanaya war ma aha, ciddii uga wakiilka ahayd waa in lagu caddeeyo faqradan uuna leeyahy "waxaa ka wakiil ah dawladda federaalka Soomaaliya" iyo wixii kale ee lagu dari karo iyo waxyaabahaas oo kale, qodobkas waxaan ka qabaa faqradiiisa 1aad sidaas.

- Qodobada kale ee ka hadlaya xukuumadaha federaalka iyagoo la tashanaya dawlad goboleedyada iyo ciddii kale ay quseyso waxay dajinayaan siyaasadda dhulka qaranka oo markaa faqrada loo samaeeyay, waxaan la qabaa sentaor Samsam oo goobaha taariikhiga ah in iyaguna gaar loo xuso oo loo sameeyo maqaam gaar ah.

- **Qodobka 42aad:** Oo ka hadlaya dhulka iyo farqooyinkiisa khuseeya, waxaan qabaa in lagu daro " cid kasta oo ku xadgudubta in loo aqoonsado khaa'inul wadan" siiba dhinaca ajanabiga ah ayaan ka hadlayaa, maalin walba waxaa dhacda dhulkii iyo hantidii heshiisyo laga galo horay ayay u dhacday, xilligii hore waad ogaydeen badda Soomaaliya muran baa la galiyay, MoU baa lagu saxiixay dadkii saxiixay halkan ayay weli isku haystaan weli in ay yihiin dad mas'uul ah, hadda mid baa la saxiixay marka maalin walba inta dhul la saxiixo oo hantidii la saxiixo dadkii dambiyadaa galay, in aan waxba lagu

oogin oo ay noqdaan dad caadi ah oo haddana beri soo tartama war ma aha, annigu waxaan oran lahaa arrinta dhulkamxadgudubyada lagu samaynayo ama hantida ummadda Soomaaliyeed waa in dastuurka lagu caddeeyaa dadkaas in ay yihiin khaa'inul wadaniin ah oo lagula xisaabtamo.

- **Qodobka 44aad** : Waxaan la qabaa xildhibaanno oo yiri looma baahna, arrinta guddiyada hay'adana way u dhisanyihiin oo hay'ado badan oo dawladeed baa u dhisan oo ay Wasaaradda Hawlaha Guud ay kamid tahay, marka waxa aan leeyahy looma baahna, haddii laga maarmi waayo siiqada uu u qoronyahay xubnaha siiqada ay u qoranyihiin waa in laga baddalaa oo maamulada kale ee la aqoonsanyahay ee ay dawladdu aqoonsatahy oo ay ka mid tahay SSC Khaatuma, waa in lagu soo kordhiyaa; laakiin, waxaan qabaa in aan loo baahnayn gebi ahaanba isaga oo dhan oo hay'ado leeyihiin.

- **Qodobka 45aad:** Shuruudaha xubinnimada, in kasta oo aan anigu qabo guddigaba in aan loo baahanayn, haddana 15 sano oo khibrad ah waa ay badanatahy, 5 sano in lagu soo koobo ayaa ila habboon.

- **Qodobka 46aad:** Hay'adaha loo sameeyay anigu waxaan isleeyahay hay'adahaas looma baahno, inta badan hay'adaha la sameeyaa waxay noqdeen wax shaqo abuur ah ayay dalkeena ka noqdeen, marka wasaarado ayaan leenahay wasaaaradahaas in la ixtiraamo ama shaqadooda loo daayo ayaan qabaa.

- Iyadana waxaa ku jira qodobka 46(3) guddi looga hadlayo in uu qoondeeynayo dardargalinta dakhliga, taasba ma leh guddiyo kale ee wasaraadda maaliyadda ayaa leh, iyadana in loo dhaafo weeye. Siiqada lagu soo celceliyay haddii aad eegto xeerkeena sida uu u qoranyahy iyo sharcigan dastuurka uu u qoranyahay mar waxaa la isticmaalayaa, dawladda federaalka ah iyo dawlad goboleedyada, mar waxaa la siticmaalayaa dawladda iyo heerarkeeda, marna waxaa la siticmaalayaa iyada oo la cayimayo, marka waxaa fiicnaan lahayd maamulo cusub oo kale ayaa dhalan kara si kale ayuu wax isu beddeli karaa, in hal siiqad la isticmaalo oo ay noqota; dawladda federaalka ah, dowlad goboleedyada/maamulada kale ee ay dawladdu aqoonsantahay waa in siiqadan ay yeelataa, ama loo daayaa dawladda iyo heerarkeeda loo daayo ayaan qabaa oo taas la isticmaalo.

- Isla cutubkii in marna loo isticmaalo dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada marna loo isticmaalo dawladda federaalka iyo heerarkeeda marna lagu isticmaalo dawladda iyo dawladaha xubnaha ka ah, waa waxa marba jiho inoo dhigaya, marka aniga waxaan oran lahaa, hala yiraahdo dawladda federaalka ah + dowladaha ama maamulada xubnaha ka ah ereygaas haloo isticmaalo baan oran lahaa.

- **Isla qodobka 47(4)(a)**: Dawladda federaalka iyo dawlad goboledyada hadda labada qolo baa laga hadlay dawladda federaalka iyo dawlad goboledyada waa waxa aan hadda ka hadlayay, haddaba ay saameeyeen waxyelada deegaanka guba gaartin waa in ay qaadaa arrintaa, halkan wasakhaynta oo hore xildhibaanno badan uga hadleen, wasakhayntu iyaduna waa danbi kale marka hala nadiifiyo waxay sharciyeynaysaa wasakhaynta, marka waxa oran lahaa wasakhaynta hala mamnuuco hana laga dhigo

dambi, dabadedna hala nadiifiyo taana intaas baan kaga tagayaa. Aad iyo aad ba u mahadsantihiin.

6) **Xil. Omar Hanshi Ibrahim:**

Bismıllaah, een dhammaan asxaabta baarlamaanka, guddiyada iyo guddoonka waan idin salaamayaa. Bacda salaan, anigu wax wayn kuma soo kordhın rabi halkan, een waxyar inta aan toos u galin oo aan qodobbada dul ıstaagın. Waxa aan dhihi lahaa hadda ka horna mar ayaan meeshaan kayara sheegay ayaan umaleeynayaa, qoraalada uu ku qoranyahay dastuurka wuxuu u eegyahay in sida xeer ahaan loo soo qoray. Dastuurka iyo xeerarka halkan aynu ku meelmarinaynay ama sharuucdii baarlamaanka farqi wayn uma dhaxeeyo, marka in la fududeeyo oo si dastuur ahaan loo soo qoro oo qoraallada la soo yareeyo lana soo koobo ayaan marka hore soojeedin lahaa.

- Mıdda 2aad waxaan dhihi lahaa, hadda dhulka ayaa laga hadlay, dhulkana waa la sheegay waxaa waaye waa "fıxed Asset" sida uu qodabka ugu horeeya uu dhahayo ee dhulka "Dhamman dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" waa in lagu daraa in dawladuna mas'uul ka tahay, shacabkaa iska leh; laakiiin, dawladda mas'uul uga ah waa in la qeexaa. Sidoo kale waa in lagu daraa qodob oranaya: dhulka dowladda ay leedahay markii la bixiyo ama si ganacsi ahaan loo bixiyo, kiro hanoqoto ama hala iibiyo, waa in lagu badali karaa oo waa in dhul kale oo dawladdu leedahay meelkale waa in laga diyaarin karo, si dhulkaas marwalbo "Asset" waara oo yaala uu u unoqdo. Marka dhulalka dhan ee dawladdu ay leedahay marka la bixiyo oo wax baddal ahna uu jırin, waxaa imanaysa in dawladda Asset-keeda uu soo yaraanayo, marka taas iyaduna in la xuso way fiicnaan lahayd.

- Qodobka ka hadlaya Guddıga Qaran ee Madaxabannaan ee Dhulka ee **Qodobka 43aad**, een qodobkaa iyada ah horta anigu waan soo dhowaynayaa in guddı "National" ah inuu jıro "Natıonal Commussion" in uu jiro waa muhiim "because" dhulka "Land policy-ga" waa in uu ku jiraa qaabkii loo maamuli lahaa, qaabkı uu guddigaas u shaqeen lahaa iyo qaybaha uu ka koobnaan lahaa, intaas iyada ah waa laga wada hadli karaa; laakiin, horta in uu guddi jıraa waa arrin ay muhıım tahay.

  Een waddankana waa wadan federaal ah, markii guddi qaran ladhiso, kaddib ayaa maamul goboleedyada waxa ay ku yeelan karaan kaalinta maamullidda dhulkaas, waxaa ladhisi karaa heer federal sıda "co-ordınator" "Regıonal co-ordinators" oo maamulaayo, markaas "technical" ayay noqonayaan oo maamul goboleedku waxa ay noqonaayaan qaabka technical-ka ah, marka "land commission" ku waa qaranka.

- Qaabka uu ku imaanayo waxa uu ku imaanaya uun, in uu policy-gii siyaasadii ee uu ku shaqeen lahaa dhulka laguna maamuli lahaa in ay dajiyaan, waxa lasii qeexay qodobka 43aad (2) ilaa iyo dhammaan waxa lasii sheegay guddigaas iyo siduu u eekaan lahaa, ha noqoto khibradda iyo intuu ka koobnaan lahaay, waxaan dhihi lahaa aniga intaas looma baahna, in laga saaro, ilayn guddi qaran uunbaa la dhisayaa, hadhow xeerarkii uu guddigaas ku shaqayn lahaa gadaal ayaa laga keenayaa, Baarlamaanka ayaa dajin doona, intuu ka koobnaan doono, qaabka uu u shaqayn doono, khibradda uu lahaanayo iyo guddoonka madaxda ka noqonaayo meeqo sanno oo "experience" ah ayaa laga rabaa? Waxaas oo dhan aniga waxaan is dhihi lahaa gadaal ayaa laga samaynayaa.

Marka in halkan lagu qeexo oo faahfaahın badan Dastuurka lagu sameeyo macno badan ma samaynayso sida ay annigu ila tahay.

- **Qodobka 45aad:** Shuruudaha xubınnımada, oo wax yar aan hadda ka taabtay, taas waaye midaan sheegaayay, in meesha, muhiim ma ahan xubinnimada maaddaama la xusay in guddi qaran la dhisayo, Waxii kale guddigaa iyada ah maamuuskiisa hoose dib ayuu ka imaanayaa.

- **Qodobka 46(3):** Ee kheyraadka dabiiciga ah, guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargalinta ururinta dakhliga waa ın uu sugaa, in dakhliga ka yimaadaa hantida dabiiciga ah si caddaalad ahna u wadaagaan dawladda federaalka iyo dawladaha hoose ee Jamhuurıyadda, een dawladaha hoose ee Jamhuurıyadda marka la dhahayo dawlada federalka waa: "two levels of government", marka waxa ay u egtahay in la samaynayo "level" kale oo 3aad, marka waxaan dhihi lahaa meeshaas sida federaalka uun ha lagu reebo, oo ay noqoto heer federaal iyo heer maamul goboleed, marka mamul goboleedka asaa lagaraba in uu sii daadajiyo oo uu hoos sii aadiyo, marka waa "decentralize system", taasna level-kaan kale ee la samaynaayo, waa in meesha laga saaro. Anigu intaas ayaan ku soo koobayaa, waad mahadsantihiin.

**7) Sen. Mohamed Abdi Osman:**

Mahadsanid Guddoomiye, mudaneyaasha sharafta leh ee labada gole, marti sharafta, labada guddi, Guddiga dib-u-eegista iyo Guddiga madaxbanaan, media-ha kulligiin waxaan idiinku salaamayaa salaanta islaamka Sallaamu Caleykum Waraxmatullahi Wabarakaat.

**C**utubka 3aad waa: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka, intaas ayuu "cover" garaynayaa, runtii wuxuu leeyahay muhiimad aad iyo aad, muhiimad gaar ah ayuu leeyahay, halkan waxaan u jeednaa, waxa la idhi dhowr waxyaalood ayaa la soo dhigayoo guddiyadu ka koobanyihiin, dhismaha Guddiga Qaran ee Astaynta wakaaladaha, Guddiga u xilsaaran abaabulka iyo dardargelinta, guddiyadaasa runtii la soo qoray, anuu markaa waxaan isleeyahay.

- **Qodobka 42 (1):** Saaxiibaday intii iga horraysay ayaan la qabaa, dhammaan dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxa wadajir u leh shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dawladu wakiil uga tahay. Dawladda inaan laga tagin, saaxiibbo badan baa sheegay aniguna codkayga ayaan ku biirinayaa oon ku darayaa.

- **Qodobka 42 (5):** Xukuumada Federaalka iyadoo la tashanaysa dawlad goboleedyada iyo ciddii kale ee ay khusayso waxay dejinayaan siyaasad dhulka qaran oo lagu hormarinayo maamulka dhulka si joogto ah dib-u-eegisna lagu samaynayo si loo xaqiijiyo, halkaa siiqadu siday u dhigantahay waxaan rabay wax yar xoogaha in laga toosiyo oo ay u dhiganto: "Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyadoo la tashanaysa dawlad goboleedyada iyo ciddii kale ee ay khusayso ayaa la idhi, ciddii kale eey khusayso waa in ay dejinayaan siyaasad dhulka qaranka oo lagu hormarinayo maamulka dhulka si joogto ah".

- **Qodobka 42 (5) Xarafka (A) :**Dad badan baa ka hadlay, waxa weeye dhawritaanka iyo ilaalinta, labadaas erey way is kaabayaan waa dhawridda iyo Ilaalinta markaa waxaan isleeyahay way ku filantahay, in la dhawro ama la ilaaliyo labada mid uun in la qaato ayaan dhihi lahaa, waa aragtidayda.

- **Qodobka 42 (5) Xarafka (G):** In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ganacsiga ee dhulka si loo ilaaliyo xuquuqda mulkiyadda dhulka yaryar, suuqyada iyo meheradaha , meelaha khaaska ah ee lagu ganacsado waxyaalo badan baa ka jira oo ah, adduunyadu sidaad ogtihiin goobaha ganacsigu waxa loo sameeyaa "distance" inay isku jiraan, qaab ayaa jira, haddii uu halkan ka furanyahay suuqan "pharmacy" waxa la rabaa pharmacy-ga labaad inuu meel kale ku cayimanyahay; laakiin, shaqooyinkaas waxa iska leh dawladaha hoose ayaan isleeyahay ama maamul goboleed ha ahaado ama dawladda federaalka ha ahaatee, waxaad arkaysaa 200 oo mitir oo intaas oo "business' oo isku nooc ah ay jiraan, intaas runtii waxa loo baahanyahay "regulation" ayaa loo baahanyahay iyo inay jiraan "distance" ay isku jiri karaan.

- **Qodobka 42(8):** Waxa la idhi dawladda federaalka oo kaliya ayaa fasixi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaalka caariya ku haysasho, **caariyadaasu** waa soo noqnoqotay iyadana waxaan leenahay kalmad munaasib ah halagu baddalo.

- **Qodobka 43aad:** Waxa weeye, waxaa jira Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka ee heer Qaran, kaasoo uu xeer kusoo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, qodobka aad baa looga hadlay, xildhibaanno badan oo xildhibaannada labada aqalba ah aad bay uga hadleen, marka u horaysa dhulku sidiisaba, inagu hadda waxaan leenahay waa dawlad federaal ah, oo dawladii federaalka ahayd, oo ay jiraan maamul goboleedyo iyaguna xuquuqdooda leh, marka waxaan aniga qabaa. Dhulku sidiisaba wuxuu u qaybsanyahay labo: Dhul waa "municipality" oo waxa weeyi dawladaha hoose ayaa ku shaqo leh, ama dawlada federaalka ha noqoto ama dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka ha noqoto, wixii dawlad "municipalo" ah waxa iska leh dawladaha hoose. Dhulna waa "damonial" oo waxa iska leh dawladda dhexe ayaa iska leh, marka waxaan isleeyahay waxa aad iyo aad u habboonaan lahayd dhulka in la kala qaadqaado, dhul "minucipal" ah dadka shacabku ku dhaqmaan iyo dhul "demanial" ah iyo dhul kayd ah oo dawladdu ay leedahay.

- Marka runtii inaga hadda dhulkii isticmaalka sida loo isticmaalayo, saaxiibbo badan waxay ka hadleen, dhulka sideedaba haddii aysan dawladu iyadu lahayn maamulkiisa, haddii uu shacab gacanta u galo waxba hagaagi maayaan, runtii inaga hadda qarnigan inagoo ku jirna wax "recreation" meelo ah ama lagu nasto ama jardiino ah oo dalkeena ah ma jiraan, carruurteeni yaryarka, dhallinyarada ahayd laamigay banooniga ku ciyaarayaan, iyaga iyo baabuurtii ayaa laamiga isku haysta sidaas darteed, dawladdu waxa weeyi ama dawladda federaalka ha noqoto ama dawlad goboleedyada iyaga ruuxoodu arrintaas la qaba ha noqotee in ay jiraan meelo "recreation" ah oo loogu talo galay nasashada iyo mid lagu nasto.

  Dhulka kaydka ah oo ah dhulka dawladda waxa weeyi, dawladu inay maamusho oo shacabkuna xaq uleeyahay inuu helo dhul uu qofku dego oo lagu qiyaasi karo qofku muxuu degi karaa, ma 20/20, laakiin hadda sida ay tahay in magaalooyin yacni "miles" uu qof shaqsi ah dego oo dawladdiina marti ka tahay waa dhibaato. Maanta haddii inaga uu "investors" inoo imaadaan wadankeena ama ha noqoto Jamhuuriyada Federaalka ama gobollada intaa hadba ha noqotee, dawladdu awood uma laha inay "investors" kaas dhul siiso, sababtu waxa weeyi dhulkii dad buu gacanta uugu jiraa, marka dawladdu

inay dhulkaas gacanta kusoo celiso horta waa muhiim weeyi oo ay lahaanshaha dhulka yeelato waa muhiim weeyi.

Guddigan Qaranka ee Madaxbanaan, horta sideedaba inaga haddaad aragto guddi yacni dhaqan ahaan arrintaas guddi baa loo saaray hadaad maqasho, waa arrin aan la rabin inay shaqayso, markaa waxaan leenahay guddigaan madaxbanaan ee hadda meesha lagu soo qoray waxaan anigu fikirkayga qabaa in meesha laga saaro, sababtu waxa weeyi, labadii hay'adood oo shaqadaan iska lahaa way joogaan, ama dadku iyaga haka imaadeen, engineeradii, aqoonyahanadii iyo farsamo yaqaanadii kulli waxay joogaan Dawladda Hoose iyo Wasaaradda Hawlaha Guud ayay joogaan. Hadday cidi ka imanayso, marka waxaan dhihi lahaa iyagana hawshooda haloo daayo.

Sideedaba waxaad mooddaa, hadda wasaaradihii inay furfurmayaan, hadda waxa la idhi hay'ado ayaa la abuurayaa, macdanta, hebeloow hebeloow, aduu dhowr haayadood, aaway wasaaradihii. Hay'adahaas hadda la rabo in la abuuro waa "department"ka tirsan wasaarad, marka intii hadda la abuuri lahaa yacni "job creation" yacni culays siyaado ah iyo "budget" siyaado ah iyo cid siyaado ah, dadka dawladda u shaqeeya oo "public service" ka u ah iyaga ayaa runtii arrintaa "cover" garayn kara, wasaaradihiina runtii waan la soconaa, wasaaradihii waa la rifay, "competence" goodii intaasoo hay'adood ayaa laga dhigay markaasa shaqadiina aanay socon karayn, hay'adii waxa leeyahay wasaaraddii korjoogto ayay ku leedahay, marka sidaasi si soconaysa maaha anigu waxaan soojeedin lahaa: wasaaradaha hay'adahaan midwalba waxay ka tirsantahay wasaarad waana "departements" marka "departements" kaas haloo daayo shaqaduna marka sidaasay sax ku tahay, wasaaradii in "departements" kaas mid walba ay iyadu "control" ay ku leedahay, laakiin arintaan guddiga qaran anigu waxaan qabaa meesha kuma jiro, saaxiibo badana waa sheegeen in la dhaafo waxaan kusoo gabaggabaynayaa

- **Qodobka 42 (5)(g):** Inuu u kuurgalo kana mas'uul noqdo korjoogtaynta dejinta qorshaha isticmaalka dhulka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, runtii waxa weeyi guddi ama hay'ad korjoogto ku leh anigu ma qabo arrintaas waxaanan qabaa in aanay meesha ku jirin, waxa la idhi hay'adu waxay ururinaysaa dakhli ururinta ayaa la idhi guddiga, guddigu wuxuu yeelan karaa "job description", waar dakhli ururinta aaway wasaaraddii maaliyaddu aaway? marka waxaan leeyahay guddiga arrimahaas dib haloogu laabto, wasaaradaha laga dhex abuurayo hay'adaha oo shaqadoodii "competence" qolo kale ka qaadanaysana waxaan soojeedinayaa in laga daayo. Aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

8) **Xil. Mohamed Muhumed Mohamed:**

Bismillaahi Raxmaani raxiim, Alxamdullahi Rabil Caalamiin wabihi nastaciinu calaa umuuri dunyaa wa diin, Guddoonka iyo habdhawrayaashu waa mahadsanyihiin. Insha Allahu waxaan rabaa "chapterka" 3aad waa sida xildhibaan hore uu sheegay saaxiibkay Sheekh Shariif, waa "chapter" aad muhiim u ah, oo muhiim noogu ah maaddaama aan "chapter" kii 1aad aan kusoo caddaynay cidda aynu nahay iyo dhulkayaga meesha uu ku yaallo "east africa" inuu ku yaallo, cabirkiisa iyo jihooyinkiisa aan soo sheegnay, dadka soomaaliyeed cidda ay yihiin aynu caddaynay, dhulkaan Illahay ina siiyay sidaan u kala lahaan lahayn inaynu shuruuc u samaysanana aad bay muhiim u tahay, weliba aniga waxaan muhiim u arkaa meeshii uugu badnaydee aan Soomaaliya ku noolaa waxay ahayd Lafoole, markaa anigoo reer Lafoole ah oo reer Afgooye ah in la yiraahdo deegaankaas waxba kuma lihid, orod Kismaayo aad sax ma aha, marka soomaalidu inay ogaato qofku dhulka uu

leeyahay inay tahay dhulka deegaan ahaan uu u leeyahay ama uu ku ganacsanayo ama beerta uu ku leeyahay ee sharciyan uu u haysto, markaa arrintaa inaynu habaynno waa sax.

Qodobka soo socdana aynu ku heshiinno siyaasadda, oo qofka aan la dhihin meeshaa iska soo sharax; laakiin, xildhibaan Kooshin uu iskasoo sharixi karo Degmada Garbahaarey, ana aan Burco iskasoo sharixi karo Insha Allah, taasna waa inaan siyaasadda ku jaangoynno.

- **Qodobka 42 (1):** Haddaan toos u galo waxaan rabay sixitaan yaroo horay loo soo sheegay, waxa la caddeeyay dhulka inay leeyihiin dadka shacabka soomaaliyeed; laakiin, in lagu daro maamuliddiisa iyo ilaalintiisana waxay mas'uul ka saarantahay dawladda Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobka 42 (5) (e) iyo (g) :**Waxaan qabaa, qorista dastuurka iyo soo saaridda xeerarku waa kala labo weeyi, waxyaabo marka xeerar u baahnaa oo fulin ah, sida isku qabsi dhuleed hadduu imaado, dastuurka in lagu qoro ma aha, labadaas xaraf ba marka meesha in laga saaro ayaan soojeedinayaa oo ah faqradda 5aad, muhiim ma aha labadaas xarafba ama xarafka (g) in la saxo haddii la doono oo sida hadda uu u qoranyahay si aan ahyn loo dhigo.

- **Qodobka (43), (44) iyo (45):** Oo intaba lagu soo siyaadiyay dastuurka hadda, waxaan qabaa inaysan muhiim ahayn meeshana laga saaro, dhibaatada soomaalida haysata waxa ka mid ah oo dastuurkii qabyada ahaa kamid ah, in inagoo hal madxwayne leh, laga dhigay 6 madaxwayne, oo ay nodeen 7 madaxwayne, shaqooyinkii cidda waajibaadka guud iska leh iyo kuwa aan lahayn la kala garan waayay, marka in wasaaradihii Hawlaha Guud, dawladihii hoose, wasaaraddii maaliyadda, wasaaradii Qorshaynta intaba shaqooyinkoodii laga dhex abuuro hay'ado iyo guddiyo sax ma aha, waxaa la rabaa in madaxa laysla wada galo, arrintaana dawladnimada sax uuma aha.

  Guddiyadaan la abuurayo iyo hay'adaha meesha inay ka baxaan weeyi oo laga saaro qodobka 43aad, 44aad iyo 45aad, iyo sidoo kaleeto qodobka 46aad faqraddiisa 2aad oo guddiga isaguna dhaqaalaha aruurinaya, marka intaba waxaan qabaa in meesha laga saaro oon guddiyadaas aan loo baahnayn, haddii aad wasaaradaha waddanka aad xog ogaal u tihiin tusaale ahaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, hay'adaha ka madaxbanaan wasaaradda oo haysta shaqooyinkooda waxa ka mid ah, Hay'adda Qaxootiga Qaranka, Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka, Hay'adda Khilaafaadka Dhulka, Hay'adda Soohdimaha iyo Xuduudaynta iyo hay'adaha kaleeto oo hadda la abuurayo ee Dhulka, waxaasoo hay'ado ah waa shaqooyinkii wasaaraddu ay lahayd weeyi, maaliyadda iyo ururinteeda dawlada soomaaliya oo saddex qaybood kala ah oo dawladii dhexe, dawlad goboleedkii iyo dawladihii hoose, intaba "system" maaliyadeed oo maaliyadda lagu aruuriyo, oo ay mas'uul ka tahay Wasaaradda Maaliyadda ayaa jira, oo markay heer Degmo joogto. Waxaa jira xoghayaha maaliyadda ee Degmada, waxaa jira khasnaji, waxaa jira xisaabiye, hoostaga wasaaradda maaliyadda ee heer maamul goboleed ilaa iyo heer dawlad dhexe imaanaya, sabab marka hay'ado dhaqaale uruuriya loo sameeyo wax meesha ku jira ma aha, hay'adahaas oo dhan meesha inay ka baxaan weeyi, shaqadana wasaaradihii lahaa loo daayo.

- **Qodobka 47 (4) :**Ee ka hadlaya ilaalinta deegaanka, siday u qorantahay xoogaha waxa ku jira isku dhex yaac ah, qodob meesha ka maqana iyo mid meesha laga saaray

labadaba waan kusoo siyaadin lahaa, ilaalinta, ereyga ilaalinta ee deegaanka ee meeshii biyaha ahayd bad lagu baddalay, in dib loogu celiyo biyihii, oo dee biyuhu kuwa badda oo kaliya ma aha oo wabiyadii iyo harrooyinkii ayaa jira, sidoo kale meelaha la wasakhaynayo ee la idhi dhulka iyo biyaha, waxa sidoo kale jirta hawada oo aad muhiim u ah, marka meelaha la ilaalinayo wawadaa ka mid ah waxaan marka u qoray qaab noocan ah:

- **Faqrada 4aad:** "Dawlada federaalka iyo Mmaamul goboleedyada hadba ay saamaynta waxyeelada deegaanku gaadhay waa inay qaadaan":
    - Talaabooyin degdeg ah oo lagu dhaqangelinayo nadiifinta wasakhda halista ku ah dhulka, biyaha iyo hawada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
    - Soo jeedin xeer ay xeeriyaan talaabooyin degdeg ah oo lagama maarmaan u ah kahor taga wasakhaynta Dhulka, Biyaha iyo Hawada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobka 47(4) (c):** Meesha in laga saaro weeyaan isagana, muhiim ma aha, maaddaama xarafka kaleeto faqrada 5aad la idhi Baarlamaanka Federaalka ayaa soo saaraya Xeer qeexaya mabaadi'da guud iyo sidii lagu ilaalin lahaa, marka xarafka (c) wax meesha ku jira ma aha meesha halaga saaro, sidoo kale faqradaan siday u qornayd waxay ahayd dhib dhacay kadaba tegidiisa ayay u qornayd, sababtoo ah hawada haddii lagu shubo sunta iyo waxaa halista, waxaas meesha in lagu shubo ayaad dee aduu qorshaynaysaa, marka marka horeba waxani waa dastuur la dajinayo, waxaad wax u dajinaysaa waxaagu inay nadiif kuu yihiin, haddii dhib imaadana wixii looga hortagi lahaa aad qodobadoodii samaynayso, markaa faqradaan qaabkii hore ee ay u qornayd sax maahayn, sidan ay u qorantahay ayaan usoo jeedinayaa. Wasalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu.

**9) Xil. Amina Hussein Ali:**

Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa, guddiga, dhammaantiin, xildhibaannada labada aqal, dhammaantiin waan idin salaamayaa, salaan ka bacdi war badan ma qabi.

- **Qodobka 44aad:** Ayaan ka hadlayaa xubnaha guddiga qaranka ee madaxabanaan ee dhulka, guddiga qaranka ee madaxabanaan ee dhulka wuxuu ka kooban yahaa la yidhi xubnaha soo socda: waxaad u malaysaa in guddigan, sharci, uu lagu soo daray in laga bixiyaan jeclahay maaddaama aan loo dhammayn uu guddigu uu noqon doono xubnaha haddaan 4.5 aan lagu qaybsan awoodda sida aan baarlamaanka ku fadhino, dawladana aan ku fadhino loo qaybinayn runtii waxaad u malaysaa inuu yahay wax ku darid ama uu u dhimi karo dastuurka oo hadda la rabo in la ansixiyo inuu meel u galidoono maaddaama dalku u yahay inuu dastuurka ku-meel-gaadhaka in laga bixin la rabo ama haloogu qaybiyo 4.5 ama meesha halaga bixiyo, aniga intaan usoo istaagay intaas waaye.

- Qodobka 45(1)(a), Tan kale xubnaha waxaa la yiri 40 jiraa layiri ani waxaan qabi lahaa in laga dhigo 30 jir iyo wixii ka weyn in laga dhigo, maaddaama dhalinyaradii ay waxbarteen oo jaamacado ka soo wada baxeen oo ay xogaha ururinayaan in laga dhigo waxaan jeclahay 30 wixii ka weyn. Salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu war badan ma qabine.

10) **Sen. Abdirisak Mohamed Osman:**

Salaamu alaykum waraxmatulaahi wabarakaatu, guddoonka, dhammaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, guddiga madaxabanaan iyo martidaba waan idin salaamayaa, salaanta muslimka ayaan idinku salaamayaa, salaan kaddib.

Cutubkani waa cutub muhiim u ah shacabka iyo dadka Soomaaliyeed, waxaan rajaynayaa in badanoo ka mida waa laga hadlay qodobadiisuna waa qodobbo kooban; laakiin, waxaad arkaysaa inuu yahay muhiimad aad iyo aad u weyn, waxaa laga hadlay waa dhulkii soomaaliyeed oo ka kooban berri iyo badba haddaan u guda galo:

- **Qodobka 42(1)** Sida ay xidhibaano faro badan ay soo gudbiyeen waxaan qabaa in dhammaan Jumhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxaa wada jir u leh shacabka soomaaliyeed oo ay mas'uul uga tahay Dawlada Federaalka Soomaaliya, qodobkaasi waxaan ku xoojinayaa, xildhibaannadii qabay sideedaa in qodobkaasi dib loogu daro Dawladda Federaalka Soomaaliya.

- **Qoqobka 43aad:** Oo ah qodobkaasi guud ahaan anuu waxaan qabaa in meesha laga saaro, sababtaasna wax weeyi, waxaad u malaysaa dhammaan dastuurka waxa aan ku soo kordhinay in uu yahayba in guddiyo iyo xeerar iyo nidaam cusub in loo samaynayo, dawladda federaalka soomaaliya; waxay ka koobnayd ilaa iyo xornimadii ilaa iyo maanta hay'addo dhisan hay'adahaasi oo ka kooban wasaarado, wakaalado, markaa meeshii hay'addahaasi shaqooyinkii loo xoojin lahaa, haddii aan samayno guddiyo madaxbanaan iyo guddiyo cusub anuu waxaan u arkaa inay tahay iska horimaad iyo khilaaaf, waxaan haddii arrimaha qaarkood loo baahan yahay in hay'addahaasi wax laga baddalo in ayada laftigeeda dhexdeeda wixii qaldan iyo wixii saxsan loo saaro dad khubaro ah oo laga hagaajiyo; lakiin, waxa weeyi guddi qaran oo madaxbanaan ee dhulka ah, wasaarad, een hay'adda dhul bixinta maxay qabanaysaa? maxay shacabka soomaaliyeed ugu matalaysaa heer dawlad federaalka ah? oo gobolka Banaadir iyo maamul goboleedyada oo dhan hay'addaa way leeyihiin, markaa anuu ma qabo in hadda dib loo furfuro waxaan hadda ummadda soomaaliyeed wax faa'iido ah aysan ugu jirin.

- **Qodobka 46 (3)** "Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga waa in uu sugaa, in dakhliga ka yimaadda hantida dabiiciga ay si caddaalad ah u wadaagaan dawladda federaalka ah iyo dawlad goboleedyada" waxaan ogsoonahay dalka waxaa mas'uul uga ah ururinta dakhliga wasaaradda maaliyadda, guddigan maxay qabanayaan? ma wasaaradda maaliyaddey hoos imaanayaan mise waa guddi madaxbanaan? anuu waxaan qabaa inaan guddigaas loo baahnayn wasaaradda maaliyaddana hawsheedana aan cid kale loo xilsaarin; waxayna noqonaysaa waxa weeyi in guddiyadii ay noqdaan guddiyo iska hor imaanaya oo ay dawladdii federaalka iyo dawladii xubnaha ka ahaa habayaraatee wax dana oo meeshaa ugu jiraa aysan jirin. Runtii qodobka 46 intaa ayaan ku soo koobayaa. Waxaanan inta badan la wadaagaa dhammaan xildhibaanadii iyo senatoradii soojeediyey wax-kabedelka inta badan cutubkan. Cutub kooban weeyi; laakiin, muhiimad gaara ayuu leeyahay. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin.

11) **Xil. Mohamud Abdulkadir Haaji Jeego:**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoonka labada aqal, xildhibaannada labada aqal, labada guddi, Guddiga madaxabannaan iyo Guddiga dib-u-eegista dastuurka, hawlwdeennada, saxaafadda, iyo ciidamada, amniga dhammaan waxaan idinku salaamayaa salaanta islamka, Assalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh. Salaan kaddib waxaan rabaa inaan xoogiyo, cutubkaan 3aad.

- **Qodobkiisa 42(1):** Ee dhulka, dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federalka waxaa wada jir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federalka Soomaalia, waxaan rabbaa in lagu daro waxaa mas'uul ka ah, dhulka dowladda Federaalkaa mas'uul ka ah.

- **Qodobka 44aad :** Guddiga qaranka madaxabannaan ee dhulka wuxuu ka kooban yahay, xubnaha soo socda: ee mid hal xubin oo mataleysa dawlad gobleedyadda, (b) xal xubin oo matalaaya gobolka Banaadir, iyo (c) oo ka imaanaya, dowladda Federaalka, xoogaa waaxaa mooddaa, xildhibaannada bandanna wey ka hadleen, in meeshaas aan loo dhammeen, wadankeenna markii la qeybsanaayo, xubnaha madaxabannaanna qaab qabiil bey ku imaan jireen, sida la ogyahay, dawlad gobleedyadda annaga, 0.5 ka, xubnaha ka yimaado, kama helaan wax walbo xagga ka imaanaya oo matalaad ah, marka sidaas darteed, isla qodobkaas farqaddiisa 2aad, wuxuu caddaynaa in guddiyadii madaxabannaanaa, qaabkii ku imaanaayeen, iyo "prosess" kii la marsiinaayay uu kan maraayo, haddana wuu ka duwanyahay, marka waxaan rabbaa in la caddeeyo, guddigana dib ugu laabtaan, si guddi madaxbannaan oo loo dhan yahay, oo cad, layaqaanno, xubnaha ka imaanaayo iyo sida loo qeyb sanaayo, in la caddeeyoo lagu soo daraa muhiim ah. Marka waad mahadsan tihiin, waxaan rabbaa, inaan arrinkaas, xubnaha guddiga madaxabannaan ee dhulka, lagu caddeeyo beelaha Soomaaliyeed**.**
  Salaamu caleykum.

12) **Xil. Abdulasis Mohamd Mohamud QAMBI:**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Guddoonka labada aqal, xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya. mudanayaal iyo marwooyni:

Cutubkaan, cutub qululub tiisa wata weeye, dastuurkana hadda intuu socday, waxaaba iiga baxday, cid la arkaa indho u gaar ah bey ku eegeysaa, ee dadka qaarbaa waxa weeye indho qabiil ku eegeya, qaar baa indho federaal ku soo akhrinaya, qaarbaa indho dan gaara ku fiirinaya, qof walbaana wuxuu rabba waxa uu qabay in uu meesha ka helo, ee leysmana waafajin karo intaasuba waa isdiidooyin badanoo is diidaya.

- **Qodobka 42aad:** Waxaan qabbaa waan boobsiinayaa, waqtiga aad buu u yaryahay, waxaan rabba qodobbo badan inaan taabtaabto, waxaan qabaan Alle kasokow ha lagu bilaabo, dhulka Ilaahey baa leh, asigaana ciddii uu raba dhaxal siiya, marka "Alle ka sokow, dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka waxaa wada jir u leh shacabka Jamhuuriyadda". qabaa ha laga dhiga halkaa, qodobkaa halkas baan kaga tagaya.

- Laba qodob oo isku dhow baa jira, isla laba faqradood, faqradda 3aad iyo faqradda 4aad waxey u dhigan tahay, faqradda 3aad: "dhulka waxaa lagu heysan karaa, laguna heysan karaa, si waafaqsan xeerarka dhaqangalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". Halkaanna waxaa ku qoran dhulka waxaa lagu heysan karaa, hadane markale, marka waxaan is leeyahay, waxaa loola jeedaa, dhulka waxaa loo heysan karaa baan is leeyahay

ama siiqadii ka duwan oo loo eegi karo haloo fiiriyo, qodobkaan faqraddiisa 5aad, ee "dhawraarinta" af Soomaali waxaa moodaa la sii qarribaayo inuu dastuurka ku qoran yahay, oo waxa weeye, waagii hore, qodobbada si ula kac ayaa iskugu qabsan jirnay, hadda mid keeni kartaba, in wax kasi in la waayo, "dhowraarin" kalmad aan af soomaali ku maqlay maaha, ee dad badanoo ila mida baarlamaanka ay fadhiyaan, xildhibaannada qaar baa leh, dhawristii la adkeeyay, dhawrista sideedey u adag tahay, dhawrista haloo daayan qabaa, hadday sidaa tahay.

- Ee qodobkaan 5aad faqraddiisa **(e)** waxaa ku qoran, in xal dagdag ah, oo maangal ah laga gaaro, haddiiba khilaafaadka kusaabsan, dhulka iyo mulkiyadda, hee **جملة مفيدة** maaha faqradaas, haddiiba, khilaafaadka ku saabsan dhulka iyo mulkiyadda, maxaa macnaha laga gaarayaa, xal gaara, haddiiba he, haddiiba ay dhacdo in khilaaf ka yimaado, miyaa laga wadaa? Iyadana waxaan qabaa af soomaaligaa halagu noqdo, af soomaali, af guriba ku qoroo, ninbaa hadda igu lahaa, Koonfur, haddiiba haddaad maqasho, ay dhacdo baa qorsoon. Haddiiba ay khilaafaad yimaaddo, wax qarsoon dastuurka yaanan naloogu qorinee, waxaannu fahmi karno, hala noogu qoro, haddiiba kalmadaas waxaan rabnaa iney meel ku dhammato.

- Ee faqraddiisa 6aad oo isla qodobka, isla qodobka 1aad, dawlad goboleedyadu waxey dajinayaan, siyaasad dhuleed, oo heerkooda ah, oo aan ka hor imaaneyn, siyaasadda qaranka dhulka, iyo xeerarka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waa meelaha aan leeyahay indho federaal dastuurka halagu eego, dawlad gobleedyadu siyaasadda dhulka wey ku kala duwanaan karaan, meelaha ay ku kala duwanaan karaan weeye dawladda federaalka, inta badan siyaasadda dhulka wey ku kala duwan yihiin, dalkasta oo federaal ahna, hala soo akhriyo, weliba dalalka intooda badan aad kasoo qorqorateen ma ahan dalal la'inoo barbar dhigi karo.

  Waa dalal ay ku nool yihiin qowmiyado kala duwan, oo dhulka kala xirta, oo dhulka, kala leh, oo waxa weeye, qowmiyadina aan oggoleyn, qoomiyad iney dhulkeeda u gudubto, marka siyaasdda dhulka waa lagu kala duwanan karaa, qodobkaa anugu ma qabo, inuu meesha ku jiro, waafaqsaan xukuumad federaalka in laga saaro weeye, siyaasadda xukuumadda federaalka wey khilaafi karaan oo siyaasad u gaaraba maamul gobleedku sameysan karaa.

- **Qodobka 42(7)**: Baaxadda dhulka iyo muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo, fasaxa isticmaalka dhulka, waxaa lagu soo saarayaa xeer, waan garanay hasa yeeshee, majiri karto qeyb ka middi, dhulka, badda ama hawada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo loo bixin karo, fasax isticmaal joogta ah, muwaaddiniinta waa qaadan karaa, muwaadiniintu dhulka milkiyad bey ku qaadan karaan, wey mulkin karaan, wey kala dhaxlayaan, waana wax la yaqaano shuruuc, diinteena islaamka ay qabto, waala oran karaa haddii dan guud loogu baahdo, oo waa loo magdhabayaa, wixii ka galay, dhulka kale meel kale laga siinayaa, laakiin isticmaal joogta ah, cidna lama siin karo, haddii shisheeyaha loola jeedana hala caddeeyo, haddii ay muwaaddiniinta qodobkaanu khuseeyana, isticmaal joogta ah halaga saaro, meesha, isticmaal joogto ah, dhulka waa loo qaadankaraa.

- **Qodobka 42(8):** Ayaa soo noqnoqotay, ee dawladda fedaraalka oo kaliya ayaa u fasixi karta qof ama hay'ad shisheeya, "isticmaal caariya", caariyadaas, fahamkeeda waaa naga

lumay, nin walbaa meeshuu rabaa la aaday, aniga intaan aqaano xaafadaha intii la joogo oo milixda la kala qaadanayo, qadaa la yiraahdaa, milixda oo kasoo qaaday xaafadaa diriskaa baa la dhahaa, markaa anagu xijeysataa nahay, dhir waxaa noo baxdaa kheyraad ahoo, beeyo iyo meydi lahoo, marka qof uu tabcan waayo dhirtaas, qof kaluu wuxu u siiyaa inuu saracdo, dhirteydii hebal baa sarcanaya baala yiraahdaa, xoola leydu waxey dhahaan maal, xoolihii hebel, maalbaa hebel loo siiyay, xoolahaasaa la dhahaa, laakiin caariya, kalmad banka unuga weeye, kalmad afka soomaaliga ku cusub weeye, kalmad macno badan sameyneysana ma aha, wixii la waafajin karo, doonfuul miyaa ahaa hadaayay qoladii beeraleyda aheydna waxey dhaheen, wixii la waafajinkaroo, leysla garan karoo, halagu qoro, iyadana halkaas taas ayaan ku dhaafayaa.

- Ee faqradaan la tirtiray oo dawladda federaalka ayadoo la tashaneysa, dawladaha xubinta ka ah, waxaa loo sababeeyay, in faqradda 6aad, oo aan lahaa hala saaro, iney isku, isku maxaa la yiraahdaye nuxur yihiin, isku nuxurna ma aha, taana maamul gobleedkaa gaar loo siiyay, tanna waxaa la leeyahay, waxaa sameynaaya, waa ayadoo la tashaneyso siyaasad wadajir la sameynaya, marka faqradaan haddii la sameyn karin, oo tan kale intii ay jiri laheyd, tanaa ka habboon baan aminsanahay.

- **Qodobka 43aad:** Oo guddiga qaranka ka hadlaaya, war nimanyahow, dastuurka yeynan u ekeysiinin xeer dawladda hoose, dastuurkaan, dastuurkii ummadda soomaaliyeed lagu dhisi lahaa weeye, dastuurka ma qabato shaqadii dawladda hoose, guddi haloo saaro lagu qoro. Guddigan wax macnoo halkaan ugu jirta ma jirtoh, aniga guddigaan si "good" waxaan qabaa, dawladnimada soomaaliyuu kala dhantaalayaa waxa uu shaki galinayaa, in u jeeddo gaar laga leeyahay, dhul lagu boobo la rabo waxa weeye, shaqada meesha ugu qoran shaqo macno leh ma aha, ummadda soomaaliyeed, kharash intaa le'eg, guddi hala saaro, shaqaala ha qorto, "budget" haloogu daro, ma qaadi karto ummadda culeysan qaadi karin yaan la saarin, nolosheena inaan beekhaamino oon isla ekeysiinan rabnaa, cidkasto dastuur qoroto, ahdaafdii dastuur keeda aad soo akhridaan, aad kusoo dareysaan keena, dastuur 700 "page" noo qori doontaan sida muuqata, inama qaadi karno, yaanan nala wareerin, meesha ay inoo joogtay, ha'inoo joogtee, qodobkaan siduu u dhan yahay meesha hay naloo saaro, ee waxa weeye xilibaannada qaarbaa yiri 4.5 halagu keeno, qaar baa waxey leeyihiin maamul goboleedyadda hala caddeeyo, tirada maamul gobleedka ma cadda, tirada xubnuhu ma cadda, waxaa soo dhan dastuurkaan ceyb buu u yeelayaa, waxaa kaloo jira Soomaaliland maxaa laga yeelaya? maamul gobleed baa loo ictibaariyay, maloo aamusay?

  Dastuurka waxaan ku wadnaa "tacdiilkii", yacni in mudda ineyna imaan, in mar labaad "Amendment" lagu sameeyo, marka waaxaan rabnaa, wax waafaqsan "mustawaha" dadkeenna, in aan u qorno, wax jiritaankeenna ka turjumaaya iyo wadajirkooda inaan qornaan rabnaa, sidaa daraadeed waxaan qabaa, qodobkaan xaaraan maqdac weeye, halaga saaro meesha.

- **Qodobka 46aad:** Kheyraad ka hadlaaya, Qodobka 46(2) hay'adaha lagu dhisay, hay'adaha la dhisayna si mugdiyaa loo dhisay, dastuurka mugdi wax kuma dhiso, hay'adahan la dhisay ma qabtaa in laga saaro, waxa weeye hay'ado meesha la rabo lala aadi karo, sidii la rabo loo jiidjiidan karo. Maamul gobleedyada isku qabsan karaan, waxaa loo cuskaday heshiiskii 2018kii, siyaasiin baa halkaan joogta, dawladda iyo arrimaha siyaasadeed la socdaa jooga, waxaaad ogtihiin heshiiskaan 2019kii muran ka dhashay, in layiri madaxweyneyaal maamul gobleed aan joogin, wey joogaan ay diideen,

oo qaarkood weli ay xilka joogaan, hashiiska lagu murmaayay dastuur saldhig uma noqon karo, dastuurka waxaa saldhig u noqon karo wax heshiis lagu yahay, heshiiska 2018kii ma jiro heshiis la yiraaado, oo lagu mideysan yahay, oo ummadda soomaaliyeed saldhig u noqon kara. Sidaa daraadeed, waxa weeye, "danbuhuu aqbar in cudrihii" weeye, waxa meesha lagu sababeystay ka fool xun waxa meesha ku qoran, iyada waxaan qabaa, hay'adahaan sidey u dhan yihiin meesha hala saaro.

**Qodobka 46(3):** Isla qodobkaan, guddi baa ku qoran, guddigaa xilibaannadaan kala mid ahay, guddigaasi shaqada Wasaaradda Maaliyadda, "finance system" buu wax yeelayaa, iyadana dib haloogu noqdo.

- **Qodobka 47(3) :**Waxey leedahay dawladda federaalka iyo dawlad gobleedyada, waa in ay ilaalinayaan, nidaamka ka faa'ideysiga dhulkuu wax u dhimeyn, af Soomaali ma aha, nidaamka ka faa'iideysiga dhulkuu wax u dhimeyn, marka af Soomaaligaasi dib haloogu noqdo.
- **Qodobka 47(3)(b):** Waxey leedahay, waa in ay u howlgalaan siidii dalka loo gaarsiinlahaa, inuu noqdo deegaan dhulkiisa doogeysan yahay, oo dhirtuna ku hagoogan tahay, waxaad mooddaa meelihii "Novel" aan ku sheegi jiray weeye, deegaan waxa weeye dhulkiisa oo doogeysan yahay dhirtuna hagoogan tahay, laba erey, oo labada erey aanu macno buuran sameyneynin weeye iyaduna dib haloogu noqdo leeyahay.

- **Qodobka 47(4)(a):** Waxey dhiirrogalineysaa, dalkeena sun lagu shubo, waxey dhiirrgalineysaa, waxay leedahay, dawladda federaalka iyo dawlad gobleedka hadba ay saameynta wax yeelada deegaanku gaarto, waa in ay qaadaan tallaabooyin dagdag oo lagu dabargoynayo, nadiifinta wasakhda iyo haraaga suntan halista ah, meeshaan waxaa ku qoran inaynu ka shaqeyneyno inaynu oggolnahay, in deegaankeena sun lagu shubo.

- **Qododka 47(4)(c):** Ugu danbeeya, asaga waxaan adkeynayaa in ciqaabta la adkeeyo meeshaan ku qoran, in ay qaadaan taalllabooyiinka lagama maarmaanka u ah, in laga qaado magdhow kaliyaa ku qoran; laakiin, ciqaab intaa ka adag, la xuso ama xeer lagu ciqaabayo in loo sameeyo in la xuso, baan ayadana codsanayaa. Salaamu caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

13) **Sen. Saynab Ismail Mohamed:**

Waxaan salaamaya Guddoonka iyo dhammaan xildhibaanada sharafta leh Asalaamu Caleykun.

- **Qodobka 42(1)** Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Halkaa waxan ku xoojin lahaa waxaa mas'uul ka ah dowladda ilaalineysa oo maamuleysa, sababtoo ah haddaan qofka dhulka haddaan dawladda hoose siin ama "damanyaalo" ama "minishiibalo" qof iskama qaadan karo dhul ku qabso ku qadimeysi ma ahan, taasa moodda in la sharciyeenayo marka waxan leeyahay inee dawladda mas'uuliyada dhulka iyo guryaha iyo wax walba ayada qaado lagalana xisaabtamo inay dhacdo.

  Sababta aan u lee yahay waxaa waaye waxeynu soo marnay een weynu burburnay, Soomaaliya hadan nahay annu waxa maalin walba na horyaalo "Cases" guryo iyo dhul

dad lahaayen oo mulkiyadooda saxan heystaan oo ay qeybtooda haystaan dadka mas'uuliyinta ugu waaweyn marka taasa uleeyahay.

- **Qodobka 42(5)(a):** Kalmaddan lagu soo celceliyay ee dhowraarista, waxan u deyn lahaa dhawrista; sababto ah anago baarlamaanki ah ayaa maalin walba ku soo noqnoqonay ayeenu kalmadaas haddana lagu soo celceliyay, marka dhawrista inay noqoto ayaaba dhawrista ugu adag dhawrista iliilinta deeganka arinkaas.

- **Qodobka 43aad:** Guddiga aniga waan taagerayaa in la sameeyo guddigaas, sababta aan u taageerayo waxay tahay; guddigaas oo ka kooban tirada intaas la'eg haddii la madaxabaneysiiyo oo laga dhigo guddi madaxbannaan waxaa qabaa inay wax ka qaban karan dadka mas'uuliyeenta ah iyo dadka dhulka iyo guryaha iyo waxyaalo faro badan oo sodonkii sano burburka lagu jiray xoogga ku qaatay inay wax un ka qaban karaan baan umaleenayaa. Waxan ku dari lahaa magacooda: "Guddi Madaxabannaan oo Maamulka iyo Maareynta Xallinta Khilaafadka ee Dhulalka".

- **Qodobka 43(2)(e):** In Guddigu uu iskiisa oo ubaari karo. Haddana waxa halkaan ku qoran in uu hay'adaha u xilsaaran xallinta khilaafaadka dhulka kala taliyo marka waxan oran laha, inuu mas'uul ka noqdo xallinta khilaafadka ee dhulalka iyo guryaha ee khilaafadka ka taagan yahay. Inuu dib-u-eegis ku sameeyo dhammaan dhulalkii lagu baxshay kirada ama ergada, waxa jiro dhulal badan "strategic" ah oo aan dawlad kale ka suuragasheen in meelahas laga bixiyo, maaddaama aan Guddoomiyaha Guddiga Kheyradka Aqalka Sare aan ahay na soo martay inaan haynin heshiiskooda oo qof ku keena aaba jirin, sida Hotelka Decale oo kale heshiiski iyo wixii lagu heshiiyay iyo mudda midna lama haayo. Taasna waxee ceeb ku tahay dawladda, marka in la helo guddi guud oo arimahaas arurisa heshiisyadana dib loo galo oo ay noqoto wax laga war qabo.

- **Qodobka 45(1)(d):** Guddiga waxan oran lahaa halkaas shan iyo toban sano halkas guddiga shan sano oo khibrad ah inuu yeesho sabab ah nolasha yaa qofka wax barto qofka ma ahan inuu xafiis kaliya inuu ka shaqeeyo. bay'adda aad ku nooshay ayada ayaa khibrad kugu filan afartan sano waa inuu jiro waa qofka halka uu majuurka ku yahay marka taas waan xoojinayaa khibrada shan sano ayaan ka dhigi lahaa haddii Alle idmo.

  **Qodobka 46(2):** Halkaan guddiga la sameeyay macno badan ayaan u arkaa anigu ee Hay'adda Macdanta, Hay'adda Biyaha; iyo Hay'adda Betroolka ayagoo isku dhan caalamka wadan kasto markaa aragtid waxay leeyhiin hay'adda la yiraahdo "environmental impact assessment" taas u xilsaaran inay waddanka ka ilaaliso khasimada sida hotellada waa weyn. Waxa jira warshada isbuunyada soo saaro isbunyadas haraadigeeda waa sun kiimika ah oo meeshe ku qubato iyo meesha ay gaarto aan boqol sanoo danbo xitaa aan xooluhu daaqeynin, marka waxaan oran laha hay'adda oo isku jirta marka la qodaya batroolka marka la qodayo macdanta hadda maalin walba waxa aragtan magaalo aan ka soojeedo milxo la yiraahdo dhallinyarada qodaneysa maalin aan lagu dhimanin way yartahay, waxa keenay ma jirto wax fiiriya godad ayaa la iska qoday qofkasto waxuu raacayada ciriqaas oo maalin dahab ka helay ama wax ka helay.

Marka waxay u baahantahay hay'adda ilaaliso deeganka ama guri halaga dhiso ama hotel halaga sameeyo ama kaalin shidaal laga hala sameenayo aniga muhiimad ayaan u arkaa, hay'adda wasaaradda ka madaxbanan oo ilaaliso "environmental" ama dhibaatooyinka soo gaarayan iyo xitaa mesha wax laga dhisanaayo dabaq intee leg ayaa laga dhisi karaa? Dhulku maqaadi karaa? waxyaalo nuucas ah marka muhiimdas deegan ahaaned ayaa igu jirto. Hishiiskan beydhabo maaddaama uu ku taagan yahay lagu dhammeen ma qabo in dastuurku inuu "reference" ku sameeyo ama uu cuskado**.**

- **Qodaobka 47(3)** :Dawladda Federaalka iyo Dawlad goboleedyadu waa in ay Ilaalinayaan nidaamka ka faa'iideysiga dhulku wax u dhimayn. Waxa aan ka hadleyno ama waxa aan qoreyno oo duljoogna ma ahan xeerar waa dastuurka. Dastuurka waxa la rabaa inuu qeexo kalmada kooban oo mabaadii ah mabaadii'das, hadhow ay yeeshan xeerar kaamilaayo sida xeerka deeganka oo dhawan labada aqal ansixiyeen inay kuwaas u noqdan "reference", laakiin, haddii asigii kalmada xitaa uu iyo aa way ila qaribantahay mar horena waan xusay hala iga raalli ahaado waxa loo bahan yahay kalmado kooban oo aaney aheen asiga action plan ka inuu ku qornaado dastuurka ma ahan laakiin dastuurku inuu jihadii sheego aye aheed inay u howlgalaan waxaas oo dhan waxa u arka inu inay dhaxgaleen siduu xeerku qori laha ama siyaasadda lagu qori laha inay ayagu dhaxgaleen shacabku ku wacyigaliyaan

Maxaa dastuur wacyi galin laagu qorayaa? ma dastuur ayaa ah inuu wacyigalinta qoro? waa maya, wacyigalinta iyo waxyaabahas oo shaqada ah waxa iska leh xeerka wasaaradda deeganka ay sameysay ama haya'adda aan hadda ka shaqeyno ay sameyso ama siyaasada ay ku ilaalinaayan deeganka ayada ayaa iska leh, halkasan waxa ku qoran ilaaliyan wali "activities" ayaa socdaan ilaaliyan ugaarta shisheeye iyo nafleyda waxaas dhan anigu waxan qabi lahaa in qodob koobayo uu jiro xeerarkana ay ku qornaadan marba, haddii la xusay in la ilaaliyo.

Soomaaliyo waxay laheed labo wabi abiyadana waa aragtan annaga waxa noo yimaadda dhibaato farabadan inay buuxsaman in khashin lagu guro in si xun loo isticmaalo qof walba meesha soo martay inuu ka jabsado. Ilaalinta wabiyada Shabeelle iyo Jubba in lagu xuso ay tahay hanti qaran oo guud waan qabi lahaa. Ka taxadaraan, kana hortagaan waxyeelada waxas waxa qeexaya siyaasada ka hortaga in loo sameeyo sidan aan hadda ku jirno laba sano ama saddaxsano inay duufan na qaado laba sano ama saddax sano ay abaaro ku jirno in la leeyahay siyaasdda ka hortagga arrimahaas waa siyaasad; laakin, dastuurku inuu qeexo ilama saxsano.

Halkan maareynta wasakhda waxa xaqiiqo ah aan la iska idha tiri karin. Soomaaliya, inagu soo tuuro ama la keeno maalin walba haaman gidaaman oo waxa ku jira iyo waxay yahiin toonaba la aqoon. Marka ayadoo aan ognahay in la keeno maareyntaas wasakhda waxay u baahantahay ayada laftirkeedo, in siyaasad la helo. Horta halkee ka imaada wasakhdaasi? Yaa keeno? Waxaan qaba anigu wasaaraddu, iney shaqo u taallo tahay inee "assessment" guud sameyso oo waxaas la soo xaqiijiyo lana ogaado markaas suntan meesha ka timid markaasa waxa iman kara magdhaw iyo waxii loo sheeganayo intaas ku soo gabaggabeenayan waxan oo dhan waxa qeexaya xeerka deegan oo dhawaan la sameeye ayaa qeexaya.

14) **Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur:**

Guddoonka sharafta leh xildhibaannada dhammaantiina Asalaamu Caleykum. Waxan u maleenaya mowduucan wax badan ayaa aad looga hadlay cutubkan sida loo sheegayna waa cutub runtii kooban; laakiin, macnaha uu xanbaarsanyahay iyo muhiimadda uu leeyahay ay aad iyo aad u balaarantahay, inta aan dhegeystay xildhibaanadii u danbeeyay runtii aad baan u waafaqsnahay qodobbada laga hadlay runtii wax badan oo aan oran laha xildhiban kii iga horeeyay ayaa wax ka sheegay meela yaryar yaan rabay inaa kaga noqdo; laakiin, si guud u tilmaamo.

Waxaa moodaa cutubkaan luqadda uu ku qoran yahay ma ahan luqad qaanuuni ah luqad af Soomaali bisna ma runti ahan oo dastuur lagu qoro marka waxa oran laga oo guddiga waxan usoo jeedinaya inee dib u fiirshan ama jumlaha aan dhammaystirneen ama kalmadaha meesha ku qoran wax badan oo ka mid ah sida la tilmaamay ku habbooneyn ama ereyada la adegsaday ayaa ereyo qaanuuni ka turjumaya oo mustawaha runti dastuurka aan ahayn, marka ani waxan oran laha haloo tala badsado oo aad haloo lafa guro erayada inay yahiin kuwa kookooban islamarkaana macnaha la doonaya ka turjumaya.

- **Qodobka 42** :Sida la tilmaaya waxa soo noqotay haysashada labo jeer bay ku soo noqotay isla markaana lagu gabagabeyay sida uu xeer oo markaas qeexayo xeerka Jamhuuriyadda. Waxan isleeyahay labadas farqadood waa la iswaafajin kara uma baahno in lagu soo celceliyo maxa yeelay ku noqnoqoshada badan oo isku macnaha ah runtii waxee macno tireysaa dastuurka. Marka waxan oranaha haysashada iyo lahaanshaha adeegsiga iyo maamulka si caddaalad ah oo ku dhisan ama u agaasiman si wax tar soo saar oo waara leh, masalan "waxtar soo saar leh oo waxyeela u geysaneynin deeganka" in la yiraahdo oo waafaqsan sharciya iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Marka labada waa la is waa fajinkara si kooban ayaa loo qorayo aya la is waafajinkaraa.

- **Qodobka 42(5)(a):** Ereyga dhowraarinta waan la qabaa waxa weeyan sideedaba dastuurka ereyo aan micnahooda la garan karin lama qoro, waa in lagu qoraa ereyo micnahooda aad u cadyahay oo dadka badankiisa garankara oo lawada fahmi karo waa iney noqdan haddii "even scientific" yahiin oo kalmadda cilmibaaris yahiin waa inay kalmad la adeegsadaa ay dadku inta badan isla fahmi karan marka haday tahay dhowris haday tahay daryeelis haday tahay wax u dhigmo waxyaabahas waa in runtii lagu qoraa.

- Masalan **(a)** dhowrsita noolaha deeganka oo u nugul saameynta "negative" ah marka sida loo dhigo saameynta taban u nugul iyo dheellitirka deeganka iyo danta guud waxyaabahas waa in laga hadlo waa inay noqotaa la ilaalinayo noolaha, nafleyda, deeganka ku nool oo u nugul saameynta waxyaabana ka soo gaaraya isticmaalka iyo dhawrista deeganka iyo danta guud marka arrimahaas in la isku qodbo ayey u baahantahay micno gaar ah in loo sameeyo.

- Dabcan dhulku waxuu ka mid yahay meela runtii ugu dhibka badan leh ayadoo illaahey kheyraad badan iyo dhul baaxad leh ina siiyay oo aan markas bar "hector" ama bar "kilometer" la yiraahdo dadyowga ugu badan oo dhulka ugu badan heli karo aan nahay, dhulku wuu naga badan yahay haddana waxa moodda inuu dhulku cariiri nagu yahay oo cariiri isku galinay magaalooyinkeenna ka mid ah beeraha iyo dhulka aan beeraha ka sameysana ka mid ah xitaa deeganka iyo buuraha yan isku qansana inagoo dhulkiiba

naga badan yahay. Taas waxee ubaahantahay in maamul loo sameeyo dhulka haddii markas la hagaajiyo dhulku inaga badan marka dhulka in dawlddu la haato oo shacabka kawada dhaxeeyo isla markaana ciddan fasax u haysan oo isticmaal loo jideeyay waa inuu noqda isticmaal loo siiyo; laakin, markuu dhulku ganacsi noqdo oo boqol "hector" aan iska haysan karo weligeyga ama labo boqol oo "hector" aan iska haysan karo intaan doono oo la sugayo inuu qiimaha ii kordho runtii waxey noqoneysaa cariiri inaa is galineyno la midtahay.

- Dhulka qaabka lagu yeesho iyo isticmaalkiisa inuu ku xiranyahay in la is waafajiyo oo qofka aan yeelan karin dhul ama an dhisanaynin ama aan isticmaaleynin uuna qiima la sugin oo dallacmi doono oo mudda kaddib iibsado marka arrimahaas haddii laga taxadiro waxay noqoneysaa runtii inaynu dhulka maamulno ayay markaas noqoneysa.

- Arimaha Qodobada 43aad iyo 44aad ee guddiga waa inaa isku waafaqnaa inuu guddiga noqdo "commission" sare oo qaran ah ama guddi farsamo oo inta halkaan laga raro oo xeerka dhulka lagu qoro oo guddi farsamo ah oo la taliyo dowladda iyo ciddi ku shaqada leh dhulka la taliso oo guddi farsamo ah uu noqdo halkaan laga saaro ama inuu noqdo guddi "commission" qaran ah oo markas asigana inta halkaan laga baddalo oo cutubka tobanaad oo guddiyada ka hadlaayo. Guddiyada madaxabanan waxa ka hadlaayo cutubka tobanaad marka qaabka lagu keenayo iyo sharuudaha uu ku imaanayo oo dhan halkaas lagu qeexayaa marka ama "commission" kan in cutubka tobanaad loo raro oo "commission" laga dhiga ama guddi farsamo oo farsamo aahan kaliya loo isticmaalo oo xeerka dhulka lagu qeexidoono in laga dhigo labadaa mid inay noqdan ayay ila quruxbadan tahay ani oo "details" laga daayo halkan .

- **Qodobka 46(3)** Guddiga qoonda iyo aruurinta ayaa laga hadlay guddigas walba waa mid "polices" ku jira inkasto waliba dastuurka ka hadli karo wax soo socdana ka hadli karo; laakiin, guddigaas guddi weli la sameeyay ma ahan waana "commission" jiri doona oo markuu la yiraahdo "physical federation" la dhiso asiguna imaandoono "commission" qoondaynta dakhliga aruurintiisa oo noqdo markas asigana waxan oran laha halkaan kuma habboono meesha maaliyadda looga hadlaayo arrimaha maaliyadda marki la gaaro ee canshuur aruurinta laga hadlaayo oo haya'da "National Revenue Authority" laga hadlaayo asiga meelahas ayuu ku haboon yahay, waxan isleeyahay halkaan kuma haboono marka asiga runti dib in loo dhigo ayee ila haboon tahay oo halkan aan lagu soo dhaxtuurin guddiga ka hadalkiisa waa in arrimaha maaliyadda oo ku jiraa asigana saas ila muuqata kolee meelahas ayaan ku soo aruurun laha.

- **Qodobka 46(1)** Waxaa u baahan kaliya siiqada un la hagaajiyo oo maslan kalee siiqada guud ahan intii dib loo eego oo lagu dabo, masalan ka faa'iideysan kara qaab isticmaal waara leh oo wax u dhibeynin dabeecadda deegaanka haddii la yiraahdo asigaba waxbay runtii micno badan usameyneysaa, marka meelahas ayaan oran laha anigoo ku waafaqsan intii hore u tiri.

**15) Xil. Mohamed Abukar Abdi.**

Mahadsanid Guddomiye. Asalaamu Caleykum guddoonka iyo xildhibaannada sharafta leh waa salaamantahin. Salaan kaddib dabcan maalmo ayaa laga doodaaye, waxan umaleyna wax badan oo lagu dari doono ma lahan; laakiin, saaxibaday waxee hore usheegen baan anagana aadkeyn doona.

Dabcan Cutubkan waxuu ka hadlaaya, waa dhulka iyo hantida iyo deeganka dabcan dhulka muhiimadda uu u leeyahay dadka waa la dareemi karaa iyo dhibaatoyinka uu sabab oo waddankan ka jira, maanta dhibaatooyinka ugu waayn ee waddankan ka jira waxyaabaha sababay waxa ka mid ah, dhulalka la isku haysto iyo sharciyad fiican oo dhulkii loo haynin iyo sidoo kale awood sharci oo dadkii kala badbaadineyso aan jirin.

Waxa dareemi karta dadka Soomaaliyeed maalin walba dad badan, ayaa u dhintay waxyaabi micno daran meel waro laga qodanayo, meel baraag laga qodaayo oo la isku haysta la leeyahay, daaqii waa la isku haystaa, beerahii sidoo kale marka waxan rajeeneyna in ay noqoto waxyaabaha laga hadlaayo wax xal noqon doono arrimahas laga hadlaayo marka intaas laga gudbo.

- **Qobobka 42(1)** Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga dabcan dowladdu waa inay mas'uul ka noqotaa, dowladda laftirkeeda ayaa heerar kale leh, waxan codsan laha haddii dowlada kaliya lagu koobo hadhow waxa laga yaabaa inay isku qabsadan dowladda dhexe iyo dowlad goboleedka ama dowlad gobaledka iyo dowladihi hoose marka waxan dhahi laha oo soojeedin lahaa, in la dhaho xeerarka dawladeed inay mas'uul ka noqoto.

- **Qodobka 42(5)** Xukuumadda Federaalku, iyadoo la tashanaysa dawalad goboleedyada iyo ciddii kale oo ay khuseyso, marka cidda kale ay khuseyso oo lagala tashanaayo ayada laftirkeed, waxa fiicnaan laheed inay caddaato ma guddiga halkan lagu soo qoray ee la dhahay waa la dhisi doona misa meel kale wax ka imandoonan marka arrinta ayada caddaato ayaa fiicnaan laheed ama lagu reebo kale xukuumadda federaalku iyo dawalad goboleedyada kaliye.

- **Qodobka 42(5)(b)** In loo siman yahay fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'iideysiga waa, arrin ayada laftirkeeda moddooyinkii u danbeeyay taagneed hilitaanka dhululka ay dadku dagaan waxa la socotana, Muqdisho oo ah caasimadii ummaddan dadbadan oo Soomaaliyeed ay ku soo qaxeen oo si barakac ah ay maanta ku joogan, dhibaatooyinka ugu weyn oo haysto waa arrinta dhulka. Marka helitaankas oo muwaaddin kasto oo Soomaaliyeed inuu helo dhul uu ku noolaan karo oo deegan ahaan ugu noolaan karo inuu helo, waa arrin aad muhiim u ah marka in loo sinnaado ay tahay.

- Maalin waliba dadkaas waa la barakaciyaa meel baa lagu dhistaa, caligaroobyada geedaha ka jaran haddana wala sii barakaciyaa, marka dowladdu waa inuu mas'uuliyad iska saarta marka dastuurkan hadda aan ka gudubno qodobkan iyo cutubkaan dadkaas Soomaaliyeed waa inay kalsooni ah, in ay dawladoodi ka heli karan dhul ay dagaan oo ay ku noolaadan, maalin walba toban sano ka badan magaaladan degganyahiin meshii ay ka imaaden inaysan ku laaban karin ayaa suuragal ah marka taas ayadana waxa adkeyn laha xukumadda inay iska xilsaarto arrinkaas.

- **Qodabka 42(5)(f)** In la xaddido inta uu la ekaan karo dhulka qof ama shirkad ay milkiyad ahaan u yeelan karto. Waa qodob aad muhiim u ah waxa dareemi kartiin maanta shirkadaha misa shaqsiyaad Soomaaliyeed oo ganacsato ah waxay waddankan ka sameynayan oo qaar ka mid ah boqol konton kilometer iska xeranaayan, weliba si gaar sharkadaha ayaamahan danbe aad uwado dhulkii goballadii oo ugu daran yahay

gobalkan shabeelada hoose oo loo sii gudbay dhulkii deegankaas shirkaduhu ay ku xadgudbayan marka, in la xadido inta ay yeelan karan shaqsigu oo yeelan karo iyo shirkaddaha in la xadido ayadana muhiim waaya taasna saasa ka dhahi laha.

- **Qodabka 42(8)** Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaal caariya, waa sida la sheegaaye caariya kolee dabcan haddii rag saaxibadey ay ka sheegteen caariya hadda aniga shaqsiyan maba fahansani waxa loola jeedo, marka ereygaas waxan codsan laha oo soojeedin laha, in guddigu oo u raadiyo erey kaga habboon oo la fahmi karo taasna intaasa taasa ku adkeyn lahaa.

- **Qodobka 43aad:** Waxaa jiraya Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka oo heer Qaran ah, kaasoo uu xeer ku soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Dabcan qodobkan in badan waa laga hadlay saaxiibbo badana ka hadlay ana waa sii adkeynayaa, dabcan guddiyadu aad ayaa u tiro bateen maalin walba waxyaabaha aan sameyneeyo guddi ayaa leenahay. Waddanka markii hore nidaanka dawladnimada aad loo heerarkiisa la badiyay dawlad dhexe, dawlad gobaled iyo dawlad hoose oo awood badan ku leh arrimaha dhulalka ayaa jirto guddigan oo halkan lagu sheegay haddii aan shaqadiisa iyo waxuu qabanayo aan meesha lagu caddeynin, caqabad kaloo soo korortay ayuu noqon doona, isla sidoo kale waxu dhibaato ku noqona, "budget"-ka waddanka dhaqaalo badan ma jiro maalin waliba hadduu guddiyo la dhiso '*problem*' aya ka iman karo, waxaan dhihi hey'adda markii hore laha in loo adkeeyo.

- **Qodobka 44aad:** Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulku wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda: min hal xubin oo matalaya Dawlad Goboleed walba, hal xubin oo matalaya gobolka Banaadir; iyo Shan xubnood oo ka imaanaya Dawladda Federaalka. Waa sida la sheegay oo saaxiibbo badan ay ka hadleen, arrintaas horta ina loo baahneen ayaa ii muuqato oo meeshi halkaas ayaa looga hadlay oo guddigan laga maarmi karo dowladihi hoosa jira wasaaraddi Howlaha Guud meesha joogto "department" ka shaqeeyo oo arrinkaas ku filan leedahay taas in halkaas lagu ekeeyo, haddiba laga maarmi waayo ay dhacdo waxa kaliye ee heshiis lagu yahay oo ugu dhow waa shanta beelood marka nidaamkan la leeyahay dowlad gobaledyo ayaa min hal soo dirsanaayo ilama adeerayaalow, meesha halaga tiro halaga dhigo in shanta beeleed lagu qeybiyo guddigana toban halaga dhigo sida heshiiska lagu yahay waa intaa, laakin waxan heshiis lagu ahayn haddii aan halkan ku soo qorno haddana aan gudbino hadhow waxii ka imaado mas'uuliyadeeda qayb ayaan ka yeelaneyna, marka taasna midaas ayaan adkeyn lahaa.

- **Qodobka 46aad:** Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran waxaana looga faa'iideysanayaa qaab waara. Dabcan si siman oo caddaalad ah lagu soo daro ayan codsan lahaa, kheyraadkii waddankaan oo ummadda Soomaaliyeed wada leedahay si aysan hadhow u dhacin gobalkeyga ayaa laga soo saaray anaa iska leh si aysan udhacin, in lagu daro in dadka Soomaaliyeed ay u simanyahiin si caddaalad ahna loogu qaybiyo.

  **Qodobka 46(3):** Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga. Isla dakhliga sidoo kale waxuu tilmaamaya kheyraadka waddanka laga soo saaraayo sidii loo qaybsan lahaa, waa arrin aad muhiim u ah waxyaabaha khilaafadka ka dhici karaan ay suuragal tahay.

Waxan raba inaa halkan ku caddeeyo oo lagu qoro farqad kale oo sii faahfaahineyso ama xeer kale qaabka loo qaybsanaayo kheyraadka inay caddaato oo dastuurka lagu caddeeyo ama xeer barlamaanka uu soo saari doono ayaa caddeyndoono, nidaamka loo qeyb sanaayo waxi ka soo baxo kheyraadka dabiiciga ah arrintaas, guddiga inay fiiro gaar ah u yeeshan farqad noocas loo dhigaayo lagu soo kor dhiyo taas ayaan soojeedin lahaa. Aad ayaa umasanthiin.

**Diyaariyey:**

(1) Abdimajid Abdisalan Mohamoud
(2) Mustafe Mohamed Abdi
(3) Abdiwaaxid Iman Mohamed
(4) Ali Mohamed Rooble
(5) Yuusuf Abdilahi Hassan
(6) Abdiwahid Iman Mohamed
(7) Khalid Mohamed Deheye
(8) Mahad Abdikarim Jimale
(9) Dayah Ahmed Mohamed

**Tifaftiray:**

(1) Mohamed Deheye Ismail
(2) Ahmed Ali Mohamed
(3) Fahad Mohamed Omar

**Hubiyey:**

(1) Sen. Said Abdi Hussein
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

(2) Abdulkadir Mohamed Hassan
Xoghayaha Guud ee GMDHD

**Oggolaaday:**

(1) Avv. Burhan Aadan Cumar
Guddoomiyaha GMDHD.

(2) Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

KM-0, Degmada Shibis, Muqdisho – Soomaaliya

www.icric.gov.so